

CAREWELL SEIU 503

# Hagaha Tababarka iyo Dheefaha

Carewell SEIU503

2023

# Tusmooyinka


4 Horudhaca

10 MyCarewell503

13 Carina

16 Dheefaha DVE ee Carewell SEIU 504
Ilkaha
Aragga + Maqalka
Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (EAP)

23 Dheefta Wakhtiga Fasaxa ee Lacagta Leh (PTO)

30 Dheefta Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka

40 Tabbabarka

45 Soo Koobida Dheefaha

55 Sharciyada Xaq U Yeelashada

60 Ogeysiisyada

“ Waxay iiga dhiganayd farxada aduunka inaan awood inaan caawiyo dadka kale. Taasi waa mid ka mid ah ujeedooyinka aan nolosha ka leeyahay. Dheefooyin cajiib ah — wax kasta oo aad waligaa u baahan karto.

Aprilla M.

# Soo dhowow!

Daryeel bixiyeyaasha iyo hoggaanka midowga ee ka kooban guddiyada maamulka ee Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'ada Dheefaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon), Oregon Homecare Workers Supplemental Trust (Hay'ada Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga), iyo SEIU 503 Training Partnership (oo si guud loo yaqaano “Carewell SEIU 503”) ahaan, waxaan ognahay in daryeel bixiyeyaasha ay dadaal ku bixaan, maalin kasta, inay taageeraan oo daryeelaan dadka kale. Haddii aad tahay daryeel bixiye guri ama shaqaale taageero gaar ah bixiya ama adeege daryeel shakhsi, Carewell SEIU 503 ayaa halkan u joogta inay ku taageerto. Taasi waa sababta aan u diyaarinay Hagahan oo wata macluumaad muhiim ah oo ku saabsan qoyska tabbabarka iyo dheefaha, oo ay ku jiraan dheefaha ilkaha, aragga, barnaamijka caawimaadda shaqaalaha, magdhawyada khidmadaha ceymiska ee bil'laha ah iyo kharashyada uu qofka jaabkiisa ka bixiyo, iyo PTO-da ay sida adag u hanteen daryeel bixiyeyaasha SEIU 503 ee adiga oo kale. Adeegyadan waxaa loo bixiyaa si cad oo la isku halleyn karo si ay kaaga caawiyaan inay ku siiyaan xasilloonida, caafimaadka, xirfadaha, iyo tabbabarka aad u qalanto.

**Qoyska tabbabarka iyo dheefaha ee Carewell SEIU 503** ayaa sii ballaaranayay wakhti ka dib si loo dabaqo baahiyaha isbeddelaya daryeel bixiyeyaasha. Tan iyo sanadkii 2013, 25 boqolkiiba shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed ee Oregon ma lahayn caymis daryeel caafimaad. Taasi waa sababta xubnaha SEIU 503 ay si adag ugu dagaalameen heshiiska daryeel bixinta guriga ee 2013-2015 ee guusha leh ee Gobolka Oregon. Hishiiskani waxa uu abuuray nooc cusub oo dheefo ah kuwaas oo ka caawinaya shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeeda iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed ee Oregon ee u qalma inay helaan caymis daryeel caafimaad oo la awoodi karo.

**Ka sii socda bogga 6 >**



# Waxa ay daryeel bixiyeyaasha *leeyihiin*

“ Waa la i aqoonsan yahay oo waa la i qiimeeyaa waxaana ka dhex arki karaa midaas dheefaha aan ka helo Carewell.

*Leah B.*

“ Waxaan ku faraxsanahay inaan xal u helo dhibaatooyinkeyga ilkaha. Inaan si fiican wax u arko oo aan si fiican u dhoola cadeeyo ayaa ii ahayd barako iiga dhigtay inaan daryeel bixiye noqdo mid qiimo leh.

*James P.*

### Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka

**Oregon Homecare Workers Supplemental Trust (Hay'ada Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga) ("Supplemental Trust")** waxay bixisaa dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Carewell SEIU 503.

Dheeafahan waxay ka caawiyaan daryeel bixiyeyaasha inay bixiyaan khidmadaha caymiska caafimaadka ee bil'laha ah iyo kharashyada caafimaadka ee jaabka laga bixiyo.

**Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'ada Dheefaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon)** waxay bixisaa dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha (DVE), iyo Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh (PTO) ee Carewell SEIU 503.

### Ilkaha

### Aragga + Maqalka

Haddii aad xaq u leedahay, waxaad heli kartaa dheefaha ilkaha, aragga, iyo maqalka oo aan lahayn khidmada caymiska ee bil'laha ah. Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha, waxaad ku heli kartaa khayraad — ka bilowda in lagaa caawiyo canshuuraha ilaa iyo la talin bilaasha ah — oo aad ku maarayso arrimaha saameeya shaqadaada ama noolashaada guriga. Oo dheefta Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh waxaa loo qaabeeyay in lagaa caawiyo inaad waqti fasax ah ka qaadato shaqada markaad u baahato iyada oo lagu siinayo dheef ku salaysan mushaharkaaga habboon.

### Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha



Sanadka 2014, midowga ayaa ku biiray Gobalka Oregon si loo sameeyo 2 ka mid ah hay'adaha dheefta ee ka kooban Carewell SEIU 503: Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'ada Dheefta Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon) ("Benefit Trust") iyo Oregon Homecare Workers Supplemental Trust (Hay'ada Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga) ("Supplemental Trust"). Hay'adahan waxay wax ka qabtaan baahiyaha la wadaago ee shaqaalaha iyo gobalka.

**Tabbabar**

**PTO**

Sanado badan ka dib marki la meel mariyay dheefahan, hay'adda saddexaad ay qaybta ka ah **Carewell SEIU 503, SEIU 503 Training Partnership** ("Training Partnership"), ayaa waxaa sameeyay SEIU 503 iyo Gobalka Oregon sanadka 2019 si tabbabar loo siiyo shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada shaqsiyeed. Sida horayba loogu yaqiinay daryeel bixiyeyaasha daryeelka guriga dhexdiisa ah, habka ugu wanaagsan ee lagu hubin karo inay daryeel badqab leh, tayo sare leh helaan dhammaan macaamiisha — iyo dariiqa xirfada shaqo ee dhammaan daryeel bixiyeyaasha—waa in lagu qalabeeyo shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada shaqsiyeed tababar caalami ah.



Markay si wadajir ah uga shaqeeyeen hagaajinta hay'adahan, daryeel bixiyeyaasha SEIU 503 sida adiga oo kale ayaa ku guuleystay horumarino cusub iyo mustaqbal aad xakameyn karto. Hay'adahan waxay kuu sahlayaan inaad talo ku yeelato naqshadeynta tabbabarkaaga iyo dheefahaaga, waxayna bixiyaan dhaqaalaha adeegyadan ay ku siiso Carewell SEIU 503.

Fadlan gal **CarewellSEIU503.org** si aad wax badan u ogaato. Waxaad heli doontaa macluumaad waxtar leh sida:

- **Horudhaca MyCarewell503, agab onleen ah oo bilaash ah oo u awood siinaya daryeel bixiyeyaasha inay eegaan, si sugan u helaan, oo ay maareeyaan dheefahooda;**
- **Sida loo isticmaalo Carina, adeeg bilaash ah, onleen ah oo isku beega daryeelka kaas oo loogu talagalay daryeel bixiyeyaasha iyo macaamiisha;**
- **Xog-Uruurinta xaq u yeelashada dheefta;**
- **Tallaabooyin fudud in la raaco oo la iskuugu diiwaangeliyo dheefaha;**
- **Liiska qorshayaasha caymiska ee xaqa leh ee la oggolaaday kuwaas oo aad u heli karto magdhawga khidmada caymiska ee bil'laha ah;**
- **Diiwaangelinta tabbabarka iyo munaasabadaha waxbarashada;**
- **FAQ-yada iyo macluumaadka meesha lagala xidhiidho;**
- **Foomamka aad buuxin karto si aad u hesho dheefahan.**

Shaqada aad qabato daryeel bixiye ahaan waxay muhiim u tahay bulshooyinkeena. Waxaad ku kalsoonaan kartaa Carewell SEIU 503 inay ku siiso xasiloonida, taageerada, iyo sharafta aad u qalanto.

“ Waxaan had iyo jeer dib u dhigaa waxaan qaban lahaa waxaana ka warwaraa inay adkaan doonto. Markaan ugu danbayn ku dhiiraday aniga oo kaliya la xiriiray Carewell, aad ayay u fududaatay.

Mike M.

“ Uma baahni inaan 2 shaqo ka sii shaqeeyo si aan caymis u helo.

Brenda M.



## MYCAREWELL503

“ Wuxuu ahaa hannaan degdeg ah oo xamaasadaysan. Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan arko qaabab dheeraad ah oo aan ku maareyn karo dheefahayga!

*Tim R.*

“ Way wanaagsan tahay inaad ka hesho dhammaan macluumaadka iyo dhigaalada isla meeshaas. Waxay kaydisaa wakhtiga iyo tamarta.

*Lisa C.*

Carewell SEIU 503

# MyCarewell503

Hel dheefahaaga 24/7 adiga oo isticmaalaya MyCarewell503!

Daryeel bixiyeyaasha waxay hadda awood u leeyihiin inay si sugan onleen ahaan ugu maareeyaan dheefahooda, 24 saacadood maalinti, iyaga oo isticmaalaya taleefanadooda casriga ah, tablet, ama kumbiyuutar oo ka galaya abpp-ka taleefonka.

Waxay inoo sheegeen boqolaal daryeel bixiyeyaal ah inay aad muhiim ugu ahaan lahayd inay ku isticmaali karaan dheefahooda onleen ahaan. Waxaan diyaarinay agabkeena onleenka ah ee cusub, **MyCarewell503**, inuu noqdo hal goob oo aad:

- **Ka eegto saacadahaaga shaqada**
- **Ka gudbiso foomka W9**
- **Ka eegto haraagaaga dheefta Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh (PTO)**
- **Ka codsato lacagaha dheefta PTO**
- **Ka xaqiijiso xaq u yeelashada iyo nooca dheeefaha ee aad heli karto**
- **Ka eegto xaalada magdhawga**
- **Ka xaqiijiso kana cusboonaysiiso cinwaanka guriga ee ay kaa hayso Carewell SEIU 503**
- **Ka hagaajisato lacag wareejinta elektrooniga ah**
- **Ka buuxiso warqadaha loo baahan yahay**
- **Ka cusboonaysiiso macluumaadkaaga – dhammaantood hal goob**

Waxaan rajaynaynaa inuu kuu noqdo agabkan onleenka ah ee cusub mid habboon oo kuu sahlan inaad isticmaasho. Dabcan, waad na soo wici kartaa ama waxaad inoogu soo diri kartaa iimayl wixii su'aalo ah ama haddii aad u baahato taageero. Nagala soo xiriir lambarka 1-844-503-7348, Isniin–Jimce, 8am–6 pm PST ama iimayl noogu soo dir **Carewell503Benefits@RISEpartnership.com**.

Eeg qaybta FAQ-yada ee MyCarewell503 ee barta **CarewellSEIU503.org/resources/faqs** haddii aad diyaar u tahay inaad sahmiso habkan cusub ee xiisaha badan si aad u hesho macluumaadkaaga Carewell SEIU 503.

Waxaan had iyo jeer raadinaa habab aan kaga caawino shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed inay si fudud u sahmiyaan dheefahooda, waxaana filaynaa in MyCarewell503 ay tahay tallaabo muhiim ah oo dhinacaas loo qaaday. Waxaan ku faraxsanahay inaan ku siino habkan cusub ee habboon oo si toos ah kuugu xiraya dheefahaaga Carewell SEIU 503!

> “Waan jeclahay. Way fududayd inaan hagaajisto waxaana ku helay dheefahayga PTO 4 maalmood gudahooda ka dib markaan codsaday! Aad ayay u fududaan doontaa hadda inaan la socono oo aan isticmaalno dheefaheena PTO!
>
> *Heidi R.*



# CARINA

Carewell SEIU 503

# Carina

Miyaad raadinaysaa macmiil cusub oo aad daryeeshid? Carina, goobta cusub ee onleenka ah, goobta loo raadsado ee loogu talagalay daryeel bixiyeyaasha daryeelka guriga dhexdiisa ah inay ka helaan shaqooyinka u dhaw ayaa hadda laga heli karaa Supplemental Trust. Ku soo biir shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed ee guud ahaan Oregon kuwaas oo u adeegsada Carina inay ku raadsadaan oo isku beegaan macaamiisha Medicaid iyo Barnaamijka Dadka Waayeelka ah ee Oregon Lagu Taageero (OPI) ee la xaqiijiyay ee u dhaw.

Wax badan ka baro barta **CarewellSEIU503.org/Carina.**


Iyaga oo isticmaalaya taleefan casri ah, tablet ama kumbiyuutarka, adeeg bixiyeyaasha iyo macaamisha ayaa samaysan kara bogag leh dookhyada daryeelka, isku heli kara oo fariin iskuugu diri kara, oo sidoo kale aqbali kara soo jeedinta shaqooyinka. Carina waa bilaash 100% waxayna xaqiijisaa dhammaan dadka isticmaala. Fadlan ogoow in macaamiisha daryeelka raadinaya laga yaabo inaan isla markaaba laga helin deegaankaaga.

**Iskaan garee koodhka QR si aad isku diiwaangeliso.**

CARINA

Daryeel Wanaagsan. Shaqooyin Wanaagsan.

# Agab Cusub oo Laga Raadsado Shaqooyinka Daryeelka ee Wanaagsan ayaa Diyaar ah!




Hubso inaad leedahay go'aan aad ka dharagsan tahay. Raadi oo isku beeg macaamiisha daryeelka ee kuu dhaw.

- Hel shaqooyinka isla markaa la heli karo
- Ma lahan khidmad raadin ama xayaysiin - abid
- Macluumaadkaaga waa mid kuu qarsoon oo sugan
- Dhammaan adeegsadayaasha waa la hubiyay



# CAREWELL SEIU 503 ILKAHA ARAGGA + MAQALKA BARNAAMIJKA CAAWINTA SHAQAALAHA (DVE)

# Ilkaha

Dheefta Ilkaha ee Carewell SEIU 503 waxaa bixisaa caymiska ilkaha oo ay caymiso Kaiser Permanente. Haddii aad ku nooshahay gudaha aagga adeegga Kaiser, dheefahaaga ilkaha waxaa lagu bixin doonaa shirkada Kaiser's HMO. Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan Aagga Adeegga Kaiser Permanente, dheefahaaga ilkaha waxaa lagu bixin doonaa shirkada Kaiser Preferred Provider Organization (PPO). Uma baahnid inaad bixisid khidmada caymiska bil'laha ah ee caymiskaaga ilkaha, iyada oo aan loo eegaynin haddii aad ku jirto shirkada Kaiser HMO ama shirkada Kaiser PPO.

## Muhiim:

- **Haddii aad caymis ka hesho shirkada Kaiser HMO, waa inaad isticmaasho adeeg bixiyaha la shaqeeya shirkada Kaiser HMO si adeegyadaada ilkaha ay u dabarto Carewell. Haddii aad isticmaasho adeeg bixiye ka baxsan shirkada, sheegashadaada lama dabari doono.**
- **Haddii aad caymis ka hesho shirkada Kaiser PPO, waa inaad adeeg bixiye ka doorato shirkada Kaiser PPO dhexdeeda si aad faa'iidada ugu badan uga hesho dheefahaaga ilkaha. Haddii aad daryeel ka hesho adeeg bixiye shirkada ka baxsan, waxay noqod doontaa inaad lacag badan jaabkaaga ka bixiso. Si aad u hesho adeeg bixiyaha PPO ee aaggaaga jooga, booqo CarewellSEIU503.org ama ka wac Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348.**

Qorshahaaga caymiska ilkaha wuxuu bixiyaa qaar badan oo ah adeegyada ilkaha ee ka hortagga ah iyo kuwa aasaasiga ah oo bilaash kuu ah, wuxuuna sidoo kale qayb ka bixiyaa adeegyada kale ee ilkaha ee culus.

Si aad wax badan ugu ogaato waxa uu dabaro qorshahaaga caymiska ilkaha iyo sida loo helo adeegyada, fadlan booqo **CarewellSEIU503.org/benefits/dental/.**

Talo!

Erayga **DVE** wuxuu u taagan yahay **I**lkaha, **A**ragga + Maqalka, iyo dheefaha **B**arnaamijka Caawinta Shaqaalaha ee ay bixiso Carewell SEIU 503.

# Aragga + Maqalka

Dheefta Aragga iyo Maqalka ee Carewell SEIU 503 waxay fududeysaa helidda adeegyada aragga iyo maqalka, oo aan lahayn khidmada caymiska ee bil'laha ah.

## Aragga

Dheefaha aragga waxaa caymis siiya Ameritas iyada oo loo sii marayo Shabakadda Kala doorashada VSP. Haddii aad isticmaasho adeeg bixiyaha shirkada la shaqeeya, laguuguma dalacayo wax lacag ah baarista sanadlaha ah iyo muraayadaha badankood, waxaadna u helaysaa ilaa iyo $500 fareemyada ama dhalada isha la dul saaro 2-dii sanaba mar. Si aad u hesho adeeg bixiyaha la shaqeeya VSP, gal **CarewellSEIU503.org/benefits/vision**. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad hesho adeeg bixiyaha VSP, kala xiriir Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348.

## LASIK

DHeefaha LASIK waxaa laga heli karaa Ameritas LASIK Advantage. Waxaad u tagi adeeg bixiye kasta oo LASIK oo aad doorato balse waxaad u baahan doontaa inaad lacagta adeegyada hormaris u bixiso kadibna aad codsato in laguu magdhawo.

## Maqalka

Dheefaha maqalka waxaa laga heli karaa Ameritas SoundCare. Waxaad u tagi adeeg bixiye kasta oo aad doorato, balse waxaad u baahan doontaa inaad lacagta adeegyada hormaris u bixiso kadibna aad magdhaw ka codsato Ameritas SoundCare.

Ka ogoow wax badan u ku saabsan dheefahaaga aragga iyo maqalka barta **CarewellSEIU503.org/benefits/vision-and-hearing/**.

Carewell SEIU 503

# Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (EAP)

Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (EAP) ee Carewell SEIU 503 wuxuu bixiyaa khayraad kaa caawiyo noolashadaada gaarka ah. Adeegyada EAP waxaa bixiya Uprise Health. Waxay kuu yihiin bilaash waxaana kamid ah:

- **24-saac oo caawimaada dhibaatooyinka ah;**
- **Illaa iyo 5 kulamo latalin oo qof ahaan loo xaadiro 12kii biloodba mar;**
- **La-talinta caafimaadka dhimirka ee khadka tooska ah;**
- **Adeegyada sharciga oo qiimo jaban;**
- **Talada maaliyadeed ee qoyska, oo ay ku jirto caawimaada buuxinta canshuurta;**
- **Iyo wax kale oo badan!**

Ka sahmi dheefahaaga EAP iyo sida loo adeegsado barta **CarewellSEIU503.org/benefits/employee-assistance-program/.**

## Miyaan xaq u leeyahay Dheefahan DVE?

Xaq u yeelashadaada waxay ku xiran tahay saacadaha aad shaqeyso oo aad soo gudbiso: si loo xaqiijiyo helitaankaaga dheefaha Carewell SEIU 503, fadlan hubi inaad **soo dirto foojaradaada mushahar bixinta waqti haboon.**

Tani waa soo koobida shuruudaha xaq u yeelashada kaliya. Si aad u hesho faahfaahin dhamaystiran, fadlan ka tixraac liiska shuruudaha xaq u yeelashada ee ku jira boggaga 56-57 ee Hagahaan.

## Xaq u yeelashada

Ma u shaqeysay sida shaqaalaha daryeelka guriga ama shaqaalaha taageerada shaqsiga ama bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed ahaan ugu yaraan 40 saacadood bishii 2 bilood oo isku xigta?

**HAA**

Hagaag! Waxay u badan tahay inaad u qalanto dheefaha Carewell SEIU 503. * Waxa jirtaa muddo sugitaan 1 bil ah ka hor intaysan bilaabmin dheefahaaga, maadaama macluumaadkaaga la hawlgelinayo. Waxaad wali xaq u yeelan doontaa dheefaha Carewell SEIU 503 marki laga reebo inaad si buuxda u joojiso shaqada 2 bilood oo isku xigta, taas oo ka dhigan inaad haysato 0 saacadood oo ah saacadaha shaqada ee xaqa leh[1] — oo sidoo kale loo yaqaano saacadaha kooxda gorgortanka — 2 bilood oo isku xigta. Ka dib 2 bilood oo aad shaqaysay 0 saacadood, waxaa jira 1 bil oo ah muddo sugitaan ka hor inta aysan dhamaanin dheefahaaga.

**MAYA**

Waxay u egtahay inaadan u qalmin inaad hesho dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee Carewell SEIU 503 wakhtigan, laakiin waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto dheefaha Wakhtiga Fasaxa Mushaharka Leh.

**Tusaale: Kuwani waa saacadaha shaqada ee Lucia tan iyo markay shaqo bilawday Luulyo.**

| Luulyo | Ogoosto | Seteembar | Oktoobar | Nofeembar | Diseembar | Janaayo |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 20 saacadood | 44 saacadood | 48 saacadood | 36 saacadood | 0 saacadood | 16 saacadood | 60 saacadood |

Lucia waxay shaqaysay wax ka badan 40 saacadood Agoosto iyo Seteembar, iyada oo kasbatay xaq yeelashadayda.

Oktoobar: bisha sugitaanka

**Dheefaha waxay bilaabanayaan Noofeembar 1.**

Lucia ma lumin doonto dheefaha inkastoo aysan shaqaynin Noofeembar, sababtoo ah waxay dib shaqo u bilowday Diseembar.

* Haddii aad u shaqeyso Independent Choices Program (Barnaamijka Xulashada Madaxbanaan) oo aan lagu siinin Acumen, markaa waxaa laga yaabaa inaadan u qalmin inaad dheefo ka hesho Carewell SEIU 503. Fadlan ka tixraac bogga 47 ee hagahan wixii faahfaahin dheeraad ah ama wac 1-844-503-734 si aad wax badan u ogaato.

[1] Tixraac kasta oo ku saabsan "saacadaha," "saacadaha shaqada," ama "saacadaha la shaqeeyo" Hagahan dhexdiisa waxaa loola jeedaa saacadaha kooxda gorgortanka — saacadaha ay mushaharka kugu siiyaan Acumen, DHS, iyo/ama PPL iyagoo matalaya macaamiishaada.

## Isticmaalida Dheefahaaga DVE

Carewell SEIU 503 ayaa go'aamiso xaq u yeelashada dheefaha DVE. Waxaan ogaysiiso kuugu soo diri doonaa cinwaanka guriga ee uu kaa hayo Gobalka haddii aad xaq u yeelato dheefaha, iyo sidoo kale ka hor inta aadan luminin xaq u yeelashada. Haddi aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xaq u yeelashadaada dheefaha, waxaad wici kartaa 1-844-503-7348.

Waxaa si toos ah laguugu diiwaangelin doonaa dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee laga helo Carewell SEIU 503 markaad:

- **Buuxiso Shuruudaha Xaq U Yeelashada ee kor lagu sharaxay; oo**
- **ka cusboonaysiiso Carewell SEIU 503 iyo Gobolka magacaaga, jinsigaaga, lambarkaaga Soshiyaal Sekuyuritiga, taariikhdaada dhalashada iyo ciwaankaaga guriga ee haddadan.**

Waxaad ka cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga Carewell SEIU 503 adiga oo isticmaalaya **MyCarewell503 (CarewellSEIU503.org/mycarewell503)** ama barta **CarewellSEIU503.org/resources/forms**.

Waxaad kaarka caymiska ilkaha ka heli doontaa Kaiser Dental (marki laga reebo inaad leedahay caymiska caafimaadka ee Kaiser, markaas oo ID-gaaga caafimaadka uu sidoo kale noqon doono ID-gaaga ilkaha. Waxaad ka heli doontaa kaarashada caymiska Ameritas ee loogu talagalay dheefahaaga aragga, maqalka, iyo LASIK. Dheefahaaga EAP uma baahna kaarka caymiska.

Haddii aadan rabin in laguu diiwaangeliyo dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee Carewell SEIU 503, waxaa qasab ah inaad ka buuxiso foomka Ka-dhaafitaanka Dheefaha barta **MyCarewell503 (carewellseiu503.org/mycarewell503)** ama barta **CarewellSEIU503.org/resources/forms**.

## Oregon Homecare Workers Supplementaand Benefits Trusts
## (Hay'adaha Kaalmada iyo Dheefaha ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon)
## Soo Koobida Wax Ka Baddelka Dhigaalada

### Xeerka U-qalmitaanka ee Cusub ee loogu talagalay Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka iyo Ilkaha, Aragga + Maqalka, iyo Dheefaha Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha (DVE)

Dukumeentigani wuxuu sharaxayaa isbeddelada lagu sameeyay Hagaha Tabbabarka iyo Dheefaha ee Carewell SEIU 503 ee 2023 ("Hagaha"). Cusboonaysiintani waxay kordhinaysaa tirada saacadaha ka qaybqaataha ay tahay inuu shaqeeyo si uu u ilaashado u-qalmitaanka dheefaha hoos imaada Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'adda Dheefaha ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon) iyo Oregon Homecare Workers Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon) (wada jir ah, "Hay'addaha Kaalmada iyo Dheefta"). Isbeddelladani waxay sidoo kale khuseeyaan ka qaybgalayaasha Barnaamijka Ikhtiyaarada Loo Sameeyo Si Madax-bannaan ee lagu bixiyo iyadoo loo maraayo Acumen.

Lambarada bogga waxay muujinayaan qaybta Hagaha ee isbedeleysa. Fadlan u akhri si taxadar leh qoraalkan kooban.

**Taariikhda Dhaqan Galka:** Wax ka beddelka xeerka ee hoose wuxuu dhaqan galayaa markey tahay **Oktoobar 1, 2025**.

### Soo koobida Wax ka beddelka

1. Bogga 21 ee Hagaha waa la tirtiray waxaana lagu bedelay tan meeshan ku lifaaqan.

2. Gudaha bogga 31 ee Hagaha, Qaybta cinwaankeedu yahay "Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka noocee ah ayaan xaq u leeyahay" ayaa wax laga beddelay iyadoo la tirtirayo bar-calaamadeedka labaad oona lagu beddelaayo bar-calaamadeedka hoose:

   Waa inaad xaq u leedahay dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee Carewell SEIU 503 — taas oo ka dhigan inay qasab tahay inaad shaqeyso ugu yaraan 40 saacadood bishiiba 2 bilood oo isku xiga. Si aad ugu sii qalanto, waa inaadan soo gudbinin wax ka yar 40 saacadood oo shaqeysay bishiiba, 2 bilood oo isku xiga.

3. Gudaha bogga 47 ee Hagaha, Qaybta cinwaankeedu yahay "Soo koobida Dheefaha" ayaa wax laga beddelay iyadoo la tirtirayo cutubka B.1 oona lagu beddelaayo cutubka hoose:

   Waxaad xaq u sii lahaan doontaa dheefaha ku qoran Qaybta A ee kore marki laga reebo inaad soo gudbiso wax ka yar saacadaha kooxda gorgortanka oo 40 ah 2 bilood oo isku xigta. Xaaladaha noocan oo kale ah, waxaa jiri doona 1 bil oo muddo kordhin ah ka hor inta aan la joojinin dheefahaada iyadoo daba socota luminta xaq u yeelashadaa. Tusaale ahaan, haddii aad soo gudbiso wax ka yar 40 saacadood Oktoobar iyo Noofeembar 2025, waxaad lumin doontaa xaq u yeelashada laga bilaabo Janaayo 1, 2026. Carewell SEIU 503 waxay kuu soo diri doontaa warqad digniin ah ka dib bisha ugu horeysa ee saacadahaada kooxda gorgortanka ay hoos uga dhacaan 40 saacadood. Waxay sidoo kale ku siin doonaan ogaysiis horudhac ah oo ku saabsan joojinta u-qalmitaankaaga dheefaha Carewell SEIU 503 ka dib bisha labaad ee isku xigta oo aad haysato wax ka yar 40 saacadaha kooxda gorgortanka.

4. Gudaha bogga 56 ee Hagaha, Qaybta cinwaankeedu yahay "U-qalmitaanka Socda" ayaa wax laga beddelay iyadoo la tirtirayo cutubka koowaad oona lagu beddelaayo cutubka hoose:

   Waxaad xaq u sii lahaan doontaa dhefaha Carewell SEIU 503 ee laga helo Hay'adaha marka laga reebo inay saacadahaaga kooxda gorgortanka ee la shaqeeyay bishi ay ka yar yihiin 40 saacadood 2 bilood oo xiriir ah.

5. Gudaha bogga 56 ee Hagaha, Qaybta cinwaankeedu yahay "Lumitaanka U-qalmitaanka" ayaa wax laga beddelay iyadoo la tirtirayo cutubka koowaad oona lagu beddelaayo cutubka hoose:

   Haddii aad shaqeyso in ka yar 40 saacadaha kooxda gorgortan bishii, 2 bilood oo isku xigta, waxaad waayi doontaa u-qalmitaankaaga ceymiska dheefaha ee hoos yimaada Hay'addaha Kaalmada iyo Dheefaha. Carewell SEIU 503 waxay kuu soo diri doontaa warqad ogeysiis ah ka dib bisha ugu horeysa ee saacadahaada kooxda gorgortanka ay hoos uga dhacaan 40. Waxay sidoo kale ku soo diri doonaan ogaysiis horudhac taariikhda ay dhamaan doonto u-qalmitaankaada sida hoos imaata Hay'addaha Kaalmada iyo Dheefaha ka dib bisha labaad ee isku xigta oo aad haysato wax ka yar 40 saacadaha kooxda gorgortanka. **Dheefahu waxay dhammaan doonaan 1 bil ka dib markaad shaqeyso in ka yar 40 saacadaha kooxda gorgortanka bishiiba 2 bilood oo isku xigta.** Tusaale ahaan, haddii aad heysato wax ka yar 40 saacadaha kooxda gorgortanka bisha Oktoobar iyo Noofeembar 2025, xaq u yeelashadaada dheefaha laga helo Hay'addaha Kaalmada iyo Dheefaha ayaa dhammaan doona markey tahay Janaayo 1, 2026.



RISE Partnership

Carewell SEIU 503 waa qoyska tabbabarka iyo dheefaha ay sida adag u hanteen shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed ee SEIU 503.

Waxaa bixiyay RISE Partnership, hay'ad aan macaash doon ahayn oo taageerta daryeel bixiyeyaasha iyo shaqaalaha waaxda dadwaynaha ee Oregon ee leh tabbabar, waxbarasho, iyo sahminta dheefaha oo heersare ah.

LOCAL 503 SEIU

cwb_mail_so_20250320_eligibility cover letter

## Xaq u yeelashada

Ma u shaqeysay sida shaqaalaha daryeelka guriga ama shaqaalaha taageerada shaqsiga ama bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed ahaan ugu yaraan 40 saacadood bishii 2 bilood oo isku xigta?

**HAA**

Hagaag! Waxay u badan tahay inaad u qalanto dheefaha Carewell SEIU 503. * Waxa jirtaa muddo sugitaan 1 bil ah ka hor intaysan bilaabmin dheefahaaga, maadaama macluumaadkaaga la hawlgelinayo. Waxaad xaq u sii yeelan doontaa dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP (DVE) ee Carewell SEIU 503 haddii aysan ka ahayn inaad soo gudbiso wax ka yar 40 saacadood oo shaqo ah 2 bilood oo isku xigta. Ka dib 2 bilood oo aad soo gudbisay wax ka yar 40 saacadood, waxaa jira 1 bil oo ah muddo sugitaan ka hor inta aysan dhamaanin dheefahaaga.

Waxaa si toos ah laguugu diiwaangelin doonaa dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee laga helo Carewell SEIU 503. Uma baahnid inaad wax sameyso; Kaararkaada aqoonsiga xubinnimada ayaa laguugu soo diri doonaa boostada.

**MAYA**

Waxay u egtahay inaadan u qalmin inaad hesho dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee Carewell SEIU 503 wakhtigan, laakiin waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto dheefaha Wakhtiga Fasaxa Mushaharka Leh.

**Bisha 1** — **Wax ka yar 40 saacadood** — Shaqada kooxda gorgortanka

**Bisha 2** — **Wax ka yar 40 saacadood** — Shaqada kooxda gorgortanka

**Bisha 3** — **Bisha sugitaanka** — Wali heli kara dheefaha

**Bisha 4** — **Aanan sii ahayn qof u sii qalma dheefaha maalinta koowaad ee bishan**

### Tusaale: Kuwani waa saacadaha shaqada ee Lucia tan iyo markay shaqo bilawday Luulyo.

| Luulyo | Ogoosto | Seteembar | Oktoobar | Nofeembar | Diseembar | Janaayo |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 20 saacadood | 44 saacadood | 48 saacadood | 40 saacadood | 25 saacadood | 50 saacadood | 44 saacadood |

Lucia waxay shaqaysay wax ka badan 40 saacadood Agoosto iyo Seteembar, iyada oo kasbatay xaq yeelashadayda.

Oktoobar: bisha sugitaanka

**Dheefaha waxay bilaabanayaan Noofeembar 1.**

Lucia ma lumin doonto dheefaha inkastoo ay shaqeysay wax ka yar 40 saacadood bishii Nofeembar, sababtoo ah waxay shaqeysay wax ka badan 40 saacadood gudaha bisha Diseembar iyo Janaayo.

* Haddii aad u shaqeyso Independent Choices Program (Barnaamijka Xulashada Madaxbanaan( oo aan lagu siinin Acumen, markaa waxaa laga yaabaa inaadan u qalmin inaad dheefo ka hesho Carewell SEIU 503. Fadlan ka tixraac bogga 47 ee hagahan wixii faahfaahin dheeraad ah ama wac 1-844-503-734 si aad wax badan u ogaato.

[1] Tixraac kasta oo ku saabsan "saacadaha," "saacadaha shaqada," ama "saacadaha la shaqeeyo" Hagahan dhexdiisa waxaa loola jeedaa saacadaha kooxda gorgortanka — saacadaha ay mushaharka kugu siiyaan Acumen, DHS, iyo/ama PPL iyagoo matalaya macaamiishaada.

# DHEEFTA WAKHTIGA FASAXA EE LACAGTA LEH (PTO)

Carewell SEIU 503

# Wakhtiiga Fasaxa Lacagta Leh (PTO)

Inaan awoodno inaan fasax ka qaadano shaqada waxay muhiim u tahay caafimaadkeena maskaxda, dareenka iyo jirka. Taasi waa sababta ay Carewell SEIU 503 u bixiso dheefta Wakhtiga Fasaxa Lacagta leh (PTO) — si markaas aad wakhti fasax ah u qaadato markaad u baahato, haddii aad u qaadanayso fasax dalxiis ahaan, ballan ama wakhti kuu gaar.

## Dheefta PTO ee Cusub ee Wax Laga Baddelay

Markay ahayd Janaayo 2023, Carewell Benefits waxay bilowday dheefta PTO oo cusub oo wax laga baddelay inay siiso daryeel bixiyeyaasha xaqa u leh. Markaad isticmaalayso dheefta PTO ee cusub:

- **Waxaad heli kartaa saacadaha dheefta PTO oo ka badan intaad abid horay u heshay.** Daryeel bixiyeyaasha xaqa u leh waxay hadda heli karaan ilaa iyo 48 saacadood sanad walbo, baddelki 40.
- **Daryeel bixiyeyaasha daryeelka guriga dhexdiisa ah oo badan ayaa heli doona dheefaha PTO.**
- **Waxaad dabacsanaan badan u yeelan doontaa inaad hesho oo aad isticmaasho PTO.** sababta oo ah waxaad hadda ku heli kartaa saacadaha dheefta PTO bil walbo waxaadna u wareejin kartaa dheefahaaga PTO ilaa iyo 24 bilood.

## Dulmarka xaq u yeelashada

### Si aad xaq ugu yeelato dheefaha Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh ee Carewell SEIU 503 waxaa qasab ah:

1. **Inuu Form W-9 (Foom W-9) kuugu jiro fayl yaala Carewell SEIU 503 Benefits.** Dheefta PTO waa dakhli la canshuuri karo. Xaq uma yeelan doontid inaad hesho dheeftaada PTO haddii aanan kaa haynin Form W-9 (Foomkaaga W-9) oo faylka inoogu jiro.

2. **Inaad shaqayso ugu yaraan 20 saacadood bishi si aad xaq ugu yeelato 1 saac oo dheefaha PTO ah.** Haddii aad shaqayso wax ka yar 20 saacadood bishi, ma heli doontid saacadaha dheefta PTO bishaas.

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dheeftan PTO, fadlan gal **CarewellSEIU503.org/PTO**.

Talo!

**Si degdeg ah ku hel dheefahaaga!** Lacag Wareejinta Elektrooniga ah ayaa ah qaab wanaagsan oo aad ku heli karto in lagu siiyo dheefahaaga PTO si degdeg ah oo badqab leh. Kaliya ka buuxi foomka Lacag Wareejinta Elektrooniga ah MyCarewell503 ama websaydhka Carewell oo u soo dir nuqulka jeeg maran ee erayga 'void' ku qoran tahay Carewell SEIU 503.

## Helidda Dheefaha PTO

Daryeel bixiyeyaasha xaqa u leh waxay helaan 1 saac oo dheefaha PTO ah 20 saacadood oo kasta oo ay shaqeeyaan, ilaa iyo ugu badnaan 4 saacadood oo ah saacadaha dheefta PTO bil walbo. Tusaale ahaan,

- **haddii aad shaqayso ugu yaraan 80 saacadood 1 bil, waxaad heli doontaa 4 saacadood oo ah dheefta PTO bishaas. Tani waxaa ugu wacan 20 saacadood oo shaqa ah waxay u dhigantaa 1 saac oo dheefaha PTO ah mana kasban kartid wax ka badan 4 saacadood oo dheefta PTO ah bil walbo.**

Saacadaha 1 bil la shaqeeyay looma gayn karo saacadaha bil kale la shaqeeyay si loo helo saacadaha dheefaha PTO. Tusaale ahaan,

- **haddii aad shaqayso 10 saacadood bisha Maajo oo aad shaqayso 10 saacadood bisha Juun, iskuma gayn gartid saacadahaas si aad u hesho 1 saac oo dheefaha PTO ah.**

Haddii aad saacado shaqo la leedahay shirkadaha mushaharka oo badan, dhammaan saacadaha la shaqeeyay bisha ayaa la isku gayn doonaa si loo xisaabiyo saacadaha dheefta PTO ee bishaas.

Saacadaha dheefta PTO ee aad hesho bil walbo ayaa lagu daraa haraagaaga dheefta dhamaadka bisha. Tusaale ahaan,

- **Haddii haraagaaga dheefta PTO uu yahay 12 saacadood dhamaadka bisha Maajo, oo aad hadda hesho 4 saacadood oo dheefta PTO oo dheeraad ah bisha Juun, haraagaaga guud ee dhamaadka Juun wuxuu noqon doonaa 16 saacadood oo dheefta PTO ah.**

## Sida loo isticmaalo dheefahaaga PTO

Waxaad ka codsan kartaa dheeftaada PTO iyada oo ah kordhin ugu yaraan 8 saacadood ah markiiba barta MyCarewell503 ama inaad buuxiso foomka Codsashada Dhefta PTO ee ku jira websaydhka Carewell ee barta **CarewellSEIU503.org/forms**. Haddii aadan gali karin websaydhka, waxaad codsan kartaa in foom warqad ah laguu soo diro boostada adiga oo wacaya 1-844-503-7348.

Dheefahaaga PTO waxaa lagu bixiyaa sicirkaaga mushaharka ee ugu danbeeyay ee ku jira nidaamka xilliga aad codsatay ee aad heshay lacagta dheeftaada PTO. Marka saacadaha ay soo gudbiyaan shirkadaha mushaharka oo badan, sicirka ugu badan ee nidaamka ku jiro ayaa loo isticmaali doonaa lacag bixinta PTO.

Codsiyada PTO waxaa ka shaqeeya Carewell SEIU 503 toddobaad walbo. Marka codsigaaga PTO la hawlgeliyo, waxaad heli doontaa lacagtaada dheefta. Haddii aad isku diiwaangelisay lacag wareejinta elektarooniga ah, dheeftaada PTO waxaa sida caadiga ah laguugu soo shubi doonaa akoonkaaga 1 ilaa 3 maalmood oo shaqo gudahooda, ka dib marka codsigaaga laga shaqeeyo, iyada oo ku xiran bangiga aad isticmaasho. Jeegaga warqada ah waxaa boostada lagu soo diraa toddobaad walbo waxayna qaadan kartaa ilaa iyo 10 maalmood inay ku soo gaaraan. Fadlan ogoow: Haddii aadan isku diiwaangelinin lacag wareejinta elektarooniga ah, waxaad ku heli doontaa dheeftaada qaabka jeeg warqada ah.

Xusuusnoow: Ma ahan mas'uuliyadaada inaad raadiso qof ku baddela markaad qaadato wakhti fasax ah. Macaamilkaaga ayaa leh mas'uuliyadda koowaad ee xulashada iyo shaqaaleysiinta adeeg bixiyeyaashiisa. Sikastaba ha ahaatee, macmiilkaaga waa inuu oggolaado codsigaaga fasaxa wakhti hore, gargaarna waa in la heli karo haddii loo baahdo. Haddii macmiilka uu u baahan yahay in laga caawiyo helidda qof ku baddela, wuxuu la xiriiri karaa Isku Xirka Kheyraadka Loo-shaqeeyaha ama maamulaha kiiska, inkasta oo aysan ahayn mas'uuliyada maamulaha kiiska.



Talo!

## Si degdeg ah ku hel dheeftaada PTO!

- Hubso inuu Form W-9 (Foom W-9) kuugu jiro fayl yaala Carewell SEIU 503. Waxaad buuxin kartaa foomkan xilli walbo adiga oo tagaya **MyCarewell503**.
- Ka dir codsigaaga dheefta PTO barta MyCarewell503 ama inaad buuxiso foomka Codsashada Dhefta PTO ee ku jira websaydhka Carewell ee barta **CarewellSEIU503.org/forms**. Inaad foomka onleen ahaan ku buuxiso ayaa ah habka ugu degdeg badan, ugu fudud, ugu qaladka yar ee loo gudbiyo codsiga PTO.
- Dooro lacag wareejinta elektrooniga ah. In si toos ah dheeftaada laguugu soo shubo akoonkaaga bangiga waxay meesha ka saaraysaa wakhtiga boostada waxay xaqiijinaysa in jeega aan lagu qaldin boosto aan muhiim ahayn.

## Wareejinta Dheeftaada PTO ee aan la isticmaalin

Markaad isticmaalayso dheefta PTO ee cusub, lagaagama baahna inaad isticmaasho dhammaan dheefahaaga PTO sannad kasta. Taas baddelkeeda, waxaa helaysaa dabacsaanaan aad ku kaydsato dheefahaaga PTO ilaa iyo 24 bilood ka hor intaadan isticmaalin, si markaas aad wakhti fasax ah oo kuu gaar ah aad ugu qaadato sabab walbo oo aad rabto. Haddii aad kasbato 4-ta saacadood ee ugu badan bil walbo, waxaad heli doontaa 96 saacadood oo kuu kaydsantay 24 ka dib!

Xusuusnoow waxaa qasab ah inuu Form W-9 (Foom W-9) kuugu jiro fayl aan kaa hayno si aad xaq ugu yeelato dheefaha PTO. Haddii

- **uu Form W-9 (Foom W-9) kuugu jiro fayl nala yaala, oo**
- **ay kuu uruureen 24 bilood oo ah dheefaha PTO,**

dheeftaada PTO ayaa si toos ah laguu siin doonaa, xitaa haddii aadan gudbinin codsiga dheefaha PTO. Haraaga PTO-gaaga ayaa dib loogu celin doonaa 0.

Sidoo kale, hadii aad joojiso inaad gudato saacadaha kooxda gorgortanka oo aad yeelato 0 saacadood oo shaqo 6 bilood oo isku xigta, haraagaaga PTO ayaa si toos ah laguu siin doonaa.

**Muhiim: Markaad gudbiso Form W-9 ( Foomka W-9), waxaad xaq u yeelan doontaa dheefaha PTO wixii xilligaas ka danbeeya, iyo ilaa iyo 12 bilood oo la soo dhaafay, iyada oo ku salaysan saacadaha aad shaqaysay iyo xaq u yeelashadaada guud ee dheefaha Carewell SEIU 503.** Tusaale ahaan aynu dhahno, waxaad xaq u yeelatay dheefaha Carewell SEIU 503 markay ahayd Maarso 1, 2022, waxaadna shaqaynaysay 40 saacadood bil walbo tan iyo wakhtigaas, balse ma aadan gudbinin Form W-9 (Foomkaaga W-9) ilaa iyo Juun 1, 2023. Xaaladan oo kale, waxaad codsan kartaa oo aad heli kartaa dheefaha PTO oo dib looga soo bilaabayo Juun 1, 2022.

Saacado walbo oo la shaqeeyay wixii ka dheer 12 bilood ka hor intaan la helin Form W-9 (Foomkaaga W-9) laguma xisaabi doono dheefahaaga PTO. Tani waxay ka dhigan tahay ma awoodi doontid inaad codsatid dheefaha PTO ee saacadahan.

## Magacaabista Ka-faa'iideystaha

Shaqaalaha xaqa u leh dheefaha PTO waxay fursad u leeyihiin inay magacaabaan ka'faaiideyste — haddii si kale loo dhigo waxaad na ogaysiin kartaa qofka la siinayo lacagtaada dheefta PTO haddii aad geeriyooto ka hor inta aan la bixinin dheefahaaga. Si aad u magacaawdo ka-faa'iideyste, fadlan buuxi foomka Ka-faa'iideystaha PTO ee laga helo MyCarewell503 ama websaydhka Carewell ee barta **CarewellSEIU503.org/forms**.

Haddii aadan dooran ka-faa'iideyste ama haddii uu kaa hor dhinto ka-faa'iideystahaaga, hadhaagaaga PTO waxa la siin doonaa qofka ku dhaxlaya.

## Jeegaga Dheefta PTO ee Lumay

Had iyo jeer, jeega dheefta PTO ayaa ku limi kara boostada ama uu si lama filaan ah dib ugu warshadayn karaa daryeel bixiyaha asaga oo u maleeya boosta qashin ah. Haddii ay arrimahan dhacaan, Carewell SEIU 503 ayaa bixin karta jeeg cusub. Sikastaba ha ahaatee, adiga ayay kugu xiran tahay inaad bixiso kharashka lagu joojinayo jeega koowaad. Waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad sugto ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo ka dib marka jeega la bixiyo ka hor intaadan codsan jeeg cusub.

Inta badan ma dhacdo inay jeegaga lumaan, balse markay dhacdo, way ku dhibi kartaa haddii aad ku tashanaysay lacagtaas. Inaad dabarto kharashka lagu joojinayo jeega waa culays dheeraad ah. Tani waa mid ka mid ah sababa aan si wayn kuugula talino inaad isticmaasho lacag wareejinta elektarooniga ah haddii aad heli karto.

## Dheefaha PTO iyo Canshuuraha

Dheefta Wakhtiiga Fasaxa Lacagta leh waa dakhli la canshuuri karo, taas oo ah sababta lagaaga baahan yahay inuu Form W-9 (Foom W-9) kuugu jiro fayl yaala Carewell SEIU 503 Benefits si aad xaq ugu yeelato dheefta PTO. Haddii aad hesho $600 ama ka badan oo ah dheefaha PTO 1 sano, Carewell SEIU 503 ayaa kuu soo diri doonto Form 1099-NEC (Foomka 1099-NEC). Sikastaba ha ahaatee, dheefta PTO ayaa weli loo tixgelin doonaa dakhli la canshuuri karo xitaa haddii aadan helin Form 1099-NEC (Foomka 1099-NEC). Haddii aad lumiso Form 1099-NEC (Foomkaaga 1099-NEC), fadlan la xiriir Carewell SEIU 503 so aad u codsato nuqul baddel ah. Waxaad sidoo kale tagi kartaa MyCarewell503 si aad uga soo baxsato nuqul ama aad sixitaan uga codsato.

## Qofka lagala xiriirayo Dheefta PTO

Haddii aad su'aalo ah ka qabto dheeftaada PTO ee Carewell SEIU 503 ee gaarka ah, oo ay ku jiraan su'aalaha ku saabsan haraaga dheeftaada PTO, fadlan kala xiriir Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348. Ama waxaad ka eegi kartaa haraagaaga PTO iyo wax kale oo badan barta **MyCarewell503**.

Haddii aad qabto su'aalo guud oo ku saabsan sida ay u shaqayso Carewell PTO, waxaad tagi kartaa bogga Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh ee ku jira **websaydhka Carewell SEIU 503**.

# DHEEFTA KAALMADA KHARASHKA DARYEELKA CAAFIMAADKA



Dheefta Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka (HCA) ee Carewell SEIU 503 waxay caawisaa in daryeelka caafimaadka laga dhigo mid ay awoodi karaan shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeeda iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed ee Oregon.

Kani maaha caymis uu leeyahay shaqo-bixiye ama Health Reimbursement Arrangement (Caymiska Magdhawga Kharashka Caafimaadka, HRA). Taas baddelkeeda, haddii aad horay u lahayd qorshahaaga caymiska caafimaadka gaarka ah (oo hoos si faahfaahsan looga hadli doono), markaas dheefaha HCA ee Carewell ayaa kaa caawin kara inaad bixiso khidamadahaaga ceymiska ee bil'laha ah iyo kharashyada aad jaabka ka bixiso ee xaqa leh.

## Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka noocee ah ayaan xaq u leeyahay?

Tani waa soo koobida shuruudaha xaq u yeelashada kaliya. Si aad u hesho faahfaahin dhamaystiran, fadlan ka tixraac liiska shuruudaha xaq u yeelashada ee ku jira boggaga 56-57 ee Hagahaan.

- **Waa inaadan heli karin noocyada kale ee caymiska caafimaadka, Tusaale ahaan,** tusaale ahaan Oregon Health Plan, caymiska laga helo loo-shaqeeye kale, ama caymiska lagu helo xaaskaaga/seygaaga. Waxaa jiro qaar ka reeban; fadlan eeg qaybta "Sharciyada Xaq U Yeelashada" ee Hagahaan.
- **Waa inaad xaq u leedahay dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo EAP ee Carewell SEIU 503 — taas oo ka dhigan inay qasab tahay inaad shaqeyso ugu yaraan 40 saacadood bishiiba 2 bilood oo isku xiga. Si aad xaq u sii lahaato, waa inaadan soo gudbinin 0 saacadood oo shaqo 2 bilood oo isku xiga.**

| Caymiska Caafimaadka | Caymiska Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka (HCA): |
|---|---|
| Medicare | • **Guud ahaan, qaddarka buuxa ee khidmada caymiska bil'laha ah ee Part B****<br>• **Qayb ah khidmadaada ceymiska bil'laha ah ee qorshaha Part D, Supplement, ama Advantage plan**<br>Kharashyada jeebka laga bixiyo ee adeegyada ay dabarto Medicare, ilaa gunnada kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee sanadlaha ah. |
| Qorsha caymiska caafimaadka ee Goob-suuqeedka ee La Oogolaaday* | Qaddarka buuxa ee khidmadaada caymiska bilaha ah (kadib marka laga jaro inta ugu badan ee la heli karo Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah)<br>Kharashyada jeebka laga bixiyo ee adeegyada uu dabarto qorshahaaga caymiska, ilaa gunnada kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee sanadlaha ah. *** |
| Qorsha caymiska caafimaadka Goob-suuqeedka **aysan oggolaanin** Hay'adda | Qayb ka mid ah khidmadahaaga caymiska bilaha ah oo u dhiganta celceliska dheefta magdhawga khidmada caymiska bil'laha ah ee Hay'adda.<br>Kharashyada jeebka laga bixiyo ee adeegyada uu dabarto qorshahaaga caymiska ilaa gunnada kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee sanadlaha ah. ***<br>Si aad u sii wadato helista dheefaha HCA, waxaad u baahan doontaa inaad iska diiwaan geliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay oo ku jira Goob-suuqeedka federaalka fursada ugu horeysa (guud ahaan open enrollment (muddada diiwaangelinta sanadlaha ah ee ceymiska caafimaadka), oo inta badan u dhaxaysa Noofambar 1 iyo Diseembar 15 ee caymiska bilaabanaya 1-da bisha Janaayo ee soo socota). |

Kuma aragtid miyaa caymiskaaga liiska kor ku xusan? Fadlan booqo websaydhka Carewell ee barta **CarewellSEIU503.org/benefits/healthcare-cost-assistance** ama wac **1-844-503-7348** si aad u ogaato haddii aad xaq u leedahay dheefaha HCA.

* Qualified health plan (Qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay) ee la oggolyahay waa nooc caymis ah oo ay soo doortaan Guddiga Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) oo lagu bixiyo goob-suuqeedka caymiska caafimaadka, midkood Goob-suuqeedka federaalka (**healthcare.gov**, kaas oo ah madasha macaamiisha Oregon) ama Goob-suuqeedka gobalkaaga ku salaysan (ee Washington: **wahealthplanfinder.org**, ee California: **coveredca.com**, ee Idaho: **yourhealthidaho.org**). Qorshayaasha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay waxaa doorteen Guddiga Maamulka inay tayadooda sarrayso iyo raqiisnimadooda awaadeed. Si aad u hesho dheefaha

| Caymiska Caafimaadka | Caymiska Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka: |
|---|---|
| Aan caymis lahayn - ma jiro caymis caafimaad | Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha HCA haddii aad iska diiwaan geliso qorshaha caymiska caafimaad la aqoonsan yahay ee la oggolyahay oo laga helo Marketplace (Suuqa).<br><br>Fadlan ogow: guud ahaan, waxaad iska diwaangelin kartaa oo kaliya inta lagu jiro xilliga Is-diiwaangelinta Furan (ee Marketplace (Suuqa) Federaalka, badanaa inta u dhaxaysa Noofambar 1 iyo Diseembar 15 ee caymiska laga bilaabo Janaayo 1 ee soo socota). |
| Caymiska dadka is-qabo | Haddii aad iska diiwaan geliso caymiska shaqada qofka aad is-qabtaan, xaq uma lihid dheefaha HCA. Haddii aad go'aansato inaadan iska diwaangelin qorshe caafimaad adiga oo isticmaalaya shaqada qofka aad is-qabtaan, waxa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha HCA haddii aad iska diiwaan geliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay ee Goob-suuqeedka.<br><br>Fadlan ogow: guud ahaan, waxaad iska diwaangelin kartaa oo kaliya inta lagu jiro xilliga Is-diiwaangelinta Furan (ee Marketplace (Suuqa) Federaalka, tan inta badanaa waxay u dhaxaysa Noofambar 1 iyo Diseembar 15 ee caymiska laga bilaabo Janaayo 1 ee soo socota). |
| Caymisyada kale ee loo shaqeeyaha | Haddii aad ka hesho caymis caafimaad oo uu kafaalo qaado loo-shaqeeyaha (iyada oo loo marayo loo-shaqeeye kale, ee aan ahayn shaqadaada daryeel bixinta), markaa uma qalantid dheefaha HCA. |
| Caymsia Medicaid / Oregon Health Plan | Uma qalantid dheefaha HCA wakhtigan. Fadlan na soo wac haddii aad lumiso caymiska Medicaid.<br><br>Ogoow: luminta caymiska Medicaid waxay noqon kartaa dhacdo nololeed muteysi leh oo kuu sahli doonto inaad iska diiwaangeliso caymiska Goob-suuqeedka inta lagu jiro Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah ee 60-maalmood ah. Haddii aad lumiso caymiskaaga Medicaid oo aad xaq u leedahay dheefaha Carewell SEIU 503, ka wac Carewell SEIU 503 isla markaaba lambarka 1-844-503-7348! |

HCA ee qorshaha caymiska la oggolyahay ee Goob-suuqeedka, waxaad u baahan tahay inaad iska diiwaan geliso qorshaha caymiska caafimaadka xaqa leh ee la oggolyahay ee deegaankaaga.

** Cadadka khidmada caymiska bil'laha ah ee saxda ah way kala duwan yihiin sanad walbo. Waxaad guud ahaan ka heli kartaa khidmada caymiska bil'laha ah ee caadiga ah ee Part B onleen ahaan barta **medicare.gov/your-medicare-costs/part-b-costs**.

*** Gunnada BCC ee sannadlaha ah ayaa laga yaabaa inay isbedesho sannad kasta. Ka eeg bogga 48-aad wixii faahfaahin ah dheeraad ah.

# Sidee ayay u shaqaysaa Dheefta Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka?

## Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Dadka Hela Medicare

- Buuxi warqadaha ay u baahan tahay Carewell SEIU 503 ee dadka ka diiwaangashan Medicare. Waxaad u baahan tahay oo kaliya inaad hal mar gudbiso midan marki laga reebo inay xogtaada wax iska baddesho. Waxaad warqadahan ka heli kartaa **MyCarewell503** ama barta **CarewellSEIU503.org**. Ama ka wac Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348 si aad u codsato nuqul.
- U soo gudbi foomka Magdhawga Khidmada Caymiska Bil'laha ah ee Medicare SEIU 503 oo wata warqadaha khidmadaada caymiska bil'laha ah ee Part B iyo khidmadaada caymiska bil'laha ah ee Part D, Supplement, ama Advantage, haddii ay jiraan. Caddaynta khidmadaada caymiska ee bil'laha ee Part B ahaan, soo gudbi nuqulka warqadaada Sooshiyaal Sekiyuuritiga ee sannadlaha ah ama biilka khidmada caymiska bil'laha ah ee Medicare ee CMS. Caddaynta khidmadaada caymiska ee bil'laha ee Part D, Advantage, ama Supplement ahaan, soo gudbi nuqulka qaansheegta oo tusinaysa cadadka khidmada caymiska bil'laha ah ee caymiskaaga.
- Markay Carewell SEIU 503 hesho dhammaan warqadahaaga: Carewell SEIU 503 waxay bilaabi doontaa inay ku siiso magdhawyada bil'laha ah ee khidmadahaaga caymiska bil'laha ah, midkood jeeg ahaan ama in si toos ah laguugu shubo akoonkaaga bangiga. Lacag wareejinta elektrooniga ah ayaa si guud degdeg badan oo badqab badan, waxaadna onleen ahaan iskaga diiwaangelin kartaa barta **MyCarewell503** ama barta **CarewellSEIU503.org/medicare**.
- Maamulaha BCC ee Carewell, Ameriflex, ayaa kuu soo diri doonta Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta (BCC), kaarka dukameysiga ee Mastercard, si aad ugu isticmaasho inaad ku bixiso kharashyada aad jaabka ka bixiso ee la xiriira adeegyada ay bixiso Medicare ee aad hesho, ilaa iyo xadka kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee sanadlaha ah. Uma isticmaali kartid BCC khidmadaada caymiska bil'laha ah ee Medicare ama inaad ku bixiso kharash walbo oo aan la xiriirin adeegyada ay dabarto Medicare.

Booqo **CarewellSEIU503.org/medicare** si aad u heshid macluumaad dheeraada ah iyo foomamka loo baahan yahay oo aad onleen ahaan ku gudbin karto.

## Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Qorshayaasha caymiska Xaqa Leh ee La Oggolyahay:

- Gal CarewellSEIU503.org/approved-plans si aad u hesho qorshayaasha caymiska la oggolyahay ee deegaankaga, iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaabooyinka aad u baahan tahay inaad qaado si aad iskuugu diiwaangeliso.
- Buuxi waraaqaha sanadlaha ah ee loo baahan yahay.
- Buuxi foomka codsashada dhefta HCA oo bixi warqadaha diiwaangelintaada qorshaha caymiska la oggolyahay ee Goob-suuqeedka, oo ay ku jiraan Ogaysiiskaaga Xaq U Yeelashada iyo biilka khidmada caymiska ee bil'laha ah. Ogoow: Tallaabadan looma baahna haddii aad isdiiwaangeliso ama aad ka cusboonaysiiso macluumaadkaaga Goob-suuqeedka caymiska adiga oo u maraya hay'adda caymiska ee nala-hawlgasho, Valley Insurance Professionals (VIP).

## Macluumaad Muhiim ah oo Ku Saabsan Dheefta HCA

- Haddii aad marki ugu koowaad xaq u yeelatay dheefaha Carewell SEIU 503 taariikh ka baxsan Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee caymiska Goob-suuqeedka, oo aad kolhore isku diiwaangelisay qorshe caymis aan la oggolayn oo laga helo Goob-suuqeedka caymiska caafimaadka, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho dheefta celceliska magdhawga khidmada caymiska bil'laha ah ee laga helo Carewell SEIU 503. Si aad xaq ugu sii lahaato dheefaha HCA, sikastaba ha ahaatee, waa inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka xaqa leh ee la oggolyahay ee deegaankaaga fursada xigta ee aad ku hesho — guud ahaan inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka).
- Guud ahaan, waxaad kaliya iska diiwaangelin kartaa, ama wax ka baddeli kartaa, caymiskaaga Goob-suuqeedka inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka). Goob-suuqeedka caymiska ee federaalka (healthcare.gov), **Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) waxay sida caadiga ah u dhaxaysaa Noofeembar 1 ilaa Diseembar 15 ee caymisyada bilaabanaya Janaayo 1 ee soo socota.** Waxaa jira xaalado ka reeban — dhacdooyin nololeedyada muteysiga leh (tusaale ahaan, guurka ama dhalashada ilmaha) ayaa kuu oggolaan kara inaad hesho Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah ee 60-maalmood ah. Luminta caymiska caafimaadka (ee sababaha aan ahayn lacag bixin la'aanta) ayaa sidoo kale xaq kuugu yeeli Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah. Haddii aad lumiso caymiskaaga caafimaadka oo aad xaq u leedahay dheefaha Carewell SEIU 503, ka wac Carewell SEIU 503 isla markaaba lambarka 1-844-503-7348!

Talo!

**Intarnet la'aan miyaad tahay?** Ka wac Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348!

# Soo bandhigida Kaarkaaga Dukaameysiga ee Dheefta!

Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta (BCC) waa kaarka dukameysiga ee Mastercard, kaas oo ay kuu soo diraan ayna maamulaan Ameriflex.




**Maxaan u isticmaali karaa Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta?**

| | Khidmada ceymiska ee bil'laha ah | Kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo |
|---|---|---|
| Ceymiska Suuqa libsiga Ceymisyada ee La Oggalyahay | **HAA!**<br><br>Waxyaabo ka reeban ayaa jiri kara, hoos eeg.<br><br>La xiriir shirakadaada ceymiska si aad u diyaariso kaarkaaga oo aad u sameyso bixinta khidmada ceymiska ee tooska ah. | **HAA!**<br><br>Kharashyada caafimaadka ee la dabaro (ilaa iyo gunnada BCC ee sanadlaha ah):<br><br>• **Lacag jarista qorshahaaga caymiska Goob-Suuqeedka ee la ansaxiyay**<br>• **Khidmada ceymiska iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib, oo ay ku jiraan daawada dhakhtarka uu qoro ee ceymsika leh** |
| Medicare | **Maya.**<br><br>Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho hannaanka magdhawga ee khidmadahaaga ceymiska ee Medicare.<br><br>Fadlan gal **CarewellSEIU503.org** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. | **HAA!**<br><br>Kharashyada caafimaadka ee la dabaro (ilaa iyo gunnada BCC ee sanadlaha ah):<br><br>• **Lacagaha lagaa jaro ee ceymiskaaaga Medicare**<br>• **Khidmada ceymiska iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib, oo ay ku jiraan daawada dhakhtarka uu qoro ee ceymsika leh** |

- Xitaa haddii aad xaq u leedahay dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka, wali waa mas'uuliyaddaada inaad siiso khidmadaada bil'laha ah ee caymiska caafimaadka shirkadaada caymiska.
    - Khidmadaada caymiska bil'laha ah ee ugu koowaad waa in la bixiyo ka hor taariikhda ugu koowaad ee caymiska sanad walbo.
    - Haddii aadan bixinin khidmadaada caymiska ee bil'laha ah ee koowaad ka hor taariikhda lagaa rabo ugu danbayn, caymiskaaga caafimaadka ma shaqayn doono, waxaadna is arki doontaa adiga oo aan haysanin wax caymis caafimaad ah inta ka hadhay sanadka oo dhan.
- Ameriflex ayaa kuu soo diri doonta Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta (BCC), kaarka dukameysiga ee Mastercard, si aad ugu bixiso khidmadaada caymiska ee bil'laha ah, ka dib marki lagaa jaro Canshuur Dhimista Khidmada Caymiska ee Hormariska ah ee ugu badan ee aad heli karto, iyo kharashyadaada caafimaadka ee aad jaabka ka bixiso ee adeegyada uu dabaro qorshahaaga caymiska caafimaadka.

## Tilmaamaha Isticmaalka iyo Ka Reebitaanada Dheeraadka ah:


- Guud ahaan, waxaad u isticmaali kartaa BCC-gaaga inaad ku bixiso khidmadahaaga caymiska bil'laha ah ee qorshahaaga caymiska Goob-suuqeedka ee la oggolaaday. Sikastaba ha ahaatee, haddii qoyskaaga uu ku jiro siyaasadaada caymiska caafimaadka ee Goob-suuqeedka (taas oo ka dhigan inaad leedahay caymis qoys baddelki mid kuu gaar ah), uma isticmaali kartid BCC inaad ku bixiso khidmadaada caymiska ee bil'laha ah. Taas baddelkeeda, waa inaad si toos ah u siiso khidmadaada caymiska ee bil'laha ah shirkadaada ceymiska adiga oo isticmaalayo lacagahaada gaarka ah, kadibna aad foomka magdhawga aad u gudbiso Carewell SEIU 503 kaas oo ay ku qoran tahay cadadka khidmadaada caymiska ee bil'laha ah ee gaarka ah. Tani waxaa ugu wacan in Carewell SEIU 503 ay dabarto kharashka khidmadaada caymiska ee bil'laha ah (kadib marka laga jaro inta ugu badan ee la heli karo Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah), balse aysan dabarin kharashka khidmadaha caymiska bil'laha ah ee xubnaha qoyskaaga. Ogoow: waxaad u isticmaali kartaa kaarkaaga BCC inaad ku bixiso kharashyadaada caafimaadka ee aad jaabka ka bixiso ee adeegyada uu dabaro qorshahaaga caymiska.
- Haddii aad hesho magdhawga khidmada ceymiska ee bil'laha ah ee celceliska ah sababtoo ah waxaad ka diiwaangashan tahay qorshaha caymiska aan la oggolayn ee Goob-suuqeedka caymiska, uma isticmaali kartid BCC inaad ku bixiso khidmadaada caymiska ee bil'laha ah. Taas baddelkeeda, waa inaad si toos ah u siisaa khidmadaada caymiska ee bil'laha ah shirkadaada ceymiska adiga oo isticmaalayo lacagahaaga gaarka ah kadibna u gudbinaya foomka magdhawga Carewell SEIU 503. Marka la helo foomkaaga magdhawga, Carewell SEIU 503 ayaa kuu magdhawi doonta ilaa iyo cadaddka ugu badan ee celceliska magdhawga khidmada ceymiska ee bil'laha ah. Ogoow: waxaad u isticmaali kartaa kaarkaaga BCC inaad ku bixiso kharashyadaada caafimaadka ee aad jaabka ka bixiso ee adeegyada uu dabaro qorshahaaga caymiska.

- Waxay kaa dalban karaan Maamulaha BCC (Ameriflex) inaad keento caddaynta kharashyada aad jaabka ka bixisay ee la dabaro, marka hubso inaad kaydiso dhammaan Dukumiintigaaga Sharaxaadaha Dheefaha (EOB) iyo rasiidhyada. Waxaa si gaar ah muhiim u ah inaad kaydiso rasiidhyadaada daawoyinka dhakhtarka uu qoray, maadaama kharashka daawada dhakhtarku qoro aysan ka soo muuqanin EOB-yada ay bixiso shirkadaada caymiska.
- Waxa ku jira 2 akoon oo kala gaar ah BCC-gaaga: mid lagu bixinayo khidmadahaaga ceymiska ee bil'laha ah (haddii ay jiraan), iyo mid kale oo aad ku bixinayso kharashka aad jaabkaaga ka bixiso ee la dabaro. Gunnada kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee 2023 waa $6,900.

**Kaarkaaga BCC wuxuu u shaqeeyaa sida kaarka dukaameysiga caadiga ah, marka laag reebo in:**

- Isticmaalka kaarkaaga wuu xadiddan yahay, taas oo ka dhigan inaad kaliya u isticmaali karto kharashyada la dabaro ee kor ku qoran. Fadlan la soco inaadan u isticmaali karin BBC kharashka qofka jaabkiisa laga bixiyo ee ceymiska ilkaha,aragga, iyo/ama adeedyada maqalka.
- Kuma isticmaali kartid kaarkaaga ATM ama inaad baaqi ku soo ceshato marka aad wax iibsaneyso.
- Wixii lacag bixin ah, waxaan kugula talinaynaa inaad u isticmaasho kaarkaaga sida kaarka amaahda ee dukaamaysiga baddelka sidi kaarka dukaamaysiga ee caadig ah.
- Ameriflex waa maamulaha BCC-gaaga. Waxaad ka eegi kartaa hadhaagaaga, ka eegi kartaa warbixinta lacag bixintaada, ka arki kartaa xaalada magdhawga, ka dablan kartaa kaar baddel ah iyo wax ka loo badan bogga intarnetka Ameriflex ee barta **ameriflex.wealthcareportal.com**; app-ka Ameriflex: **myameriflex.com/participants/the-ameriflex-difference/mobile-app**; ama inaad Ameriflex ka wacdo lambarka 1-888-868-3539.




Gunnada BCC ee Sanadlaha Ah ($)
GUNNADA BCC EE SANADLAHA AH ($)
8,000
7,000
6,000
5,000
4,000
3,000
2,000
1,000
0
2,500
3,000
3,000
4,000
5,000
6,000
6,190
6,500
6,600
6,900
2014
2015
2016
2017
2018
2019
2020
2021
2022
2023
SANAD



Carewell SEIU503

**Oregon Homecare Workers Supplemental Trust (Mu'asasada Kabista Shaqaalaha Daryeelka Guriga Ku Bixiya ee Oregon)**
**Soo Koobida Wax Ka Baddelka Dhigaalada**
**Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka**

Dukumeentigani wuxuu sharaxayaa isbeddelada qaarkood ee lagu sameeyay Hagaha Tabbabarka iyo Dheefaha ee Carewell SEIU 503 ee 2023 ("Hagaha"). Lambarada bogga waxay tixraacayaan qaybta Hagaha ee isbedeleysa. Fadlan u akhri si taxadar leh qoraalkan kooban.

**Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka - Qadarka Uu Qofku Iska Bixiyo**

Guddaha 2023, gunnada sannadlaha ah ee Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee kharashyada caafimaadka ee uu qofku iska bixinaayo ee dalabyada ay dabooshay Medicare ama qorshaha goob-suuqeed ay Mu'asaso ansixiyay waxa uu ahaa $6,900. Iyadoo dhaqangal ah Janaayo 1, 2024, gunnada sannadlaha ah ee Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee khidmada ceymiska ee qofka uu iska bixiyo ayaa la kordhiyey. Gunnada sanadlaha hadda waa:

- $7,165 kharashyada caafimaadka ee aad jaabka ka bixiso ee sheegashooyinka adeegyada ay dabarto Medicare 2024. Eeg boggaga 38, 39 ee Hagaha.
- $7,165 kharashyada caafimaadka ee aad jeebka ka bixiso ee sheegashooyinka ay dabarto qorshaha Goob-suuqeedka ee ay Mu'asaso ansixisay gudaha 2024. Eeg boggaga 38, 39 ee Hagaha.

**Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka - Magdhawga Khidmadaha Ceymiska ee Bil'laha Ah ee Celceliska Ah**

Guud ahaan, ka qaybgalayaashu waxay xaq u yeelan karaan Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka inta lagu jiro 1) Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Caymiska Caafimaadka) ama 2) Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah, sida lagu qeexay gudaha Hagaha. Si kastaba ha ahaatee, ka hor Abriil 29, 2024, haddii ka qaybqaataha uu iska diiwaan geliyo qorshahe aysan ansixinin Mu'asaso ka hor intaysan noqon mid u qalanta Mu'asaso, waxa laga yaabaa inay xaq u yeesheen inay helaan lacag-celinta caymiska ee qaddarkooda caymiska dhabta ah, ama celceliska qaddarka lacagta caymiska caafimaad ee billaha ah ee ay heleen bixiyayaasha daryeelka ee u qalma iyagoo u sii maraya Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka, hadba qaddarka lacagta caymiska caafimaad ee billaha ah midki yaraada.

Iyadoo dhaqangal ah Abriil 29, 2024 xeerarka ku saabsan celceliska lacag-celinta lacagta ceymiska ee billaha ah ayaa loo ballaariyay sida soo socota:

- Ka qaybgalayaasha hadda ka diiwaangashan qorshe ceymis oo aysan ansixinin Mu'asaso ee helaya magdhawga khidmadaha ceymiska ee bil'laha ah ee celceliska ah ayaa la kordhin doonaa qaddarka lacag-celintooda si ay u daboosho dhammaan khidmadaha bishiiba ah gudaha 2024.

- Si aad u hesho magdhawga/lacag-celinta dhammaan qaddarka khidmadaha, dhammaan ka qaybgalayaasha hadda ka diiwaangashan qorshe ceymis oo aysan ansixinin Mu'asaso waa in ay u soo gudbiyaan caddaynta diiwaangelinta qorshahooda iyo qaddarka lacagta caymiska caafimaad ee billaha ah ee ay bixiyaan Carewell SEIU 503.

Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee daboolaya dhammaan khidmadaha qorshayaasha aysan ansixinin Mu'asaso waxay dhammaan doontaa Janaayo 1, 2025. Si aad ugu qalanto dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka Janaayo 1, 2025 ka dib, ka qaybgalayaasha hadda ka diiwaangashan qorshe ceymis oo aysan ansixinin Mu'asaso waxay u baahan doonaan inay iska diiwaan geliyaan qorshe Goob-suuqeed ka jira oo la ansixiyay ama qorshaha Medicare inta lagu jiro:

- 2025 Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee 2025 ee bilaabmeysa Noofembar 1, 2024, ama

- Muddada Isdiiwaangelinta Gaarka ah ee 2024.

Eeg boggaga 32, 35, 37, 51, iyo 59 ee Hagaha.

## Macluumaad iyo Su'aalo Dheeraad ah

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan tababarka ama dheefaha laga yaabo inaad u qalanto inaad ka hesho adoo u sii maraaya Carewell SEIU 503, waxaad booqan kartaa CarewellSEIU503.org ama wici kartaa 1-844-503-7348.

## TABBABARKA CAREWELL SEIU 503

“Maadaama aan lahaa sanado waayo-aragnimo oo badan, waxaan ogaaday in xirfadahayga ay ku kobceen tabbabarka. Waxaa i cajabiyay in tusaalooyinka isdaba yaalo ee ay bixiyeen si wax looga qabto caqabadaha ay ku habboonaayeen xaalado aan ku jiray oo isla markaaba ay iga caawiyeen shaqadayda.

Qaybta ugu wanaagsan waxay ahayd in la i xasuusiyay inaan isku dayo inaan si wanaagsan u fahmo dadka aan daryeelka siiyo. Waxay kaa caawinaysaa inaad dib uga laabato oo aad doorkooda qaadato.

*Hydia H.*

Tabbabarka Carewell SEIU 503 wuxuu siiyaa shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada shaqsiyeed iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed tabbabar heersare ah si laguu siiyo agabka iyo kalsoonida aad u baahan tahay si aad u siiso macmiilkaaga taageerada ugu saameynta badan—ugu degdegga badan—ee suuragalka ah.

Kooxda Tabbabarka Carewell SEIU 503 waxay u jajaban tahay tabbabarka iyo kobcinta daryeel bixiyayaasha bixiya taageerada guriga dhexdiisa ee loogu talagalay dadka wawayn iyo dadka qaba naafanimada jirka, xiska, ama koriinka.



## Tabbabarka Shaqaalaha Cusub

Tabbabarka Shaqaalaha Cusub ee 3-da qayb ah wuxuu ka caawinayaa daryeel bixiyeyaasha cusub inay wax ka bartaan dorkooda ah sida shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada shaqsiyeed iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed wuxuuna horudhac kaa siinayaa inay siiyaan adeegyo badqab ah, tayo saro leh macmiilkooda.

**Qaar ka mid ah mawduucyada lagu qaato tabbabarkan waxaa ka mid ah:**

- **Dheefahaaga aad ka heli karto Carewell SEIU 503**
- **Xeerarka iyo sharciyada la xidhiidha, iyo sida mushahar loogu helo, shaqadaada**
- **Badqabka**
- **Adeegyada ku saleysan shakhsiga**
- **Is-daryeelidda**

---

## Waxbarashadda Dadka Wawayn

Laga bilaabo 2026, dhammaan shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha taageerada shaqsiyeed, iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed waa inay dhamaystiraan 12 saacadood oo waxbarashadda dadka wawayn ah 2 sano oo kasta si ay u cusboonaysiiyaan aqoonsigooda iyo lambarkooda daryeel bixinta.

Waxbarshada dadka wawayn waxay kaa caawinaysaa inaad la socoto dhaqamada ugu fiican ee shaqadaada iyo inaad sii wadato inaad kobciso xirfadaha aad ka siyaadsato wakhti ka dib shaqadaada. Waxa jira koorsooyin badan oo aad kala dooran karto si aad u fuliso shuruudaada waxbarashaddaada dadka wawayn.

Iyada oo ay tahay inaad qaadato 4 saacadood oo ah koorsooyinka la is faro oo ka hadli doona aqoonta dhaqameed iyo sharciyada haga daryeel bixiyeyaasha, waxaad u dooran kartaa sida aad adiga u rabto 8-da saacadood ee soo haray ee tabbabarka la isfaro, adiga oo ka dooranaya mawduucyada hoose:

- **Badqabka cuntada**
- **Wax ka barashada cudur ogaanshaha I/DD ee caadiga ah**
- **Dhaqamada ugu wanaagsan ee guri hagaajinta**
- **Kor wax u qaadida iyo qaab-joogsiga**
- **Wareejinta iyo qalabyada caawinta**
- **Maaraynta walbahaarka ee daryeel bixiyeyaasha**
- **Waa maxay aqoonsigu?**
- **Waa maxay is-dhexgalka noocyada bulshada iyo nidaamyada?**
- **Xirashada iyo iska bixinta Agabka Qofka Isku Difaaco (PPE)**
- **Si xun u isticmaalida daawada dhakhtarku qoro**
- **Eray bixinta caafimaadka ee daryeel bixiyeyaasha**
- **Nidaamyada jirka 1 iyo 2**
- **La shaqaynta macaamiisha aanan hadlin**
- **Bixinta adeegyada awoodda ku salaysan**

Kuwa la doorto qaarkood waa kuwo uu qofka isa siiyo halka kuwa kalana ay yihiin kuwo uu daadihiyo macalinka. Iskaan garee koodhka QR si aad u eegto daliil-hayaha koorsada oo aad wax badan uga ogaato noocyadan.

Markaad bogto dhammaan 12-ka saacadood ee tabbabarka, waxaad gunno ka heli doontaa Carewell SEIU 503 Training.

Fasalo dheeraad ah ayaa lagu soo dari doonaa si joogta ah. Ka eeg **bogga intarnetka barashada ee Carewell** wixii soo kordha.

# Waayo-aragnimadaada Tabbabarka

Tabbabarka Carewell SEIU 503 waxuu u heellan yahay bixinta khibradda tabbabarka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah. Taasi waa sababta aan koorsooyin badan ugu bixinno onlayn ahaan. Waxaan bixinaa xulashooyinka tababarka ee soo socda:

- **Qaybaha cashirka ee qofka asaga uu iswado** oo aad deeqsiin karto jadwalkaaga mashquulka ah, iyaga oo ku siinaya xoriyada aad ku sameyso wax yar oo tabbabar ah maalin kasta ama dhammaan hal fadhi.
- **Aqoon kororsiyada onleenka ah ee uu daadihiyo macalinka** waxa la qabtaa maalmo iyo waqtiyo kala duwan si ay kuugu haboonaato, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa iyo fiidadka. Ka ogoow bixiyeyaasha kale ee daryeelka oo la wadaag khibradaada markaad ka hadlayso mowduucyo muhiim ah sida isgaarsiinta iyo is-daryeelka.

Talo!

Ma leedahay baahi gaar ah oo la xiriirta tabbabarka? Ma leedahay helitaanka intarnetka oo xaddidan ama helitaanka teknoolojiyadda? Ma u baahan tahay turjubaan ama nuxurka koorsada oo ku qoran luuqadda aad doorbidayso? Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino! La soo xiriir Carewell adiga oo soo wacaya taleefon lambarka **1-844-503-7348** ama iimayl ugu soo dir **CarewellSEIU503training@RISEpartnership.com**. Waxaan kaa caawin karnaa inaad hesho xal sida ugu fiican kuugu shaqeeya!

# SOO KOOBIDA DHEEFAHA

## Soo Koobida Dheefaha

Shaqaalaha Daryeelka Guriga ("HCW-yada"), Shaqaalaha Taageerada Shaqsiga ("PSW-yada"), iyo Bixiyeyaasha Daryeelka Shaqsiyadeed ("PCA-yada") ee buuxiya Sharciyada Xaq U Yeelashada ee Carewell SEIU 503, sida lagu qeexay Hagahan, ayaa heli doona dheefaha ku qoran Qaybaha A.1, A.2, iyo A.3 ee hoose, iyada oo ku xiran xaddidaadaha Qaybaha .1 iyo B.2 ee hoose. HCW-yada, PSW-yada, iyo PCA-yada ee buuxiya sharciyada xaq u yeelashada ee CarewellSEIU 503 ee la xiriira dheefaha PTO ayaa heli doona dheefaha ku qoran Qaybta C.1 ee hoose.

A.1 Caymiska Dheefaha Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo qorshaha Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha (DVE) ee laga helo Hay'adda Dheefta.

A.2 Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka (HCA) - Medicare: Haddii aad caymis ka haysato Medicare, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhaw laga helo Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada): (a) Khidmadaha caymiska bil'laha ah ee Medicare Part B, ilaa iyo cadadka bil'laha ah ee ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka; (b) midkood Medicare Advantage Plan, Medicare Supplement Plan, ama Medicare Part D Plan, ilaa iyo cadadka bil'laha ah ee ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka; iyo (c) kharashyada khidmadaha adegga ceymiska, lacagta lagaa jaro, iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ee la xiriira sheegashooyinka lagu dabaro qorshahaaga caymiska Medicare (waxaa shardi ah in sheegashooyinka aad gashay kharashkooda adiga oo xaq u leh dheefaha Hay'adda), ilaa iyo cadadka ugu badan ee ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka. Si aad u ogaato xadka dheefaha hadda jira, booqo **CarewellSEIU503.org** ama wac 1-844-503-7348.

A.3 Dheefaha HCA – Marketplace Plan: Haddii aad ka diiwaangashan tahay qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay ee Goob-suuqeedka, waxaad xaq u yeelan kartaa kaalmada khidmada caymiska bil'laha ah ee laga helo Hay'adda Kaalmada ee loogu talagalay: (a) khidmada caymiska bil'laha ah ee qorshahaaga caymiska gaarka ah ka dib marka laga jaro dhammaan canshuur dhimista khidmadaha ee federaalka ee la heli karo; iyo (b) kharashyada khidmadaha adegga ceymiska ee caafimaadka iyo daawada dhakhtarku qoro, lacagta lagaa jaro, iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ee la xiriira sheegashooyinka uu dabaro qorshahaaga caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay, waxaa shardi ah in sheegashooyinka aad gashay kharashkooda adiga oo xaq u leh dheefaha Hay'adda, ilaa iyo cadadka ugu badan ee ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka. Si aad u hesho xadidaadaha dheefta hadda iyo liiska qorshahaaga caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay, booqo **CarewellSEIU503.org** ama wac 1-844-503-7348.

Si aad xaq ugu yeelato kaalmada khidmada caymiska bil'laha ah ee qorshaha caymiska caafimaadka ee laga helo Hay'adda, waa inaad doorato inaad codsato cadadka buuxa ee wixii ah Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah ee federaalka ee aad xaqa u leedahay inaad bixiiso khidmada caymiska bil'laha ah ee qorshahaaga caymiska Goob-suuqeedka. Haddii aad hesho Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah oo ka badan intaad heli lahayd sababta oo ah waxaad hoos u dhigtay dakhliga qoyskaaga sannadlaha ah, sidaas darteedna, ay qasab tahay inaad dib ugu celiso canshuur dhimista siyaadada ah IRS dhamaadka sanadka, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhawga lacagta siyaadada ah oo aad ka hesho Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada). Tani waxaa ugu wacan Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) ayaa laga yaabi lahaa inay bixiso wax badan oo ka mid ah khidmadaada caymiska bil'laha ah inta uu socday sanadka haddii ay ogaan lahayd inaad xaq u leedahay Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah oo intaas ka yar. Haddii, dhanka kale, aad ka hesho canshuur dhimista khidmada caymiska bil'laha ah oo dheeraad ah IRS dhamaadka sanadka sababtoo ah waxaad badisay qiyaasta

dakhliga qoyskaaga sannadlaha ah, waxaa waajib kugu ah inaad u celiso Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) canshuur dhimista khidmada caymiska bil'laha ah ee dheeraad ah ee aad heshay. Tani waxaa ugu wacan Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) waxay ka bixin lahayd wax ka yar khidmadaada caymiska bil'laha ah inta lagu jiray sanadka hadii aad heli lahayd Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah oo sax ah inta lagu jiro sanadka.

B.1 Waxaad xaq u sii lahaan doontaa dheefaha ku qoran Qaybta A ee kore marki laga reebo inaad soo gudbiso saacadaha kooxda gorgortanka oo 0 ah 2 bilood oo isku xigta. Xaaladaha noocan oo kale ah, waxaa jiri doona 1 bil oo muddo kordhin ah ka hor intaan la luminin xaq u yeelashada. Tusaale ahaan, haddii aad soo gudbiso 0 saacadood Diseembar 2023 iyo Janaayo 2024, waxaad lumin doontaa xaq u yeelashada laga bilaabo Maarso 1, 2024. Carewell SEIU 503 ayaa kuu soo diri doonta warqad digniin ah ka dib bisha koowaad ee saacadaha kooxda gorgortanka ee aad soo gudbisay ay tageen 0, waxayna ku siin doonaan ogaysiiska horumariska ee joojintaada xaq u yeelashada dheefaha Carewell SEIU 503 ka dib bisha labaad ee ku xigta ee aad haysato saacadaha kooxda gorgortanka oo 0 ah.

B.2 Waxaad xaq u yeelan inaad hesho dheefaha lagu qeexay Qaybta A.2 iyo A.3 ee kore kaliya ilaa iyo heerka aadan horay u heli jirin, oo aadan xaq u lahayn inaad ka hesho, caymiska caafimaadka ama kaalmada khidmada caymiska bil'laha ah il kale, marka laga reebo kuwan soo socda oo xadidan:

(i) haddii aad xaq u leedahay caymis kale oo daryeelka caafimaad oo laga helo shaqadaada ama shaqada xaaskaaga/seeygaaga balse aadan dooranin inaad iska diiwaangeliso caymiska noocaas ah, markaas ka dib waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho dheefaha lagu qeexay Qaybaha A.2 iyi A.3;

(ii) haddii aad hadaba hesho, ama aad xaq u leedahay inaad hesho, caymiska dheefaha halyeeyga ciidan kaas oo aan kaa joojinaynin inaad hesho Canshuur Celinta Khidmadaha ee Hormariska ah ("APTC") ee federaalka, markaas waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho dheefaha lagu sharxay Qaybaha A.2 iyo A.3; oo

(iii) haddii aad lumiso xaq u yeelashada APTC sababtoo ah kamaadan jawaabin codsiga macluumaadka, ama haddii kale aad ku guuldareysatid inaad qaadatid wax tallaabo ah oo loo baahan yahay si loo sii wado APTC, waxaad xaq u yeelan doontaa inaad hesho kaliya dheefta kaalmada khudmada caymiska e bil'laha ah taas oo ay bixin lahayd Hay'adda haddii aan la joojin lahayn APTC-gaaga.

B.3 Haddii mushahar aad ku heshid Barnaamijka Kaalmada Lacagta iyo Madaxabaaanida Daryeelka, oo macmiilkaaga uu isticmaalo Acumen hay'adiisa mushahar bixin ahaan, waxaad xaq u yeelan kartaa dheefaha laga helo Hay'adda.

C.1 Dheefaha Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh (PTO): Haddii aad u shaqayso sida PSW, HCW, iyo/ama PCA ahaan oo aad buuxiso Shuruudaha Xaq U Yeelashada ee dheefaha PTO, waxaa lagu siinayaa 1 saac oo Dheefta PTO ah 20 saacadood kasta oo aad saacadaha kooxda gorgortanka bogto inta lagu jiro bil walbo.

Saacada dheefta PTO waxaa lagu xadidaa Inta Ugu Badan ee Bisha Uruurta oo ah 4 saacadood bishiiba, xitaa haddii aad shaqayso wax ka badan 80 saacadood oo saacadaha kooxda gorgortanka ah bishi. Saacadaha la shaqeeyay 1 bil looma gayni karo saacadaha laga shaqeeyay bil kale iyada oo ujeedku yahay in la iska uruuriyo dheefaha PTO.

Haddii aad saacado ka hesho shirkadaha mushaharka oo badan, markaas dhammaan saacadaha isla bishaas ah ayaa la isku gayn doonaa si loo xisaabiyo saacadaha dheeftaada PTO ee bishaas.

Haraaga dheeftaada PTO waa haraaga ka haray saacadaha dheefta PTO ka dib marka la saxo haraaga uruuritaanka, bixinta ama dhicitaanka

dheefaha PTO ee bil walbo. Kani waa haraaga aad heli karto si aad lacag ugu baddelato. Saacadaha dheefta PTO ee la isku uruuriyay ee aan la bixinin bil walbo ayaa lagu daraa haraaga dheefta PTO dhamaadka bisha.

## Macluumaadka Guud

### Dheefaha HCA - Bixinta Khidmadaha Caymiska Bil'laha ah iyo Kharashyada Uu Qofka Jaabkiisa Ka Bixiyo

Markaad xaq u yeelato dheefaha HCA, Carewell SEIU 503 ayaa ku siin doonta Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta ("BCC") kaas oo lagu sii shubi doono labaduba: (a) cadadka looga baahan yahay khidmada caymiska bil'laha ah ee caymiskaaga caafimaadka (kadib marka laga jaro inta ugu badan ee la heli karo Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah, haddii ay jirto); iyo (b) cadadka magdhawga kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee la heli karo Caymis Sanadeedka (sida ay go'aamiyeen Guddiga Maamulka) si aad ugu bixiso kharashyada lacagaha lagaa jarayo, khidmada ceymiska, lacagaha haraaga lacag jarista kadib ee dheefaha caymiska leh iyo adeegyada lagu siiyo ee uu dabaro qorshahaaga caymiska la aqoonsan yahay ee ay oggolaatay Hay'adda.

Inta aad xaqa u leedahay dheefaha HCA, waxaad kuu isticmaali kartaa kaarkaaga BCC goobaha dhakhaatiirta, xafiisyada, farmashiyaasha, iyo goobaha kale adeeg bixiyeyaasha caafimaadka si aad ugu bixiso lacagaha lagaa jarayo, khidmada ceymiska, lacagaha haraaga lacag jarista kadib ee laguugu yeesho ee la xiriira adeegyada uu dabaro qorshahaaga caymiska la aqoonsan yahay ee ay oggolaatay Hay'adda. Waa inaad kaydiso dukumiintiga sharaxaadaha dheefaha ("EOBs") ee aad ka hesho shirkadaada caymiska caafimaadka ee la xiriirta kharash walbo oo aad bixisay adiga oo isticmaalaya BBC, sababtoo ah waxaa lagaaga baahan karaa inaad siiso caddaynta in kharashyadan ay yihiin dheefo la dabaro Maamulaha BCC ee Carewell SEIU 503 (Ameriflex).

Uma isticmaali doontid kaarkaaga BCC inaad ku bixiso kharash walbo oo aan lagu dabarin qorshahaaga caymiska la aqoonsan yahay ee ay oggolaatay Hay'adda, oo ay ku jiraan kharash walbo oo uu leeyahay qof aan adiga ahayn. Sidoo kale uma isticmaali doontid kaarkaaga BCC inaad ku bixiso dheefaha ama kharashyada Ilkaha, Aragga, Maqalka, iyo Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha ("DVE"). Tag boggaga 36-38 ee Hagahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kaarka BCC.

### Caymiska Lagu Helo Qorshaha Xaaskaaga/Seygaaga

Haddii aad buuxiso Shuruudaha Xaq U Yeelashada ee dheefaha PTO oo aad xaq u leedahay caymiska laga helo loo-shaqeeyaha xaaskaaga/seeygaaga balse aad dooratay inaadan iska diiwaangelinin caymiska noocaas ah, waxaad xaq u yeelan doontaa inaad dheefaha HCA ka hesho Carewell SEIU 503 haddii aad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska Goob-suuqeedka ee ay Hay'addu oggolaatay. Haddii aad xaq u leedahay Canshuur Celinta Khidmadaha ee Hormariska ah ee federaalka, Carewell SEIU 503 ayaa bixin doonta sida ay u dhan tahay khidmadaada caymiska bil'laha ah ee qorshahaaga caymiska caafimaadka Goob-suuqeedka ee la oggolaaday.

Ogoow: Haddii aad iska diiwaan caymiska xaaskaaga/seeygaaga, xaq uma yeelan doontid dheefaha HCA. Sikastaba ha ahaatee, haddii aad buuxiso Shuruudaha Xaq U Yeelashada ee dheefaha DVE iyo/ama PTO, waxaad wali xaq u lahaan doontaa inaad hesho dheefahaas.

### Reer Leh Balse Buuxinaya Canshuur Celin Gaar Ah

Guud ahaan, haddii aad reer leedahay balse aad buuxiso canshuur celinta dakhliga oo gaar ka ah xaaskaaga/seeygaaga, halki aad isla buuxin

lahaydeen mid guud, xaq uma lihid inaad hesho canshuur dhimista khidmadaha ee federaalka ee caymiska caafimaadka laga iibsaday Goob-suuqeedka, marki laga reebo inuu jiro ka reebitaan uu sharciga farayo. Xaaladaha noocaas oo kale ah, haddii aad xaq u leedahay inaad hesho dheefaha HCA ee Carewell SEIU 503, markaas Carewell SEIU 503 ayaa bixin doonta kaalmada khidmada caymiska bil'laha ah ee sida ay u dhan tahay khidmadaada caymiska bil'laha ah ee qorshahaaga caymiska caafimaadka Goob-suuqeedka ee la oggolaaday.

## Shaqaalaha Aan Warqadaha Sharciga Haysanin

Sida uu dhigayo Affordable Care Act (Sharciga Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo), haddii aad tahay soogalooti aan warqado sharci haysanin, xaq uma lihid inaad caymis caafimaad ka iibsato Goob-suuqeedka caymiska. Sikastaba ha ahaatee, waxaad xaq u yeelan kartaa dheefo gaar ah haddii aad buuxisid Sharciyada Xaq U Yeelashada ee lagu qeexay Hagahan. La xiriir SEIU 503 si aad wax badan u ogaato.

## Caymiska laga helo Medicare

Kuwa xaqa u leh HCW-yada, PSW-yada, iyo PCA-yada, Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada), iyada oo la soo marinayo dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Carewell SEIU 503, ayaa magdhawi doonta kharashka khidmadaha caymiska bil'laha ah ee Medicare Part B, ilaa iyo cadadka ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka.

Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) waxay sidoo kale kuu magdhawi doontaa khidmadaha caymiska bil'laha ah ee badeecada dookhaaga ah ee Medicare Advantage, ama Medicare Supplement, ama Part D, ilaa iyo cadadka ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka. Waxaad xaq u yeelan kartaa magdhawga kharashyada uu qofka jaabkiisa ka bixiyo gaar ah, sida kuwa lagaa jarayo, khidmada ceymiska, lacagaha haraaga lacag jarista kadib, iyo kuwa daawada dhakhtarku qoro ee adeegyada ay dabarto Medicare, ilaa iyo cadadka ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka. Si aad u hesho macluumaadki ugu danbeeyay ee ku saabsan cadadka sanadlaha ah ee khidmadaha caymiska bil'laha ah iyo kharashyada uu qofka jaabkiisa ee la dabaro ee Medicare, booqo **CarewellSEIU503.org** ama wac 1-844-503-7348.

Si ay kaaga caawiso kharashyadan Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada), waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso Carewell SEIU 503 foomka sheegashada magdhawga (ee laga helo MyCarewell503 ama websaydhka Carewell SEIU 503, ama inaad wacdo lambarka 1-844-503-7348) oo wata caddaynta kharashka khidmada caymiska ee bil'laha ah. Macluumaadkan wuxuu kaliya u baahan yahay in hal mar loo gudbiyo magdhawga khidmada caymiska bil'laha ah ee Part B, balse waa in la gudbiyo sanad walbo si aad u sii wadato inaad hesho magdhawga kharashyada kale ee la xiriira Medicare ee kor lagu soo sharaxay. Haddii cadadka khidmada caymiska bil'laha ah ee Medicare Part B uu isbaddelo, waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso mid kale foomka sheegashada magdhawga Part B si aad u hesho cadadka lacagta ee cusub. Hay'adda ayaa xaqiijin doonta saacadaha aad shaqaysay bil walbo ka hor intaan lagu siinin magdhaw.

Haddii aad xaq u leedahay dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka (HCA), waxaad heli doontaa Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta (BCC) kaas oo loo isticmaali karo in lagu bixiyo kharashyada khidmadaha adegga ceymiska ee caafimaadka iyo daawada dhakhtarku qoro, lacagta lagaa jaro, iyo lacagaha haraaga lacag jarista kadib ee la xiriira sheegashooyinka uu dabaro qorshahaaga caymiska Medicare, ilaa iyo cadadka sanadlaha ah ee ay go'aamiyaan sanad walbo Guddiga Maamulka, waxaa shardi ah in sheegashooyinka aad gashay kharashkooda adiga oo xaq u leh dheefaha HCA ee laga helo Hay'adda. Sikastaba ha ahaatee, haddii aad u isticmaali jirtay kaarka BCC inaad ku bixiso

khidmadaha qorshaha caymiska Goob-Suuqeedka, halka farqi ee weyn ee u dhexeeya markaad u wareegto Medicare waa inaadan u sii isticmaali karin kaarka BCC khidmadha caymiska bil'laha ah ee Medicare. Taa beddelkeeda, waxaad u baahan doontaa inaad u soo gudbiso foomka sheegashada magdhawga Medicare khidmadahaaga caymiska bil'laha ah ee Medicare.

Waxay kaa dalban karaan Maamulaha BCC (Ameriflex) inaad keento caddaynta kharashyada, marka fadlan kaydso Dukumiintigaaga Sharaxaadaha Dheefaha (EOB) iyo dhammaan rasiidhyada (gaar ahaan rasiidhyada qoraalka daawada maadaama kharashyada daawada dhakhtarku qoro aysan ka muuqanin EOB-yada ay bixiso shrikadaada ceymiska).

## Caymiska laga helo Goob-suuqeedka Caymiska

Dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka (HCA) ee Carewell SEIU 503, ee ay bixiso Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada), waxay ka caawiyaan shaqaalaha xaqa u leh inay bixiyaan kharashyada khidmadaha caymiska ee bil'laha ah ee ceymiska daryeelka caafimaadka ee gaarka ah ee hoostaga qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday ee lagu helo Goob-suuqeedka habboon.

Haddii aad leedahay caymiska caafimaadka ee shaqsiga u gaarka ah ee laga helo qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday, Dheefaha HCA ee Carewell SEIU 503 waxay guud ahaan dabarayaan cadadka haray ee khidmada caymiska bil'laha ah kadib marka laga jaro inta ugu badan ee la heli karo Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah ee federaalka. Tusaale ahaan, haddii aad xaq u leedahay Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah ee federaalka ee bil'laha ah oo dhan $500, oo khidmada caymiska bil'laha ah ee caymiska caafimaadka ee qorshahaaga caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday ay tahay $1,000, markaas ka dib marki lagaa jaro canshuur dhimistaada dhamaystiran ee $500 ah, dheefahaaga HCA ayaa bixin doona kaalmada khidmada caymiska bil'laha ah ee $500 ee hadhay, adigana waxba jaabkaaga kama bixinaysid. Haddii, sikastaba ha ahaatee, aad leedahay caymiska qoyska, dheefahaaga HCA waxay magdhawi doonaan oo kaliya qaybta khidmada caymiska bil'laha ah ee la xiriirto caymiskaaga gaarka ah oo kaliya, kadib marka laga jaro inta ugu badan ee la heli karo Canshuur Dhimista Khidmadaha ee Hormariska ah ee federaalka.

Carewell SEIU 503 waa inay hesho magacaaga, jinsigaaga, lambarkaaga Soshiyaal Sekuyuritiga, taariikhdaada dhalashada iyo ciwaankaaga guriga ee haddadan si ay kuu siiso dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka. Waxay mas'uuliyad kaa saaran tahay inaad macluumaadkan ka cusboonaysiiso Gobalka Oregon iyo Carewell SEIU 503.

Fadlan ka tixraac qaybta Sharciyada Xaq U Yeelashada ee Hagahaan ee boggaga 56-57 wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida xaq loogu yeesho dheefaha HCA ee Carewell SEIU 503. Haddii aad u xaq u leedahay Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka, waxaad heli doontaa Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta (BCC), kaarka dukameysiga ee Mastercard, si aad ugu bixiso khidmadahaaga caymiska ee bil'laha iyo kharashyada aad jeebka ka bixiso.

**Kaarka BCC looma isticmaali karo:**

- **daryeelka ilkaha ama adeegyada aragga iyo maqalka;**
- **kharashka xaaskaaga/seeygaaga ama kuwa kugu tiirsan;**
- **kharashyada adeegyada qorshahaaga daryeelka caafimaad ma dabooli karan;**
- **kharashyada la galay inta aanad u qalmin Caawimada Kharashka Daryeelka Caafimaadka;**
- **kharashyada daawaynta ee laga soo bilaabo kallandarka hore.**

Haddii qoyskaagu uu ku jiro siyaasaddaada caymiska caafimaadka, ma awoodi doontid inaad u isticmaasho kaarka BCC lacag-bixintaada khidmada caymiska ee bil'laha ah. Taas baddelkeeda, waa inaad si toos ah lacagta u siiso shirkadaada caymiska kadibna aad u gudbiso nuqulka biilkaaga iyo caddaaynta lacag bixinta Carewell SEIU 503, oo uu la socdo foomka magdhawga oo buuxa. Hay'adda ayaa markaas ka dib kuu magdhawi doonta qaybta khidmada caymiska bil'laha ah ee kaliya ku habboon caymiskaaga gaarka ah, kadib marka laga jaro inta ugu badan ee la heli karo Canshuur Dhimistaada Khidmadaha ee Hormariska ah.

Dheeftan waxay shaqaynaysaa oo kaliya haddii aad ka diiwaangashan tahay qorshaha caymiska Goob-suuqeedka ee la oggalyahay. Sikastaba ha ahaatee, haddii aad xaq u yeelatay dheefaha Carewell SEIU 503 ka dib markay dhamaatay Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee u dambeysay, oo aad isku diiwaangelisay qorshe caymis aan la oggolayn oo laga helo Goob-suuqeedka caymiska caafimaadka, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhawyada khidmadaha ceymiska bil'laha ee celceliska ah ee laga helo Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka. Si ay kuugu sii socdaan dheefaha HCA ee Carewell SEIU 503 ka dib dhamaadka sanadka, sikastaba ha ahaatee, waa inaad iska qortaa qorshe caymis oo la oggolyahay fursadaada ugu horeysa ee aad hesho iyo ugu danbayn Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) (sida caadiga ah u dhaxaysa Noofembar 1 iyo Diseembar 15). Haddii kale, dheefahaaga HCA ee Carewell SEIU 503 ayaa joogsan doona dhammaadka sanadka.

Si aad u eegto qorshahaaga caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay ee hadda jira, booqo websaydhka Carewell SEIU 503 website ee barta **CarewellSEIU503.org** ama wac 1-844-503-7348.

## Kharashyo Noocee ah Ayaysan Dabarin Hay'adda?

Kuwani waa qaar ka mid ah tusaalayaasha kharashyada aysan dabarin Carewell SEIU 503. Waxaad mas'uul ka tahay inaad lacagahan jaabkaaga ka bixiso.

- **Kharashyada la xiriira adeegyada iyo saadka aysan dabarin Medicare ama qorshahaaga caymiska la aqoonsan yahay ee ay oggolaatay Hay'adda**
- **Khidmadaha adegga ceymiska, kharashyada lacagaha haraaga lacag jarista kadib, lacagta lagaa jaro ee ka badan dheefta kharashka jaabka laga bixiyo ee sanadlaha ah.**
- **Kharashka xaaskaaga/seeygaaga ama kuwa kugu tiirsan.**

## Magdhawga Iswaafajintanta Canshuur Dhimista Khidmada Caymiska ee Hormariska ah

Waxay laga yaabaa inaad Canshuur Dhimista Khidmada Caymiska ee Hormariska ah (“APTC”) ka hesho dawlada federaalka taas oo hoos u dhigaysa kharashka khidmadahaaga bil'laha ah ee caymiska caafimaad. Maadaama cadadka APTC uu ku salaysan yahay qiyaasta dakhliga qoyskaaga ee sanadlaha ah, waxaa macquul ah inaad hesho APTC aad u yar ama aad u badan inta lagu jiro sanadka (sababtoo ah waxaad yaraysay ama badisay qiyaasta dakhliga qoyskaaga sannadlaha ah). Xaaladahan oo kale, waxaa lagaaga baahan karaa inaad dib lacag ugu celiso dawladda federaalka (sababtoo ah waxaad heshay APTC aad u badan inta lagu jiray sanadka) ama waxaa laga yaabaa inaan lacag dhimis dheeraad ah ka hesho dawladda federaalka (sababtoo ah waxaad heshay APTC aad u yar inta lagu jiray sanadka).

Haddii dawladda federaalka ah ay ku ogaysiiso inay qasab tahay inaad soo celiso qayb ka mid ah lacagta

APTC ee aad heshay sababtoo ah waxaad yaraysay qiyaasta dakhliga qoyskaaga sannadlaha ah, waa inaad la xiriirto Carewell SEIU 503, sababtoo ah waxaa xaq u yeelan kartaa inaad magdhaw ka hesho Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) taas oo ah cadad ku filan inay wada dabarto, ama qayb ka bixiso, lacagta dheeraadka ah ee lagaaga leeyahay dawladda federaalka. Marnaba ma dhacayso inaad xaq u yeelato magdhaw cadad ahaan ka badan kharashka khidmada caymiska bil'laha ah ee Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) ay bixin lahayd haddii ay sax ahaan lahayd APTC.

Waxaa sidoo kale macquul ah inaad lacag celin ka hesho dawladda federaalka ah dhamaadka sanadka haddii qiyaasta dakhliga qoyskaaga sanadlaha ah ee dhabta ah uu ka yaraa inta aad horay u qiyaastay. Haddii ay dawladda lacag kuugu soo celiso sababtan aawadeed, waxaa qasab ah lacagta la soo celiyay inaad siiso Hay'adda. Tani waa lacagta Hay'adda ay xad-dhaaf ahaan u siisay shirkada caymiska inta lagu jiray sanadka sababta oo ah qiyaastaada dhakhliga qoyskaaga sanadlaha ah ayaa khalad ahayd. Waxaad mas'uul ka tahay inaad la xiriirto Carewell SEIU 503 isla markaaba haddii ay dhacdo inaad hesho canshuur celin la xiriirta cadadka APTC-ga.

Si aad uga fogaato baahi kasta oo sababta inaad saxdo lacagtaada APTC, fadlan xusuuso inaad ogaysiiso Goob-suuqeedka caymiska wixii isbaddel ah ee ku yimaada dakhliga qoyska inta lagu jiro sanadka. Si aad midan u samayso, la xiriir Carewell SEIU 503 si aad u qabsato ballan laguugu saxo dakhliga aad ku soo gudbisay codsigaaga Goob-suuqeedka.

## Habraaca Sheegashooyinka iyo Racfaanka

### U Gudbinta Sheegashada Magdhawga Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada) ama Benefit Trust (Hay'adda Dheefta)

Codsiyada magdhawga waxaa qasab ah in loo gudbiyo Carewell SEIU 503. Hay'adda waxay kaliya oggolaan doontaa wixii magdhaw ama sheegasho lacag ah ee jira ilaa iyo 1 sano laga soo bilaabo taariikhda adeegga. Sharcigan wuxuu qabanayaa kharashyada Medicare, caafimaadka, iyo khidmada caymiska bil'laha ah; sixitaanada Canshuur Dhimista Khidmada Caymiska ee Hormariska ah, iyo PTO. Wixii sheegasho ah oo ka wayn 1 sano waxay u baahan doontaa in racfaan loo diro Guddiga Maamulka 180 maalmood gudahooda ka dib diidmada.

Foomamka waxaa laga heli karaa **MyCarewell503** ama websaydhka Carewell SEIU 503. Carewell SEIU 503 waxay sida caadiga ah go'aan kaga gaari doontaa sheegashadaada 30 maalmood gudahood ka dib marki la helo. Haddii Carewell SEIU 503 ay u baahato wakhti dheeraad ah inay ku soo jawaabto, sida caadiga ah waxay go'aan kaga gaari doontaa sheegashadaada 45 maalmood gudahooda ka dib marki la helo. Waa lagu ogaysiin doonaa haddii Carewell SEIU 503 ay u baahato macluumaad dheeraad ah. Haddii aadan bixinin macluumaadka dheeraadka ah, Carewell SEIU 503 waxay go'aan ka gaari doontaa sheegashada iyada oo ku salaynaysa macluumaadka ay hayso. Haddii sheegashadaada si qaldan loo buuxiyay, waxaa laguugu ogaysiin doonaa 10 maalmood gudahooda waxaana lagu siin doonaa macluumd ku saabsan sida loo saxayo.

Haddii sheegashadaada la diido, waxaad heli doonaa qoraal sharaxaya oo ay ku jiraan:

- **Sababta (sababaha) loo diiday.**
- **Sharciga(sharciyada) gaarka ah ee go'aanka lagu saleeyay.**
- **Macluumaad kasta oo dheeraad ah oo ku habboon dib u tixgelinta sheegashadaada, oo ay ku jiraan sababta(sababaha) uu macluumaadka noocaas ah u habboon yahay.**
- **Habraacyada racfaanka ee Hay'adda iyo taariikhaha kama danbaysta ah ee habraacyadaas.**
- **Lagaagama baahno inaad racfaanka go'aanka ka qaadatid Guddiga Maamulka. Sikastaba ha ahaatee, sida ay dhigayaan sharciyada Qorshaha Caymiska, waa inaad wada isticmaasho xalkaaga maamulka adiga oo racfaan u gudbinaya Guddiga Maamulka ka hor intaadan xuquuq u yeelanin inaad dcawo xarayso.**

## Habraaca Racfaanka

Haddii sheegashadaada hore ay soo diido Carewell SEIU 503, waa inaad buuxiso foomka Rafcaanka, oo laga heli karo **CarewellSEIU503.org**, 180 maalmood gudahooda ka dib helitaanka diidmada. Racfaankan qoraalka ah waa inuu sheego sababaha aad codsanayso racfaanka. Waxaad dooran kartaa wakiilka la oggolyahay inuu ku matalo adiga. Si aad u samayso midaas, waa inaad qoraal ahaan ku ogaysiiso Carewell SEIU 503 magaca, cinwaanka guriga, iyo lambarka taleefonka ee wakiilka. Waxaa awood macquul ah laguu siin doonaa inaad hesho oo aad nuqul kala baxdo dukumiintiyada ku habboon sheegashadaada. Waxaad arrimaha iyo faallooyinka ku soo gudbin kartaa qoraal ahaan. Waxaad codsan kartaa nuqulada dhamaan macluumaadka la tixgeliyay inta uu socday racfaanka.

Racfaankaaga waxaa sida caadiga ah go'aan ka gaari doona Guddiga Maamulka 60 maalmood gudahooda ka dib markay hesho racfaanka Carewell SEIU 503.

Haddii loo baahdo in wakhtiga loo dheereeyo dib u eegista, waxaa laguugu soo ogaysiin doonaa boostada, waxaadn sida caadiga ah heli doontaa go'aan wakhti aanan ka danbaynin 120 maalmood kad marki la helo racfaankaaga. Carewell ayaa kuu soo diri doonta ogaysiiska go'aanka racfaanka 5 maalmood gudahooda ka dib marki go'aanka la soo saaro.

Haddii racfaankaaga la diido, waxaad heli dontaa ogaysiis qoraal ah oo ay ku jirto macluumaad aqoonsanaya sheegashada, sababta(sababaha) diidmada iyo sharciyada Hay'adda ee go'aanka lagu saleeyay.

Haddii aad rabto inaad dacwad xarayso ku saabsan Carewell ama diidmada Guddiga Maamulka, waa inaad ku xarayso 1 sano gudahiisa ka dib diidmada racfaankaaga.

## Lacag Bixinta Siyaadada ah

Hay'ad walbo waxay leedahay xal maxkamadeed xaq-siinta ah, dacwo hantiyeeda rahanka ah, iyo/ama dacwo hantiyeeda cadaalad siinta ah heshiiska lagu yahay ee hiilinaya Hay'adda ee khuseeya lacag bixin kasta oo siyaada ah ama dheefaha horumariska ah ee aad heshay adiga ama wakiilkaaga (oo uu ku jiro qareenka) ee ay kaa rabto Hay'adda, iyo lacag kasta oo noocaas ah oo loo arko inaad rahan u haysato adiga baddelki dheefta Hay'adda ilaa iyo laga siiyo Hay'adda. Markaad aqbasho dheefaha Hay'adda, waxaad ogashay oo aad ku raacsan tahay in xal maxkamadeed xaq-siinta ah, dacwo hantiyeeda rahanka ah, iyo/ama dacwo hantiyeeda cadaalad siinta ah heshiiska lagu yahay ee u hiilinaya Hay'ad walbo oo habboon ay jiraan iyada oo la eegayo mid kasta wixii lacag bixin siyaado ah ama horumarinta dheefaha. Sida waafaqsan xal maxkamadeed xaq-siinta ah, dacwo hantiyeeda rahanka ah, iyo/ama dacwo hantiyeeda cadaalad siinta ah heshiiska lagu yahay, waxaad oggoshahay inaad kala shaqayso Hay'adda inaad u celiso dhammaan qiimayaasheeda iyo kharashyadeeda la xiriira uruurinta dheefahan.

Hay'adda waxay ku soo ceshan kartaa dheefaha ay siyaadada u bixisay inay ka jarto oo ay ku saxato dhammaan dheefaha mustaqbalka kuwaas oo haddii kale ay bixin lahayd Hay'adda adiga booskaaga.

Haddii aad ku guuldaraysato inaad lacag u celiso Hay'adda oo looga baahdo Hay'adda inay tallaabo sharci kaa qaado si ay u hesho lacagaha dheefaha ee ay kuu horumarisay Hay'adda, waxaad bixin doontaa dhammaan lacagaha iyo kharashka, ay ku jiraan lacagaha iyo kharashka qareenka, ee ay gashay Hay'adda ee la xiriira soo celinta lacag kasta oo ay kugu leedahay Hay'adda ama fulinta mid kasta oo ka mid ah xuquuqaha Hay'adda ee magdhawga. Hay'adda waxay xaq u leedahay inay dacwad kaaga gudbiso adiga ama wakiilkaaga maxkamadda gobalka kasta ama federaalka ee awoodda shricayada u leh sheegashooyinka Hay'adda.

Diidma kasta oo aad diido inaad u celiso Hay'adda wixii lacag ah ee siyaado ah waxaa loo tixgelin doonaa inaad jabisay heshiiska aad la gashay Hay'adda ee ah in Hay'adda ay bixin doonto dheefaha la heli karo sida lagu sharaxay Hagaha, iyo in adigana, dhanka kale, aad u hoggaansami doonto sharciyada Hay'adda. Intaas waxaa dheer, markaad aqbasho dheefaha Hay'adda, waxaad si dhab ah uga tanaasulaysaa difaac kasta oo aad u yeelan lahayd ficil kasta oo ay qaado Hay'adda si ay u soo ceshato lacagaha ay siyaadada u bixisay ama lacagaha lagaa rabo sida ay dhigayaan sharci kasta oo ku jira Hagahan, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn sharciga xadidaada dacwad-qaadidda ama ka saramarida sharciga federaalka midka gobalka, ilaa iyo heerka uu oggolyahay sharciga habboon.

# SHARCIYADA XAQ U YEELASHADA

## Dheefaha DVE ee Carewell SEIU 503 iyo Dheefaha HCA ee Carewell SEIU 503

Sharciyadan soo socda waxay qabtaan shaqsiyaadka caymiska ka haysta Kooxda Gorgortanka ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Shaqaalaha Taageerada Shaqsiyeed ee SEIU 503 (taas oo ay ku jiraan Bixiyeyaasha Daryeelka Shaqsiyadeed) waxayna hagaaan xaq u yeelashada caymiska dheefaha Carewell SEIU 503 ee laga helo Benefit Trust (Hay'adda Dheefta) iyo Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada), marki laga reebo dheefaha Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh, kuwaas oo si kala gaar ah looga hadlay xaga hoose. Ujeedooyinka Hagahan aawadood, "adiga" ama "adiga kaaga" waxaa loola jeedaa ka qaybqaatayaasha caymiska ka haysta Kooxda Gorgortanka ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Shaqaalaha Taageerada Shaqsiyeed ee SEIU 503, oo ay ku jiraan Bixiyeyaasha Daryeelka Shaqsiyadeed, ee xaqa u leh inay ka qaybqaataan Hay'adaha.

## Xaq U Yeelashada Hore

Si aad xaq ugu yeelato dheefaha DVE iyo HCA ee laga helo Benefit Trust (Hay'adda Dheefta) iyo Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada), siday u kala horreeyaan, waa inaad shaqayso ugu yaraan 40 saacadood oo ah shaqada kooxda gorgortanka 2 bilood oo xiriir ah. Ka dibna waxaa jirta 1 bil oo muddo sugitaan ah inta saacadahaaga loo gudbinayo Carewell SEIU 503. Tusaale ahaan, haddii aad shaqaysid 40 saacadood bishi bilaha Janaayo iyo Febraayo, waxaa laguugu dabari doonaa Hay'adda laga bilaabo Abriil 1.

Carewell SEIU 503 waa inay ka hesho macluumaadka saacadahaaga Gobalka Oregon, marka waxaa muhiim ah inaad soo gudbiso foojaradaada mushaharka ama warqadahaaga saacadaha la shaqeeyay xilli mushahareed walbo ka hor waqtiga kama danbeysta ee gudbinta. Saacadaha loo soo gudbiyo Carewell waa bisha la soo dhaafay marka waxaa had iyo jeer jiri doona waqti dib-udhac dabiici ah oo u dhaxeeya saacadaha la shaqeeyay iyo marka loo gudbiyo Carewell SEIU 503. Waxaa muhiim ah inaad soo gudbiso saacadahaaga xilli mushahareed walbo si aad u xaqiijiso in xaq u yeelashadaada aan la khalkhal gelinin. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan soo gudbinta saacadahaaga wakhtiga saxda ah, fadlan la xiriir xafiiska deegaankaaga ama ka wac Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348.

Go'aaminta haddii aad buuxisay shuruuda saacadaha ee ujeedooyinka Sharciyadan Xaq U Yeelashada ayaa waxaa go'aamin doona Carewell SEIU 503 iyada oo ku salaysan saacadaha mushaharka shirkada soo gudbisay ee ugu danbeeyay.

## Xaq U Yeelashada Socota

Waxaad xaq u sii lahaan doontaa dhefaha Carewell SEIU 503 ee laga helo Hay'adaha marka laga reebo inay saacadahaaga kooxda gorgortanka ee la shaqeeyay bishi ay 0 ku soo dhacaan 2 bilood oo xiriir ah.

## Luminta Xaq Yeelashada

Haddii aad shaqayso 0 saacadood oo ah shaqada kooxda gorgortanka 2 bilood oo xiriir ah, waxaad lumin doontaa xaq u yeelashadaada caymiska laga helo Hay'adaha dhamaadka bisha ku xigta 2-daada bilood ee 0 saacadood aad shaqaysay. Tusaale ahaan, haddii aad shaqayso 0 saacadood oo ah shaqada kooxda gorgortanka bisha Seteembar iyo Oktoobar, xaq u yeelashadaada dheefaha laga helo Hay'adaha ayaa dhammaan doona Noofeembar 30. Carewell SEIU 503 ayaa kuu soo diri doonta ogaysiis ka dib bisha koowaad ee saacadaha kooxda gorgortanka ay tageen 0, waxayna kuu soo diri doonaan ogaysiiska horumariska ah ee taariikhda xaq u yeelashadaada ay joogsan doonto sida ku cad Hay'adaha ka dib bisha labaad ee xiriirka ah ee aad shaqaysay saacadaha kooxda gorgortanka oo 0 ah.

Luminta xaq u yeelashada dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Carewell SEIU 503 kama dhigna in qorshahaaga caymiska caafimaad ee Goob-suuqeedka uu joogsan doono. Sikastaba ha ahaatee, waxaad mas'uul ka noqon doontaa bixinta

khidmadaha caymiska ee bil'laha ah iyo kharashyada kale ee aad jeebka ka bixiso ee la xiriira qorshahaas caymiska caafimaadka. Haddii aadan bixinin khidmadaha caymiska ee bil'laha ah, shirkadaada caymiska caafimaadka ayaa joojin doonta qorshahaaga caymiska caafimaad. Tani waxay ka dhigan tahay inaad noqon doonto caymis caafimaad la'aan inta ka dhiman sanadka oo dhan marka laga reebo inaad yeelato dhacdo nololeed muteysi leh ma ahane sida lagu qeexay **healthcare.gov**.

## Dib U Helidda Xaq U Yeelashada

Haddii aad lumiso xaq u yeelashada dheefaha Carewell SEIU 503 ee aad ka helaysay Hay'adaha, waa inaad markale shaqayso 40 saacadood oo ah shaqada kooxda gorgortanka 2 bilood oo xiriir ah, oo yelato 1 bil oo sugitaan ah, ka hor inta aadan markale xaq u yeelanin dheefaha Hay'adda. Fadlan ogoow in dib u helidda xaq u yeelashada dheefaha Hay'adda aysan ahayn Dhacdo Isdiiwaangelin Gaar ah oo kuu oggolaanayso inaad dib iskaga diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka Goob-suuqeedka ee ka baxsan Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka).

## Xaq u Yeelashada Dheefaha PTO

Sharciyadan waxay qabanayaan dheefaha Wakhtiga Fasaxa Lacagta leh ("PTO") ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ("HCW-yada"), iyo Shaqaalaha Taageerada Shaqsiga ("PSW-yada"), oo ay ku jiraan Bixiyeyaasha Daryeelka Shaqsiyadeed ("PCA-yada"), ee lagu dabaro Kooxda Gorgortanka ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Shaqaalaha Taageerada Shaqsiyeed ee SEIU 503. Dheefahan PTO ee Carewell SEIU 503 waxaa laga helaa Hay'ada Dheefaha, si waafaqsan Sharciyadan Xaq u Yeelashada ee soo socda.

Haddii aad buuxisay Form W-9 (Foom W-9) oo kuugu jiro fayl yaala Carewell SEIU 503, waxaa kuu uruuri doona saacadaha dheefta Wakhtiga Fasaxa Lacagta Leh oo ku salaysan tirada saacadaha kooxda gorgortanka ee aad shaqayso bil walbo si waafaqsan jadwalka soo socda:

| Tirada sacadaha ee la shaqeeyay bishii | Saacadaha dheefta PTO ee la kasbaday |
|---|---|
| 20 | 1 |
| 40 | 2 |
| 60 | 3 |
| 80 ama ka badan | 4 |

Carewell SEIU 503 waa inay ka hesho macluumaadka saacadahaaga Gobalka Oregon, marka waxaa muhiim ah inaad soo gudbiso warqadahaaga saacadaha la shaqeeyay xilli mushahareed walbo ka hor waqtiga kama danbeysta ee gudbinta. Saacadaha loo soo gudbiyo Carewell waa bisha la soo dhaafay marka waxaa had iyo jeer jiri doona waqti dib-udhac dabiici ah oo u dhaxeeya saacadaha la shaqeeyay iyo marka loo gudbiyo Carewell SEIU 503. Waxaa muhiim ah inaad soo gudbiso saacadahaaga xilli mushahareed walbo si aad u xaqiijiso in xaq u yeelashadaada aan la khalkhal gelinin. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan soo gudbinta saacadahaaga wakhtiga saxda ah, fadlan la xiriir xafiiska deegaankaaga ama ka wac Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348.

Go'aaminta haddii aad buuxisay shuruuda saacadaha ee ujeedooyinka Sharciyadan Xaq U Yeelashada ayaa waxaa go'aamin doona Carewell SEIU 503 iyada oo ku salaysan saacadaha mushaharka shirkada soo gudbisay ee ugu danbeeyay.

## Sharciyada Daryeel Bixiyaha Shaqooyinka Isku Qasan

Haddii aad u shaqayso kooxda gorgortanka oo badan–jogooyinka caymiska leh (tusaale Shaqaalaha Daryeelka Guriga, Shaqaalaha Taageerada Shaqsiyeed, Bixiyaha Daryeelka Shaqsiyadeed), markaas saacadaha aad u shaqaysay sida Shaqaalaha Taageerada Shaqsiyeed, Bixiyaha Daryeelka Shaqsiyadeed, iyo Shaqaalaha Daryeelka Guriga ayaa la isku dari doonaa si loo go'aamiyo xaq u yeelashada dheefaha PTO.

Diiwaangelinta

## Diiwaangelinta Inta Lagu Jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka)

Si aad u hesho dheefaha HCA, guud ahaan waxaad u baahan doontaa inaad iska diiwaangeliso midkood Medicare ama qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay oo ku jira Goob-suuqeedka federaalka ama gobalka. Waxaad iska diiwaangelin kartaa caymiska Goob-suuqeedka inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) sanad walbo, taas oo inta badan u dhaxaysa Noofeembar 1 iyo Diseembar 15 ee caymiska bilaabanaya Janaayo 1 ee soo socota. Muddooyinka Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee Goob-suuqeedyada kale ee caymiska caafimaadka (ee Washington, California, ama Idaho) ayaa ku soo beegmi kara taariikho kala duwan. Waxaad sidoo kale xaq u yeelan doontaa muddada diiwaangelinta gaarka ah xaalada gaar ah oo kooban (tusaale ahaan, haddii aad lumiso caymiskaaga caafimaadka ee uu bixiyo loo-shaqeeye kale).

Qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay waa qorshe caymis oo lagu bixiyo midkood Goob-suuqeedka federaalka (**healthcare.gov**, kaas oo ah madasha macaamiisha Oregon) ama Goob-suuqeedka gobalkaaga ku salaysan (ee Washington: **wahealthplanfinder.org**, ee California: **coveredca.com**, ee Idaho: **yourhealthidaho.org**) kaas oo ay doorteen Guddiga Maamulka inuu noqdo nooca ay oggolaadeen Hay'adda, iyada oo ku salaysan tayada iyo in la awoodi karo qorshaha caymiska. Si aad u hesho dheefaha HCA ee la xiriira qorshaha caymiska Goob-suuqeedka, waxaad u baahan tahay inaad iska diiwaan geliso qorshaha caymiska caafimaadka xaqa leh ee la oggolyahay ee deegaankaaga. Liiska qorshayaasha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay ee hadda jira ayaa laga heli karaa websaydhka Carewell SEIU 503 ee barta **CarewellSEIU503.org**. Waxaad sidoo kale codsan kartaa liiska la daabacay ee qorshayaasha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolyahay ee hadda jira adiga oo ka wacaya Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348.

Fadlan ogoow: sida ay dhigayaan sharciyada Hay'adda, laga bilaabo Janaayo 1, 2024, dhammaan dadka hela Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee caymiska Goob-suuqeedka waxaa looga baahan doonaa inay keenaan caddaynta diiwaangelinta sanad walbo. Kuwa ka diiwaangashan hay'adda caymiska ee nala-hawlgasho, Valley Insurance Professionals (VIP), ayaa ka reeban shuruudan maadaama VIP ay u gudbiso magaca qorshaha caymiska iyo macluumaadka khidmada caymiska bil'laha ah Carewell SEIU 503 iyada oo matalaysa daryeel bixiyaha. Inaad iska diiwaangeliso VIP waxay xaqiijisaa in Kaarka Dukaameysiga ee Dheefta lagu shubo cadadka sanadlaha ah ee lagu dabarayo lacagaha khidmadaha caymiska bil'laha ah iyo kharashyada uu qofka jaabkiisa ka bixiyo.

## Diiwaangelinta Ka Baxsan Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka)

Sharciyadan soo socda ayaa ku qabanaya haddii aad marka ugu koowaad xaq u yeelato dheefaha HCA ee laga helo Carewell SEIU 503 taariikh ka baxsan Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee Goob-suuqeedka. Xaaladan, Carewell SEIU 503 ayaa, haddii ay macquul tahay, kaa caawin doonta inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday ee laga helo Goob-suuqeedka habboon, waxayna ku siin doontaa kaalmada khidmada caymiska bil'laha ah ee caymiska noocaas ah, taas oo waafaqsan sharciyada Hay'adda.

Haddii aysan suurtogal kuu ahayn inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday ee laga helo Goob-suuqeedka habboon, oo aad horay uga diiwaangashanayd qorshaha caymiska caafimaad ee gaarka ah ee laga helo midkood Goob-suuqeedka ama meel kale, Carewell SEIU 503 ayaa kuu magdhawi doonta kharashyada khidmadahaaga

caymiska bil'laha ah ee daryeelka caafimaad, ka dib marki lagaa jaro Canshuur Dhimista Khidmada Caymiska ee Hormariska ah ee ugu badan ee aad xaqa u leedahay, ilaa iyo midka yar kharashyadaada khidmada caymiska bil'laha ah ee dhabta ah, ama cadadka celceliska ah ee khidmada caymiska bil'laha ah ee Carewell SEIU 503 ay siiso ka qaybqaatayaasha caymiska ka haysta qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday laga bilaabo Maarso ee caymis sanadeedka aad marki ugu koowaad xaq u yeelatay dheefaha HCA. Ogoow: haddii cid kale oo aan ahayn Carewell SEIU 503 ay bixiso dhammaan ama qayb ka mid ah khidmadaada caymiska cafimaadka bil'laha ah, Hay'adda waxay lacagtaas ka jari doontaa cadadka ay kuugu magdhawayso qaybtan marki loo eego.

Haddii aysan suurtogal ahayn inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday ee laga helo Goob-suuqeedka habboon, oo aadan horay uga diiwaangashanayn qorsha kale oo caymiska caafimaad ee gaarka ah, Hay'adda ayaa, haddii ay macquul tahay, kaa caawin doonta inaad si toos ah iskaga diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaad ee gaarka ah oo lala barbardhigi karo waxayna kuu magdhawi doonta kharashyada khidmadahaaga caymiska bil'laha ah ee daryeelka caafimaad, ka dib marki lagaa jaro Canshuur Dhimista Khidmada Caymiska ee Hormariska ah ee ugu badan ee aad xaqa u leedahay, ilaa iyo kan yar midkood kharashyadaada khidmada caymiska bil'laha ah ee dhabta ah, ama cadadka celceliska ah ee khidmada caymiska bil'laha ah ee Hay'adda ay siiso ka qaybqaatayaasha caymiska ka haysta qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday laga bilaabo Maarso ee caymis sanadeedka aad marki ugu koowaad xaq u yeelatay dheefaha Hay'adda. Sikastaba ha ahaatee, haddii cid kale oo aan ahayn Hay'adda ay bixiso dhammaan ama qayb ka mid ah khidmadaada caymiska cafimaadka bil'laha ah, Carewell SEIU 503 waxay lacagtaas ka jari doontaa cadadka ay kuugu magdhawayso qaybtan marki loo eego.

Haddii aad hesho magdhawga khidmada ceymiska bil'laha ah ee celceliska ah ee lagu sharaxay farqaddaha kore, fursada ugu koowaad ee aad hesho, waa inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday ee laga helo Goob-suuqeedka habboon. Xaq u yeelashadaada inaad hesho dheefta magdhawga khidmada ceymiska bil'laha ah ee celceliska ah ayaa si toos ah u joogsan doonto laga bilaabo taariikhda aad marka ugu koowaad xaq u yeelato inaad iska diiwaangeliso oo aad caymis ka hesho qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday, xitaa haddii aadan bogin diiwaangelinta noocaas ah.

Mid kasta oo ka mid ah xaaladaha kor lagu sharaxay, waxaad sidoo kale xaq u yeelan doontaa dheefta magdhawga kharashka uu qofka jaabkiisa ka bixiyo ee la dabaro ee lacagta lagaa jarayo, khidmadaada ceymiska iyo lacagahaaga haraaga lacag jarista kadib ee la xiriira caymiskaaga caafimaadka gaarka ah.

Markay bilaabato OPEN ENROLLMENT (MUDDADA DIIWAANGELINTA SANADLAHA AH EE CEYMISKA CAAFIMAADKA) ee xigta, waxaa qasab ah inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday si aad u sii wadato inaad hesho dheefaha Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka iyo dheefaha kharashka uu qofka jaabkiisa ee la dabaro. Si looga hortago dib u dhaca caymiska, waa inaad iska diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka la aqoonsan yahay ee la oggolaaday sida ugu dhakhsaha badan markay bilaabato Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ee xigta.

## OGEYSIISYADA

## Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'adda Dheefaha ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon)

OGAYSIISKA DHAQAMADA ASTURNAANTA

OGAYSIISKANI WUXUU QEEXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOO SHAACIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH U EEG.

## Balanqaadka Hay'adda ee Ku Aadan Asturnaanta

Hay'adda Dheefaha ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon ( "Hay'adda") waxaa ka go'an inay ilaaliso asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyey ("macluumaadka caafimaad"). Macluumaadka Caafimaad waa macluumaad laguugu aqoonsan karo oo la xiriira cafimaadkaaga jirka ama dhimirka, ama siinta lagu siiyo ama lacag bixinta adeegyada caafimaad ee aad hesho. Sida waafaqsan sharciga ku habboon, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah, sida halkan lagu sharaxay, oo la xidhiidha macluumaadkaaga caafimaad.

Ogaysiiskani waxaa loogu taagalay in laguugu wargeliyo waajibaadyada sharci ee Hay'adda sida waafaqsan qoddobada asturnaanta caafimaad ee federaalka ee ku jira Sharciga Qaadashada iyo La Xisaabtanka Caymiska Caafimaadka ee 1996 ("HIPAA") iyo sharciyada la xiriira sida ku cad 45 CFR § 160; 45 CFR § 162; iyo 45 CFR § 164 ("sharciga asturnaanta caafimaad ee federaalka"):

- **si loo ilaaliyo asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad;**
- **si laguu siiyo Ogaysiiskan qeexaya waajibaadkeeda sharci iyo dhaqamada asturnaanta ee la xiriira macluumaadkaaga caafimaad; iyo**
- **in loo hoggaansamo qoddobada Ogeysiiskan.**

Ogeysiiskani wuxuu sidoo kale ku wargelinayaa sida Hay'adda ay u isticmaasho oo ay u shaaciso macluumaadkaaga caafimaad wuxuuna sharaxaad ka bixinayaa xuquuqaha aad leedahay ee la xiriira macluumaadkaaga caafimaad ee ay hayso Hay'adda. Ujeedooyinka Ogaysiiskan dartii, "adiga" ama "adiga kaaga" waxaa loola jeedaa ka qaybgalayaasha xaqa u leh dheefaha sida waafaqsan Hay'adda.

## Macluumaadka uu Qabto Ogaysiiskan

Hay'adda waxay uruurisaa oo ay ilaalisaa macluumaad caafimaad gaar ah oo adiga kugu saabsan si gacan looga gaysto in lagu siiyo dheefo caafimaad, iyo sidoo kale in la guto shuruudo sharci iyo kuwa hab-raac. Hay'adda waxay macluumaadkan caafimaad, ee adiga laguugu aqoonsan karo, ka heshaa codsiyada iyo foomamka kale ee aad buuxiso, ilaa iyo wada hadalada aad la yeelan karto shaqaalaha maamulka ee Hay'adda iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaad, iyo warbixinada iyo xogta ay Hay'adda ka hesho adeeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ama caymisyada kale ee dheefta shaqaalaha. Kani waa macluumaadka uu qabanayo dhaqamada asturnaanta ee lagu sifeeyay Ogeysiiskan. Macluumaadka caafimaad ay Hay'addu kaa hayso adiga waxaa ka mid noqon kara, magacaaga, cinwaankaaga, lambarka taleefankaaga, taariikhdaada dhalashada, lambarkaaga Sooshiyaal Sekuuritiga, macluumaadkaaga shaqada, iyo macluumaadkaaga sheegashooyinka caafimaad.

Hay'adda waxay bixisaa dheefaha la xiriira daryeelkaaga caafimaad (tusaale ahaan dheefaha Qorshaha Caawimaadda Shaqaalaha ("EAP")) iyo dheefaha aan la xiriirin daryeelka caafimaad labaduba (tusaale ahaan dheefaha wakhtiga fasaxa lacagta leh ("PTO")). Waa ujeeddada Hay'adda, sida ay oggol yihiin sharciyada asturnaanta ee lagu soo saaray HIPAA, inay xaddido u adeegsiga

sharciyadaas qaybaha daryeelka caafimaadka ee Hay'adda. Markaa, qaybaha hoos yimaada Hay'adda ee ay qabtaan sharciyada asturnaanta ee HIPAA waa inay ku jiraan dhammaan qaybaha daryeelka caafimaad ee Hay'adda, balse kuma jiraan qaybaha aan daryeelka caafimaadka ahayn.

## Soo Koobida Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda

### Isticmaalka iyo Shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Hay'adda

Hay'adda ayaa u isticmaali karto macluumaadkaaga caafimaad inay ku qiimayso xaq u yeelashadaada dheefaha, inay kaga shaqeyso oo ay ku bixiso khidmadaha bil'laha ah ee dheefahaaga, iyo inay ku maarayso hawlaheeda. Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad caymis bixiyayaasha, maamulayaasha dhinacyada saddexaad, iyo adeeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ujeedooyin daawayn, lacag bixin, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka aawadood. Hay'addu waxay sidoo kale siin kartaa macluumaadkaaga caafimaad dhinac saddexaad oo ka caawiya Hay'adda hawlaheeda, dawladda iyo hay'adaha fulinta sharciga, xubnaha qoyskaaga, iyo dad kale ama hay'ado kale oo gaar ah. Xaaladaha qaarkood, Hay'addu waxay kaliya isticmaali doontaa ama shaacin doontaa macluumaadkaaga caafimaad iyadoo la raacayo oggolaanshahaaga oo qoraal ah. Xaalado kale qaarkood, oggolaansho looma baahna. Faahfaahinta isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad ee Hay'adda, iyo xuquuqahaga la xiriira macluumaadkaaga caafimaad, waxaa lagu qeexay halkan hoose.

### Xuquuqahaaga La Xidhiidha Macluumaadkaaga Caafimaadka

Sharciga asturnaanta caafimaad ee federaalka wuxuu ku siinayaa xuquuqo gaar ah oo la xidhiidha macluumaadkaga caafimaad. Gaar ahaan, waxaad leedahay xuquuqaha soo socda:

- Inaad hesho **nuqulka diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga**. Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inaad aragto ama aad hesho nuqulka diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee ay Hay'addu kaa hayso.
- **Inaad codsato in la saxo nuqulka diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inay saxaan diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga haddii aad u malayso inay qaldan yihiin ama qabyo yihiin. Hay'adda ayaa "maya" dhihi karta codsigaaga, balse kuugu sheegi doonta qoraal ahaan sababta 60 maalmood gudahooda ka dib codsigaaga.
- **Inaad codsato wada-xiriir qarsoodi ah.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inay kuula soo xiriirto si gaar ah (tusaale ahaan, taleefonka guriga ama xafiiska) ama inay boostada kuugu soo diraan cinwaan kale oo gaar ah. Hay'adda ayaa tixgelin doonta dhammaan codsiyada macquulka ah. Hay'addu waa inay oggolaato codsigaaga haddii aad soo waregliso Hay'adda inaad khatar galayso haddii aan codsigagaa la oggolaanin.
- Inaad hesho **liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadkaaga.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda liiska ("xisaabaad") inta jeer ee ay Hay'addu wadaagtay macluumaadkaaga caafimaad muddo 6 sano ah ka hor taariikhda aad dalbatay, cida ay Hay'addu la wadaagtay, iyo sababta. Hay'adda ayaa samayn doonto dhammaan shaacinta marka laga reebo kuwa ku saaban daawaynta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo shaacin kale oo gaar ah

(sida macluumaadka ay codsigaaga ku bixisay Hay'adda). Hay'adda waxay bixin doontaa hal xisaabaad sanadki si bilaash ah, balse waxay xaq u leedahay inay soo dalacdo khidmo macquul ah, kharashka ku salaysan haddii aad mid kale dalbato 12 bilood gudahooda.

- Inaad yeelato **qof adiga ku matala**. Haddii aad qof siiso dukumiintiga wakiilka caafimaadka ama haddii aad leedahay wakiilka sharciga, qofkaas ayaa fulin kara xuquuqahaaga oo go'aano ka gaari kara macluumaadkaaga caafimaadka. Hay'adda ayaa xaqiijin doonta inuu qofka awood u leeyahay midaan oo uu ku matali karo ka hor inta aysan wax tallaabo ah qaadin.
- **Inaad xarayso cabasho haddii aad dareento in lagu xadgudbay xuquuqahaaga.** Waad caban kartaa haddii aad dareento in Hay'adda ay ku xadgudubtay xuquuqahaaga, adiga oo la xiriiraya Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA oo isticmaalaya macluumaadka lagu bixin doona ogaysiskan gadaal danbe. Waxaad sidoo kale cabasho u diri kartaa Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah ee US Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka) adiga oo warqad u diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, oo wacaya 1-877-696-6775, ama booqanaya www.hhs.gov/hipaa/filing-a-complaint/. Hay'adda kaagama aargoosan doonto inaad cabasho gudbisay aawadeed.
- **Inaad codsato in la xadido macluumaadka Hay'adda ay isticmaasho ama wadaagto.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inaysan u isticmaalin ama wadaagin macluudka qaarkiis ee daawaynta, lacag bixinta, ama hawlaha. Sikastaba ha ahaatee, Hay'adda lama faro inay aqbasho codsigaaga waxayna dhihi kartaa "maya" haddii ay samayn karto daryeelkaaga.
- **Inaad codsato inaad ku hesho macluumaadkaaga caafimaad qaab elegtaroonig ah.**
- **In lagu soo ogaysiiyo jebinta macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyey ee aan ammaanka ahayn haddii ay saamayn kugu leedahay.**
- **Inaad hesho nuqulka Ogaysiiskan oo warqad ahaan ah wakhti walbo, xitaa haddii aad oggolaatay inaad Ogaysiiskan ku hesho elektaroonig ahaan.**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahan iyo sida aad u isticmaali karto ayaa hoos ku qoran.

## Isbaddelada Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda

Hay'adda waxay xaq u leedahay inay beddesho dhaqamadeeda asturnaanta oo ay dib u eegis ku samayso Ogeysiiskan sida hoos lagu sharraxay.

## Macluumaadka Meesha Lagala Xidhiidho

Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaac ah oo ku saabsan dhaqamada asturnaanta ee Hay'adda, ama ku saabsan Ogaysiiskan, ama haddii aad rabto inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhaqamada asturnaanta ee Hay'adda, fadlan la xiriir:

**Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA**
**Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'adda Dheefaha ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon)**
**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

OGAYSIISKA FAAHFAAHSAN EE DHAQAMADA ASTURNAANTA EE HAY'ADDA

ISTICMAALKA IYO SHAACINTA HAY'ADDA

Marka laga reebo sida lagu faahfaahiyay qaybtan, sida uu dhigayo sharciga asturnaanta ee fedeeraalka, ama sida aad haddii kale oggolaatay, Hay'adda waxay u isticmaashaa oo u shaacisaa macluumaadkaaga caafimaad kaliya maamulka Hay'adda iyo ka shaqaynta dheefooyinkaaga. Hay'adda ma isticmaali doonto ama ma wadaagi doonto macluumaadkaaga

marka laga reebo sida lagu qeexay halkan inaad adiga qoraal ahaan ugu oggolaato ma ahane. Waxaad ka noqon kartaa xilli walbo adiga oo qoraal ahaan ku ogaysiinaya Hay'adda.

## Isticmaalka iyo Shaacinta La Xidhiidha Daawaynta, Lacag-bixinta, iyo Hawlaha Daryeelka Caafimaadka

Waxaan sida caadiga ah u isticmaalnaa oo u wadaagnaa macluumaadkaaga caadimaad qaababka soo socda:

1. **In gacan laga gaysto maaraynta daawaynta daryeelka caafimaad ee aad hesho**. In kasta oo Hay'adda aysan filaynin inay shaacin u samayso "daawaynta," haddii loo baahdo, hay'adda ayaa samayn karta shaacintaas oggolaanshahaaga la'aantiisa. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa macluumaadkaaga caafimaad siin karta daryeel bixiye caafimaad si looga caawiyo adeeg bixiyaha inuu ku daaweeyo.

2. **In La Bixiyo Adeegyada Caafimaadka.** Hay'adda ayaa isticmaali karta oo shaacin karta macluumaadkaaga caafimaad si markaas sheegashooyinka daawaynta, adeegyada, iyo saadka daryeelka caafimaadka ee aad ka hesho daryeel bixiyeyaasha caafimaad loo bixiyo lacagtooda si waafaqsan barnaamijka dheefaaha ee Hay'adda. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa la wadaagi karto macluumaadkaaga diiwaangelinta, xaq u yeelashada, iyo sheegashooyinka kuwa ka shaqeeya diyaarinta sheegashooyinka ee Hay'adda, si markaas ay uga shaqeeyaan sheegashooyinkaaga. Hay'adda ayaa isticmaali karta ama u sii dayn karta macluumaadkaaga caafimaad daryeel bixiyayaasha caafimaad si loo ogaysiiyo haddii dheefaha caafimaadka qaarkood la dabaro iyo in haddii kale. Hay'adda ayaa sidoo kale siin karta macluumaadkaaga caafimaad caymis bixiyeyaasha kale ama qorshayaasha dheefta si ay isugu dubbaridaan bixinta lacagaha sheegashooyinka daryeelkaaga caafimaad ee kuwa kale ee laga yaabo inay masuul ka yihiin kharashyada qaarkood. Intaas waxaa dheer, Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad baarayaasha sheegashooyinka si ay u eegaan dhaqamada biilasha ee daryeel bixiyayaasha caafimaad, iyo si ay u xaqiijiyaan habboonaanta bixinta lacagaha sheegashooyinka.

3. **Hawlaha Hay'adda iyo Maaraynta Qorshaha Caymiska.** Hay'adda ayaa isticmaali karta oo shaacin karta macluumaadkaaga caafimaad si ay ugu suurtagasho inay u shaqeyso si hufan iyo sida ay ku jirto danaha ka qeybgalayaasheeda. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad hawl-wadeennada iyo xisaabiyeyaasha ujeedooyinka qorsheynta ganacsiga aawadood, ama qareennada Hay'adda siiya adeegyada sharciga ah.

## Isticmaalka iyo Shaacinta La-hawlgalayaasha Ganacsi

Hay'adda waxay la wadaagtaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan “la-hawlgalayaasheeda ganacsi,” kuwaas oo ah dhinacyo saddexaad oo ka caawiya Hay'adda hawlaheeda. Hay'adda waxay siisaa macluumaad, oggolaanshaaga la'aantiisa, la-hawlgalayaasheeda ganacsi si laguu siiyo daaweyn, lacag-bixin, iyo hawlaha daryeelka caafimaad. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa la wadaagayso macluumaadkaaga caafimaad kuwa ka shaqeeya diyaarinta sheegashooyinka ee Hay'adda, si markaas ay uga shaqayaan sheegashooyinkaaga. Hay'adda waxay siin karta macluumaadkaaga caafimaad baarayaasha, hawl-wadeennada, xisaabiyeyaasha, iyo qareennada sida kor lagu sharraxay. Intaa waxaa dheer, haddii aad tahay ka-qaybgale aan Ingiriisiga ku hadlin oo qaba su'aalo ku saabsan sheegasho, Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga

caafimaad turjumaan; sidoo kale Hay'adda ayaa siin karta macluumaadka magacyada iyo cinwaanka adeegyada boostada.

Caymiska wuxuu heshiisyo la galaa la-hawlgalayaashiisa ganacsi si loo hubiyo in asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad la ilaaliyo.

## Isticmaalka iyo Shaacinta ee Kafaalo-qaadaha Caymiska

Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad Kafaalo-qaadaha Caymiska, kuwaas oo ah Guddiga Maamulka ee Hay'adda, ujeeddooyinka maamulka caymiska aawadood, sida fulinta hawlaha hubinta tayada iyo qiimaynta maalgelinta guud ee Hay'adda, oggolaanshahaaga la'aantiisa. Hay'adda ayaa sidoo kale siin karta macluumaadkaaga caafimaad Kafaalo-qaadaha Caymiska ujeeddooyin dacwad dhageysi iyo go'aan ka gaarista rafcaannadaada aawadood. Ka hor inta aan wax macluumaad caafimaad ah la siinin Kafaalo-qaadaha Caymiska, Kafaalo-qaadaha Caymiska ayaa u caddayn doonaa Hay'adda inay ilaalin doonaan macluumaadkaaga caafimaad iyo inay ku dareen qoraal sharciyada Hay'adda si ay u muujiyaan waajibaadka ka saaran ilaalinta asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad.

## Isticmaalka iyo Shaacinta Kale ee La Samayn Karo Iyada oo Aan Oggolaansho Lagaa Haysanin

Sida hoos lagu qeeaxay, sharciga asturnaanta caafimaad ee federaalka wuxuu bixiyaa adeegsiyo ama shaacin gaar ah oo ay Hay'addu samayn karto oggolaanshahaaga la'aantiisa.

1. **Sharciga ayaa Farayo.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama la shaacin karaa sida uu sharcigu farayo. Tusaale ahaan, macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo shaacin karaa ujeedooyinka soo socda aawadood:

- **Tallaabooyinka sharci ee garsoorka iyo maamulka ee waafaqsan amarka maxkamadda ama maamulka, habraaca sharci iyo/ama awoodda.**
- **In laga warbixiyo macluumaadka la xidhiidha dhibanayaasha xadgudubka, dayaca, ama rabshadaha qoyska.**
- **In laga caawiyo saraakiisha fulinta sharciga waajibaadkooda fulinta sharciga.**
- **In la ogaysiiso masuuliyiinta ku haboon jebinta macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyey.**

2. **Caafimaadka iyo Badqabka.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa la shaacin karaa si looga hortago khatar halis ah oo ku wajahan caafimaadka ama badqabka adiga ama qof kale. Macluumaadkaaga caafimaad ayaa sidoo kale loo siidayn karaa hawlaha fayodhawrka caafimaadka, sida ka hortagga ama xakamaynta cudurrada, dhaawaca ama naafonimada, iyo in la buuxiyo shuruudaha warbixinta iyo dabagalka ee hay'adaha dawladda, sida Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka.

3. **Hawlaha Dowladda.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa la siin karaa dawladda hawlo dawladeed oo gaar ah aawadood, sida sirdoonka, hawlaha amni ee qaranka, hawlaha baaritaanka amni, iyo ilaalinta saraakiisha dawladda. Macluumaadkaaga caafimaad ayaa sidoo kale la siin karaa hay'adaha kormeerka caafimaadka si ay u sameeyaan xisaabin, baadhitaano, shati-siin, iyo hawlaha kale ee kormeer.

4. **Xubnaha Hadda Ka Tirsan Militariga iyo Halyeeyada.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama loo shaacin karaa si loogu hoggaansamo sharciyada iyo xeerarka la xidhiidha adeegga milatariga ama arrimaha halyeeyada.

5. **Magdhawga Shaqaalaha.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama loo shaacin karaa si loogu hoggaansamo sharciyada iyo xeerarka la xidhiidha dheefaha Magdhowga Shaqaalaha.

6. **Xaaladaha Degdegga ah.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa waxaa isticmaali karo ama la siin

karaa xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib gaar ah oo kuu dhaw oo ku lug leh daryeelkaaga haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama hay'adda gargaarka musiibada haddii ay dhacdo musiibo. Haddii aadan rabin in macluumaadkan la wadaago, waxaad codsan kartaa in shaacinta noocyadan ah la xaddido sida gadaal danbe lagu qeexi doono Ogeysiiskan.

7. **Kuwo Kale ee Ku Lug Leh Daryeelkaaga.** Xaalado xaddidan, macluumaadkaaga caafimaad ayaa waxaa la siin karaa xubin qoyska ka mid ah, saaxiib gaar ah oo kuu dhaw, ama kuwa kale ee ay Hay'addu xaqiijisay inay si toos ah ugu lug leeyihiin daryeelkaaga (tusaale, haddii aad si xun u dhaawacantay oo aadan awoodin inaad la soo xiriirto Hay'adda). Sidoo kale, marka la codsado, Hay'adda ayaa kala talin karta xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib gaar ah oo kuu dhaw wax ku saabsan xaaladdaada guud, deegaankaaga (sida isbitaalka dhexdiisa), ama dhimashada. Haddii aadan rabin in macluumaadkan la wadaago, waxaad codsan kartaa in shaacintan la xaddido sida gadaal danbe lagu qeexi doono Ogeysiiskan.

8. **Wakiilada Shaqsiyadeed.** Macluumaadkaaga caafimaad waxaa la siin karaa dadka aad u oggolaatay inay ku matalaan adiga ama dadka xaquuqda sharciyadeed u leh inay adiga ku matalaan. Tusaalayaasha wakiilada shaqsiyadeed waxaa ah waalidiinta da'yarta aan la xoroowin iyo kuwa leh Wakiilka Caafimaad ee dadka wawayn.

9. **Macluumaadka Daawaynta iyo Dheefaha Caafimaadka La Xiriira.** Hay'adda iyo la-hawlgalayaasheeda ganacsi ayaa kula soo xiriiri kara si ay kuu siiyaan macluumaad ku saabsan noocyada daaweynta ama dheefaha iyo adeegyada kale ee caafimaadka la xiriira ee laga yaabo inay ku xiiso galiyaan, oo ay ku jiraan, tusaale ahaan, daawayn baddel ah, adeegyo, iyo daawooyin.

10. **Cilmibaarista.** Xaalado gaar ah qaarkood, macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama loo bixin karaa ujeeddooyin cilmi-baaris aawadood ilaa inta habraacyada sharciga uu farayo yahay si loo ilaaliyo asturnaanta xogta cilmi-baarista la raacayo.

11. **Ku-Deeqidda Xubinta, Isha, iyo Unuga.** Haddii aad tahay xubin deeqe, macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama la siin karaa xubin deeqe ama hay'ad hawl fulin si loo fududeeyo ku-deeqidda baddelida xubin ama unug.

12. **Shakhsiyaadka Geeriyooday.** Macluumaadka caafimaad ee qofka geeriyooday ayaa la siin karaa baarayaasha geerida, baarayaasha caafimaadka, iyo agaasimayaasha aaska si ay markaas xirfadlayaashaas u gutaan waajibaadkooda.

## Isticmaalka iyo Shaacinta Loo Sameeyo Ujeeddooyin Lacag-ururin iyo Suuq-gayn

Hay'adda iyo la-hawlgalayaasheeda ganacsi uma isticmaalaan ama uma iibiyaan macluumaadkaaga caafimaad ujeeddooyin lacag-ururin ama suuq-gayn.

## Isticmaalka iyo Shaacinta Kale Waxay U Baahan Tahay Oggolaanshahaaga Degdegga ah

Isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad ee aan ka ahayn kuwa kor lagu soo sharaxay ayaa ku fuli doona kaliya oggolaanshahaaga qoran ee degdegga ah. Waxaad kaga laaban kartaa oggolaanshahaaga in la isticmaalo ama la shaaciyo macluumaadkaaga caafimaad qoraal ahaan. Haddii aad sidaas samayso, Hay'adda uma isticmaali doonto ama uma shaacin doonto macluumaadkaaga caafimaad, marka laga reebo ilaa iyo xadka ay Hay'addu hore ugu tiirsanayd oggolaanshahaaga. Marka macluumaadkaaga caafimaad la shaaciyo iyadoo la raacayo oggolaanshahaaga, ilaalinta sharciga asturnaanta

ee federaalka ma sii khusayn doono macluumaadka caafimaad ee la shaaciyay, macluumaadkaasna waxaa dib u sii shaacin kara qofka la siiyay adiga oo aan ogayn ama oggolaansho lagaa dalbanin.

## Xuquuqaha Macluumaadkaaga Caafimaad

Waxaad leedahay xuquuqaha soo socda ee ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'addu diyaariso, ururiso, oo kaydiso. Haddii lagaaga baahdo inaad soo gudbiso codsi qoraal ah oo la xiriira xuquuqahan, sida halkan lagu sharaxay, waa inaad ku dirto codsiyada noocaas ah cinwaanka:

**Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA**
**Oregon Homecare Workers Benefit Trust**
**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

## Xuquuqda in La Baaro oo Nuqul Laga Samaysto Macluumaadka Caafimaad

Waxaad xaq u leedahay inaad baarto oo nuqul ka samaysato diiwaankaaga caafimaad. Diiwaankaaga caafimaad waxaa ka mid ah, waxyaabo kale iyo, macluumaadka caafimaad ee ku saabsan xaq u yeelashad qorshahaaga caymis, caymisyada qorshaha, diiwaanada sheegashada, iyo diiwaannada biilasha. Diiwaanada caafimaad ee ay Hay'addu ku kaydiso qaab elektaroonig ah, waxaad ku codsan kartaa inaad ku hesho diiwaannada qaab elegtroonig ah.

Si aad u baarto oo aad nuqul uga samaysato diiwaankaaga caafimaad, u gudbi codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Marka la helo codsigaaga, Hay'addu waxay kuu soo diri doontaa Warbixinta Taariikhda Sheegashada, taas oo ah soo koobida taariikhda sheegashooyinkaaga oo qoraysa 2-di sano ee ugu danbeeyay. Haddii aad xaq u yeelatay dheefaha wax ka yar 2 sano, markaas Warbixinta Taariikhda Sheegashada waxay qori doontaa gebi ahaan muddada caymiskaaga.

Haddii aadan rabin in laguu soo diro Warbixinta Taariikhda Sheegashada, oo taa beddelkeeda aad rabto inaad baarto iyo/ama inaad hesho nuqulka qayb ka mid ah ama dhammaan diiwaankaaga sheegashooyinka ee qarsoon, kaas oo ay ku jiraan macluumaadka sida sheegashooyinkaaga dhabta ah iyo xaq u yeelashadaada/kaarkaaga diiwaangelinta oo aan ku xaddidnayn muddo 2 sano ah, ku sheeg midaas codsigaaga qoraalka ah, codsigaasna waa la tixgelin doonaa. Haddii aad codsato nuqulka warqada ah ee diiwaankaaga caafimaadka ee qarsoon ama qayb ka mid ah diiwaankaaga caafimaad, Hay'addu waxay kugu dallaci doontaa lacag dhan $0.25 bogiiba taas oo ah kharashka looga bixinayo nuqulka ee boostada laguugu soo dirayo jawaabta codsigaada. Diiwaanada lagu bixiyay qaab elegtaroonig ah ayaa sidoo kale lagu soo dallaci karaa kharash yar.

Xaalado xadidan qaarkood, Hay'ada ayaa diidi karto codsigaaga ah inaad baarto oo nuqul ka samaysato diiwaankaaga caafimaad. Haddii ay sidaas samayso Hay'addu, waxay kugu wargelin doontaa qoraal ahaan. Xaaladaha qaarkood, haddii laguu diido inaad hesho diiwaankaaga caafimaad, waxaad codsan kartaa in dib u eegis lagu sameeyo diidmada.

## Xuquuqda Inaad Codsato in Macluumaadkaaga Caafimaad Wax Laga Beddelo

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadkaaga caafimaad wax laga beddelo haddii aad aaminsan tahay in macluumaadka uu qalad yahay ama uusan dhamaystirnayn. Si aad u codsato wax ka baddel, u dir codsi qoraal ah oo faahfaahsan Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Codsigan waa inuu sheego sababta(sababaha) uu ku qotomo codsigaaga. Hay'adda ayaa diidi karta codsigaaga haddii uusan qoraal ahayn, haddii uusan sheegin sabab taageerta codsiga, ama haddii aad codsatay inaad wax ka beddesho macluumaad:

- **Aysan diyaarin ama aan loo diyaarinin Hay'adda, marka laga reebo inaad Hay'adda siiso warbixin ah in qofka ama cidda samaysay macluumaadka aan hadda la heli karin si ay wax ka beddelka u sameeyaan;**
- **Aanan ku jirin macluumaadka caafimaad ee ay hayso ama loo hayo hay'adda;**
- **Aanan ku jirin macluumaaadka diiwaanka caafimaad ee laguu oggolaan doono inaad baarto oo aad nuqul ka samaysato; ama**
- **Sax ah oo dhamaystiran.**

Hay'adda ayaa qoraal ahaan kugu ogeysiin doonta haddii ay aqbashay ama diiday codsigaaga wax ka beddelka macluumaadkaaga caafimaad. Haddii Hay'adda ay diido codsigaaga, waxay kuu sharaxi doontaa sida aad u sii wadan karto inaad raadiso wax ka beddelka la diiday.

## Xuquuqda Inaad Ogaato Shaacinta Lagaa Sameeyay

Waxaad xaq u leedahay in laguu soo diro liiska shaacinta la sameeyay. Liiska shaacinta la sameeyay waa liiska macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'addu siisay dadka kale. Liiska wuxuu qorayaa shaacinta la sameeyay laga soo bilaabo 6 sanadood oo ka horeeyay taariikhda codsigaaga. Haddii aad rabto liiska shaacinta la sameeyay oo ka yar muddo 6 sanadood ah, fadlan ku sheeg midaas codsigaaga qoraalka ah ee aad ku dalbanayso liiska shaacinta la sameeyay.

Si aad u codsato liiska shaacinta la sameeyay, u dir codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Iyada oo laga jawaabayo codsigaaga liiska shaacinta la sameeyay, Hay'adda ayaa ku siin karta liiska la-hawlgalayaasha ganacsi ee sameeyo shaacinta noocaas ah iyaga oo matalaya Hay'adda, oo ay la socoto macluumaadka meelaha lagala xiriiro si aad si toos ah uga codsato liiska shaacinta la sameeyay la-hawlgalayaasha ganacsi oo kasta. Liiska shaacinta la sameeyay ee ugu horreya ee aad ku codsato muddo 12 bilood gudaheeda ah wuxuu ahaan doonaa laacag la'aan. Wixii ah liisaska shaacinta ee muddo 12 bilood gudaheeda ah oo dheeraad ah, waxaa laguugu soo dalaci doonaa kharashka bixinta liiska shaacinta la sameeyay, balse Hay'adda ayaa kuu sheegi doonta kharashka lagaaga baahan yahay ka hor inta aan la samaynin liiska shaacinta si aad u go'aansato haddii aad ka noqonayso codsigaaga ka hor inta aadan wax kharash ah galin.

## Xuquuqda Inaad Codsato Xadidaado

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in xaddidaado loo sameeyo macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'adda isticmaasho ama ay siiso dadka kale si loo fuliyo hawlaha daawaynta, lacag bixinta, ama daryeelka caafimaad. Waxa sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato in xaddidaado loo sameeyo macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'addu siiso qof ku lug leh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga, sida xubin qoys ama saaxiib. Hay'adda guud ahaan loogama baahna inay oggolaato codsigaaga xaddidaadaha noocaas ah, waxayna Hay'adda joojin kartaa heshiiskeeda xaddidaadaha aad codsatay. Hay'adda waxaa looga baahan yahay inay oggolaato codsigaaga xaddidaadda haddii shaacin loo sameynayo ujeedooyinka lacag-bixin aawadood lacagtaas oo aad si buuxda u siisay daryeel bixiyaha caafimaad, jeebkaaga ka siisay.

Si aad u codsato xaddidaado, u gudbi codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA kaas oo sharaxaya macluumaadka aad rabto inaad xaddido, iyo sida iyo/ama cidda aad jeclaan lahayd in xaddidaada (aha) la saaro. Hay'adda ayaa qoraal ahaan kugu ogaysiin doonta haddii ay oggoshahay codsigaaga xaddidaadaha, iyo marka ay joojiso heshiiska xaddidaad kasta.

## Xuquuqda in La Codsado Wada Xiriir Lagu Sameeyo Qaab Kale ama Goob Kale oo Gooni ah

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadkaaga caafimaad laguugu soo gudbiyo qaab qarsoodi ah qaab kale oo gooni ah ama goob gooni ah. Tusaale ahaan, waxaad codsan kartaa in lagaala soo xiriiro goobta shaqada ama boosta ahaan oo kaliya, ama in laguugu siiyo macluumaadkaaga caafimaad meel gaar ah. Si aad u codsato wada xiriirika oo laguugula sameeyo qaab kale ama goob kale oo gooni ah, u dir codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Codsigaaga qoraalka ah waa inuu sheegaa sababta(sababaha) codsigaaga, iyo qaababka ama goobaha goonida ah ee aad jeceshahay in laguugu soo diro macluumaadkaaga caafimaad. Haddii ay habboon tahay, codsigaagu waa inuu sheego in shaacinta dhammaan ama qayb ka mid ah macluumaadka ee lagu shaaciyo wada xiriir aan qarsoodi ahayn ay khatar ku gelin karto. Codsiyada macquulka ah ayaa la tixgelin doonaa ilaa inta suurtogalka ah, waxaana laguugu ogeysiin doonaa sida habboon.

## Xuquuqda in La Dacwoodo

Waxaad xaq u leedahay inaad uga dacwooto Hay'adda iyo Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga asturnaanta lagu xadgudbay. Si aad dacwad ugu gudbiso Hay'adda, u dir dacwo qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Lagaagama aargoosan doono ama laguma takoori doono oo lagaagama joojin doono wax adeeg, lacag bixin, ama mudnaan ah inaad dacwad u gudbisay Hay'adda ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha aawadeed.

## Xuquuqda Inaad Hesho Nuqulka Ogaysiiska oo Warqad ah

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulka Ogaysiiskan oo warqad ah. Si aad u gudbiso codsiga noocaas ah, u dir codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA ee kor ku xusan. Waxaad sidoo kale nuqulka Ogaysiiskan ku heli kartaa inaad codsi qoraal ah u gudbiso:

**Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA**
**Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'adda Dheefaha ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon)**
**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

## Xuquuqda Inaad Hesho Ogaysiiska Jebinta

Waxaa laguu ogaysiin doonaa si degdeg ah haddii macluumaadkaaga caafimaad la jebiyo. Jebintu waxay timaadaa markay jiraan isticmaal ama shaacin aan la oggolayn sida uu qabo HIPAA taas oo wax u dhimaysa asturnaanta ama amniga macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyo. Ogeysiiska wuxuu ku siin doona macluumaadka soo socda: (1) sharaxaad kooban oo ku saabsan wixii dhacay, oo ay ku jiraan taariikhda jebinta iyo taariikhda ogaanshaha jebinta; (2) tallaabooyinka ay tahay inaad qaaddo si aad naftaada uga ilaaliso waxyeellada ka imaan karta jebinta; iyo (3) sharaxaad kooban oo ku saabsan tallaabooyinka la qaadayo si loo baaro jebinta, loo yareeyo khasaaraha, iyo si looga hortago jebinta dheeraadka ah. Fadlan ogow in shaacin kasta oo macluumaadka caafimaad oo aan la oggolaanin aysan ahayn jebin u baahan ogeysiin; Waxaa laga yaabaa inaan lagu ogeysiin haddii macluumaadka caafimaad ee la shaaciyay si waafi ah loo xafiday — tusaale ahaan, xogta kombayutarka oo sir ah oo aan la heli karin lambar sireed la'aan — ama haddii la go'aamiyo inay jirto suurtogalnimo hoose oo ah in macluumaadkaaga caafimaad la jabiyay.

## Isbaddelada Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda

Hay'adda waxay xaq u leedahay inay beddesho dhaqamadeeda asturnaanta oo ay ka dhigto dhaqamada cusub kuwo dhaqan gal ka ah macluumaadka caafimaad ee ay hayso, oo ay ku jiraan macluumaadka caafimaad ee la sameeyay ama la helay ka hor taariikhda dhaqan galka isbaddelka iyo macluumaadka caafimaad ee ay heli doonto mustaqbalka. Haddii Hay'adda si dhab ah u beddesho mid ka mid ah dhaqamadeeda asturnaanta, waxay dib u eegi doontaa Ogeysiiskan waxayna kugu siin doontaa Ogeysiiska wax laga baddelay, midkood Boostada Maraykanka ama iimayl, 60 maalmood gudahooda ka dib wax ka baddelida. Intaas waxa dheer, nuqulada Ogeysiiska wax laga baddelay ayaa lagu siin doonaa markaad qoraal ku codsato waxaana la dhigi doonaa Xafiiska Hay'adda si dib loogu eego.

## Taariikhda Dhaqan Galka

Ogeysiiskani wuxuu markii ugu horreysay dhaqan galay Luulyo 24, 2023. Ogeysiiskani wuxu dhaqangal ahaan doonaa ilaa iyo Hay'adda ay ka soo daabacdo Ogeysiis wax laga baddelay.

# Ogeysiiska Hay'adda Dheefaha ee Xuquuqaha Caymiska Sii Wadida COBRA

## Ogaysiiska Xuquuqda Sii Wadida Caymiska lagu heli Caymiska Shaqsiga Iska Bixiyo ee hoos yimaada Sharciga Sii Wadashada Caymiska Caafimaad ee Loo-shaqeeyuhu Biixyo ee 1986 ("COBRA")

Waxaa laguugu soo dirayaa Ogaysiiskan sababta oo ah waxaad goor dhaw xaq u yeelatay caymis laga helo Oregon Homecare Workers Benefit Trust (Hay'ada Dheefaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon) ("Hay'adda Dheefta"). Ogaysiiskan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xuquuqda aad u leedahay caymiska sii wadida ee COBRA, kaas oo ah muddo kordhin caymis oo ku-meel-gaadh ah oo laga helo Hay'adda Dheefta. **Ogaysiiskan wuxuu sharaxayaa caymiska sii wadida ee COBRA, markaad heli karto, iyo waxa aad u baahan tahay inaad samayso si aad u ilaaliso xuquuqda aad u leedahay inaad hesho.**

Markaad xaq u yeelato COBRA, waxaad sidoo kale xaq u yeelan kartaa noocyo kale oo caymis ah oo kaaga kharash yaraan kara caymiska sii wadida ee COBRA, oo uu ku jiro caymiska laga helo Goob-Suuqeedka caymiska caafimaadka. **Markaad iska diiwaangeliso caymiska laga helo Goob-Suuqeedka caymiska, waxaad xaq u yeelan kartaa khidmadaada caymiska bil'laha ah oo kharash yar iyo kharashyada jaabka laga bixiyo oo la dhimay. Intaas waxaa dheer, waxaad xaq u yeelan kartaa muddo diiwaangelin gaar ah oo 30 maalmood ah oo aad iskaga diiwaangeliso qorshe kale oo caymiska caafimaad ah oo aad xaq u leedahay (sida qorshaha caymis ee xaaska/seeyga), xitaa haddii qorshahaas caymis uusan guud ahaan aqbalin isdiiwaangelinta soo dib dhacday.** Macluumaadka dheeraad ah oo ku saabsan Goob-Suuqeedka Caymiska Caafimaadka iyo noocyada kale ee caymiska ayaa ku qoran laga bilaabo bogga 72 ee Ogaysiiskan. Fadlan si taxadar leh u akhri macluumaadka ku jira Ogaysiiskan.

## Waa maxay caymiska sii wadida ee COBRA?

Caymiska sii wadida ee COBRA waa sii wadashada caymiska Hay'adda Dheefta markī loo baahnaa inuu dhamaado iyada oo ay ugu wacan tahay dhacdo noolaleed. Tani waxaa loo yaqaanaa "dhacdo muteysi leh." Dhacdooyinka gaarka ah ee muteysiga leh waxay ku qoran yihiin xaga hoose ee Ogaysiiskan. Ka dib dhacdada muteysiga leh, caymiska sii wadida

ee COBRA waa in la siiyo qof walbo oo ah “ka-faa'iideyste xaq u leh.” Waxaad noqon kartaa ka-faa'iideyste xaq u leh haddii caymiska ilkaha, aragga, ama Barnaamijka Caawimaadda Shaqaalaha ee laga helo Hay'adda Dheefta aad ku lumiso dhacdada muteysiga leh aawadeed. Marki loo eego Hay'adda Dheefta, haddii aad noqoto ka-faa'iideyste xaq u leh oo aad doorato caymiska sii wadida ee COBRA, waxaa qasab ah inaad lacag ku bixiso caymiska sii wadida ee COBRA.

Qof ka qaybqaata Hay'adda Dheefta ahaan, waxaad noqon doontaa ka-faa'iideyste xaq u leh haddii aad lumiso caymiskaaga aad ka hesho Hay'adda Dheefta iyada oo ay sabab u yihiin dhacdooyinkan muteysiga leh ee soo socda:

- **Waxaa la yareeyay saacadaha aad shaqaynaysay, ama**
- **Waxaa kaa dhamaatay shaqadaada sabab walbo aawaadeed marki laga reebo anshax xumo wayn oo xagaaga ka timid.**

## Goormee ayaa la heli doonaa caymiska sii wadida ee COBRA?

Hay'adda Dheefta ayaa siin doontaa caymiska sii wadida ee COBRA ka-faa'iidaystayaasha xaqa u leh kaliya ka dib markii la soo wargeliyo Xafiiska Maamulka ee Hay'adda Dheefta inaad la kulantay saacado dhimis ama shaqo joojin. Gobalka ayaa soo ogaysiin doona Xafiiska Maamulka ee Hay'adda haddii aad la kulanto saacado dhimis ama shaqo joojin. Adigana sidoo kale waa inaad ogaysiiso Xafiiska Maamulka ee Hay'adda dhacdadad muteysiga leh ee noocaas ah adiga oo ogaysiis u diraya:

**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

## Sideen ku xushaa caymiska sii wadashada ee COBRA?

Markaad xaq u yeelato COBRA, foomka xulashada COBRA ayaa boostada waxaa kuugu soo diri doona Maamulaha COBRA ee Hay'adda Dheefta, Ameriflex.

Si aad u xulato caymis sii wadasho, buuxi Ogaysiiska Xulashada COBRA oo u dir Ameriflex. Waxaad haysataa 60 malmood laga soo bilaabo mida danbaysay taariikhda aad caymiska lumisay ama taariikhda Ogaysiiska Xulashada COBRA.

## Muddo intee la'eg ayuu soconayaa ceymiska sii wadashada ah?

Caymiskaaga sii wadashada ee COBRA wuxuu dhaqangalayaa kowda bisha ku xigta taariikhda aad lumisay caymiska. Haddii ay dhacdo in caymis la lumiyo iyada oo ay ugu wacan tahay shaqada oo dhammaata ama dhimista saacadaha shaqada, caymiska COBRA guud ahaan waxaa la sii wadi karaa ilaa wadarta 18 bilood.

Sikastaba, haddii Maamulka Sooshiyaal Sekiyuuritiga uu go'aamiyay inaad naafo tahay, oo aad soo ogaysiiso Xafiiska Maamulka ee Hay'adda Dheefta wakhti hore, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho ilaa iyo 11 bilood oo dheeraad ah oo ah caymiska sii wadida ee COBRA, ugu badnaan ilaa iyo 29 bilood. Naafonimada waa inay kugu soo bilaabatay ka hor maalinta 60-aad ee caymiska sii wadida ee COBRA waana inay sii jirto ugu yaraan ilaa iyo dhamaadka 18-ka bilood ee caymiska sii wadida ee COBRA.

Haddii aad ku guuldaaraysato inaad wakhti hore soo sheegto naafonimada waxay horseedi doontaa in laguu diido kordhinta wixii ah ceymiska COBRA.

## Kharash intee la'eg ayuu ku kacayaa caymiska sii wadida ee COBRA?

Kharashka caymiska sii wadida ee COBRA waxaa lagu soo dari doonaa Ogaysiiskaaga Xulashada COBRA waxaana ku jiri kara khidmo maamul oo 2% ah sida uu qabo sharciga federaalka. Macluumaad ku saabsan kharashka COBRA ayaa sidoo kale laga heli karaa websaydhka Carewell SEIU 503 ama inaad wacdo lambarka 1-844-503-7348. Fadlan ogoow, noocyada kale ee sii wadashada (sida kuwa laga helo Goob-Suuqeedka Caymiska Caafimaadka ama caymiska xaaska/seyga) ayaa ka qiimo jabnaan kara COBRA.

## Miyay jiraan noocyo kale oo caymis ah oo aan ahayn Caymiska Sii Wadida ee COBRA?

Haa. Baddelki aad iska diiwaangelin lahayd caymiska sii wadida ee COBRA, waxaa jiri kara noocyo kale oo caymis ah oo aad ka heli karto Goob-suuqeedka Caymiska Caafimaadka ama noocyada kale ee caymis caafimaad oo loo-shaqeeyuhu bixiyo (sida qorshaha caymis ee xaaska/seeyga) ee lagu helo wax loo yaqaano "muddo isdiiwaangelin oo gaarka ah." Qaar ka mid ah noocyadan ayaa ku kici kara qiimo ka yar caymiska sii wadida ee COBRA. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Goob-suuqeedka caymiska, booqo **healthcare.gov**.

## La Socodsii Xafiiska Maamulka Wixii Isbaddel ah ee Ku Yimaada Cinwaanka Guriga:

Haddii aad xulato caymiska COBRA, waa inaad la socod siiso Xafiiska Maamulka wixii isaddel ah ee ku yimaada cinwaanka gurigaaga si loo xaqiijo in biilasha iyo akhbaaraha kale laguugu soo diro cinwaanka saxda ah. Sidoo kale waa inaad nuqul ka reebato ogaysiis kasta oo aad u dirto Xafiiska Maamulka Dheefaha si aad u kaydsato. Fadlan ku dir wixii isbaddel cinwaanka guriga ah:

**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

## Wixii macluumaad dheeraad ah:

Ogaysiiskan si dhamaystiran uma qeexayo caymiska sii wadida ee COBRA ama xuquuqaha kale ee laga heli karo Qorshaha Caymiska. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sii wadashadaada caymiska iyo xuquuqahaaga laga helo Hay'adda Dheefta ayaa laga heli karaa Hagahaan.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan macluumaadka ku jira Ogaysiiskan ama xuquuqahaaga caymiska sii wadida ee COBRA, fadlan kala xiriir Carewell SEIU 503 lambarka 1-844-503-7348.

Haddii aad raadinayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqaha ku cad COBRA, Health Insurance Portability, Accountability Act (HIPAA) (Sharciga Qaadashada iyo La Xisaabtanka Caymiska Caafimaadka), ama sharciyada kale ee samaynta ku leh caymisyada caafimaad, kala xiriir Employee Benefits Security Administration (EBSA) (Hay'adda Maamulka Sugnaanta Dheefaha Shaqaalaha) ee Wasaarada Shaqada ee Mareykanka lambarka 1-866-444-3272 ama booqo websaydhka EBSA ee **www.dol.gov/ebsa**.

# Ogeysiiska Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda Kaalmada

## Oregon Homecare Workers Supplemental Trust (Hay'adda Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga)

OGAYSIISKA DHAQAMADA ASTURNAANTA

OGAYSIISKANI WUXUU QEEXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOO SHAACIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH U EEG.

## Balanqaadka Hay'adda ee Ku Aadan Asturnaanta

Hay'adda Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon ( "Hay'adda") waxaa ka go'an inay ilaaliso asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyey ("macluumaadka caafimaad"). Macluumaadka Caafimaad waa macluumaad laguugu aqoonsan karo oo la xiriira cafimaadkaaga jirka ama dhimirka, ama siinta lagu siiyo ama lacag bixinta adeegyada caafimaad ee aad hesho. Sida waafaqsan sharciga ku habboon, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah, sida halkan lagu sharaxay, oo la xidhiidha macluumaadkaaga caafimaad.

Ogaysiiskani waxaa loogu taagalay in laguugu wargeliyo waajibaadyada sharci ee Hay'adda sida waafaqsan qoddobada asturnaanta caafimaad ee federaalka ee ku jira Sharciga Qaadashada iyo La Xisaabtanka Caymiska Caafimaadka ee 1996 ("HIPAA") iyo sharciyada la xiriira sida ku cad 45 CFR § 160; 45 CFR § 162; iyo 45 CFR § 164 ("sharciga asturnaanta caafimaad ee federaalka"):

- **si loo ilaaliyo asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad;**
- **si laguu siiyo Ogaysiiskan qeexaya waajibaadkeeda sharci iyo dhaqamada asturnaanta ee la xiriira macluumaadkaaga caafimaad; iyo**
- **in loo hoggaansamo qoddobada Ogeysiiskan.**

Ogeysiiskani wuxuu sidoo kale ku wargelinayaa sida Hay'adda ay u isticmaasho oo ay u shaaciso macluumaadkaaga caafimaad wuxuuna sharaxaad ka bixinayaa xuquuqaha aad leedahay ee la xiriira macluumaadkaaga caafimaad ee ay hayso Hay'adda. Ujeedooyinka Ogaysiiskan dartii, "adiga" ama "adiga kaaga" waxaa loola jeedaa ka qaybgalayaasha xaqa u leh dheefaha sida waafaqsan Hay'adda.

## Macluumaadka uu Qabto Ogaysiiskan

Hay'adda waxay uruurisaa oo ay ilaalisaa macluumaad caafimaad gaar ah oo adiga kugu saabsan si gacan looga gaysto in lagu siiyo dheefo, iyo sidoo kale in la guto shuruudo sharci iyo kuwa hab-raac. Hay'adda waxay macluumaadkan caafimaad, ee adiga laguugu aqoonsan karo, ka heshaa codsiyada iyo foomamka kale ee aad buuxiso, ilaa iyo wada hadalada aad la yeelan karto shaqaalaha maamulka ee Hay'adda iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaad, iyo warbixinada iyo xogta ay Hay'adda ka hesho adeeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ama caymisyada kale ee dheefta shaqaalaha. Kani waa macluumaadka uu qabanayo dhaqamada asturnaanta ee lagu sifeeyay Ogeysiiskan. Macluumaadka caafimaad ay Hay'addu kaa hayso adiga waxaa ka mid noqon kara, magacaaga, cinwaankaaga, lambarka taleefankaaga, taariikhdaada dhalashada, lambarkaaga Sooshiyaal Sekuuritiga, macluumaadkaaga shaqada, iyo macluumaadkaaga sheegashooyinka caafimaad.

## Soo Koobida Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda

## Isticmaalka iyo Shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Hay'adda

Hay'adda ayaa u isticmaali karto macluumaadkaaga caafimaad inay ku qiimayso xaq u yeelashadaada dheefaha, inay kaga shaqeyso oo ay ku bixiso khidmadaha bil'laha ah ee dheefahaaga, iyo inay ku maarayso hawlaheeda. Hay'adda ayaa siin karta

macluumaadkaaga caafimaad caymis bixiyayaasha, maamulayaasha dhinacyada saddexaad, iyo adeeg bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ujeedooyin daawayn, lacag bixin, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka aawadood. Hay'addu waxay sidoo kale siin kartaa macluumaadkaaga caafimaad dhinac saddexaad oo ka caawiya Hay'adda hawlaheeda, dawladda iyo hay'adaha fulinta sharciga, xubnaha qoyskaaga, iyo dad kale ama hay'ado kale oo gaar ah. Xaaladaha qaarkood, Hay'addu waxay kaliya isticmaali doontaa ama shaacin doontaa macluumaadkaaga caafimaad iyadoo la raacayo oggolaanshahaaga oo qoraal ah. Xaalado kale qaarkood, oggolaansho looma baahna. Faahfaahinta isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad ee Hay'adda, iyo xuquuqahaga la xiriira macluumaadkaaga caafimaad, waxaa lagu qeexay halkan hoose.

## Xuquuqahaaga La Xidhiidha Macluumaadkaaga Caafimaadka

Sharciga asturnaanta caafimaad ee federaalka wuxuu ku siinayaa xuquuqo gaar ah oo la xidhiidha macluumaadkaga caafimaad. Gaar ahaan, waxaad leedahay xuquuqaha soo socda:

- Inaad hesho **nuqulka diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga**. Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inaad aragto ama aad hesho nuqulka diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee ay Hay'addu kaa hayso.
- **Inaad codsato in la saxo nuqulka diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inay saxaan diiwaanada caafimaadkaaga iyo sheegashooyinkaaga haddii aad u malayso inay qaldan yihiin ama qabyo yihiin. Hay'adda ayaa "maya" dhihi karta codsigaaga, balse kuugu sheegi doonta qoraal ahaan sababta 60 maalmood gudahooda ka dib codsigaaga.
- **Inaad codsato wada-xiriir qarsoodi ah.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inay kuula soo xiriirto si gaar ah (tusaale ahaan, taleefonka guriga ama xafiiska) ama inay boostada kuugu soo diraan cinwaan kale oo gaar ah. Hay'adda ayaa tixgelin doonta dhammaan codsiyada macquulka ah. Hay'addu waa inay oggolaato codsigaaga haddii aad soo waregliso Hay'adda inaad khatar galayso haddii aan codsigagaa la oggolaanin.
- Inaad hesho **liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadkaaga.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda liiska ("xisaabaad") inta jeer ee ay Hay'addu wadaagtay macluumaadkaaga caafimaad muddo 6 sano ah ka hor taariikhda aad dalbatay, cida ay Hay'addu la wadaagtay, iyo sababta. Hay'adda ayaa samayn doonto dhammaan shaacinta marka laga reebo kuwa ku saaban daawaynta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo shaacin kale oo gaar ah (sida macluumaadka ay codsigaaga ku bixisay Hay'adda). Hay'adda waxay bixin doontaa hal xisaabaad sanadki si bilaash ah, balse waxay xaq u leedahay inay soo dalacdo khidmo macquul ah, kharashka ku salaysan haddii aad mid kale dalbato 12 bilood gudahooda.
- Inaad yeelato **qof adiga ku matala**. Haddii aad qof siiso dukumiintiga wakiilka caafimaadka ama haddii aad leedahay wakiilka sharciga, qofkaas ayaa fulin kara xuquuqahaaga oo go'aano ka gaari kara macluumaadkaaga caafimaadka. Hay'adda ayaa xaqiijin doonta inuu qofka awood u leeyahay midaan oo uu ku matali karo ka hor inta aysan wax tallaabo ah qaadin.
- **Inaad xarayso cabasho haddii aad dareento in lagu xadgudbay xuquuqahaaga.** Waad caban kartaa haddii aad dareento in Hay'adda ay ku xadgudubtay xuquuqahaaga, adiga oo la xiriiraya Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA oo isticmaalaya macluumaadka lagu bixin doona ogaysiskan gadaal danbe. Waxaad sidoo kale cabasho u diri kartaa Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah ee US Department of Health and Human Services

(Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka) adiga oo warqad u diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, oo wacaya 1-877-696-6775, ama booqanaya www.hhs.gov/hipaa/filing-a-complaint/. Hay'adda kaagama aargoosan doonto inaad cabasho gudbisay aawadeed.

- **Inaad codsato in la xadido macluumaadka Hay'adda ay isticmaasho ama wadaagto.** Waxaad ka dalban kartaa Hay'adda inaysan u isticmaalin ama wadaagin macluudka qaarkiis ee daawaynta, lacag bixinta, ama hawlaha. Sikastaba ha ahaatee, Hay'adda lama faro inay aqbasho codsigaaga waxayna dhihi kartaa "maya" haddii ay samayn karto daryeelkaaga.
- **Inaad codsato inaad ku hesho macluumaadkaaga caafimaad qaab elegtaroonig ah.**
- **In lagu soo ogaysiiyo jebinta macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyey ee aan ammaanka ahayn haddii ay saamayn kugu leedahay.**
- **Inaad hesho nuqulka Ogaysiiskan oo warqad ahaan ah wakhti walbo, xitaa haddii aad oggolaatay inaad Ogaysiiskan ku hesho elektaroonig ahaan.**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahan iyo sida aad u isticmaali karto ayaa hoos ku qoran.

## Isbaddelada Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda

Hay'adda waxay xaq u leedahay inay beddesho dhaqamadeeda asturnaanta oo ay dib u eegis ku samayso Ogeysiiskan sida hoos lagu sharraxay.

## Macluumaadka Meesha Lagala Xidhiidho

Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaac ah oo ku saabsan dhaqamada asturnaanta ee Hay'adda, ama ku saabsan Ogaysiiskan, ama haddii aad rabto inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhaqamada asturnaanta ee Hay'adda, fadlan la xiriir:

**Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA**
**Oregon Homecare Workers Supplemental Trust**
**(Hay'adda Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga)**
**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

OGAYSIISKA FAAHFAAHSAN EE DHAQAMADA ASTURNAANTA EE HAY'ADDA

## Isticmaalka iyo Shaacinta Hay'adda

Marka laga reebo sida lagu faahfaahiyay qaybtan, sida uu dhigayo sharciga asturnaanta ee fedeeraalka, ama sida aad haddii kale oggolaatay, Hay'adda waxay u isticmaashaa oo u shaacisaa macluumaadkaaga caafimaad kaliya maamulka Hay'adda iyo ka shaqaynta dheefooyinkaaga. Hay'adda ma isticmaali doonto ama ma wadaagi doonto macluumaadkaaga marka laga reebo sida lagu qeexay halkan inaad adiga qoraal ahaan ugu oggolaato ma ahane. Waxaad ka noqon kartaa xilli walbo adiga oo qoraal ahaan ku ogaysiinaya Hay'adda.

## Isticmaalka iyo Shaacinta La Xidhiidha Daawaynta, Lacag-bixinta, iyo Hawlaha Daryeelka Caafimaadka.

Waxaan sida caadiga ah u isticmaalnaa oo u wadaagnaa macluumaadkaaga caadimaad qaababka soo socda:

1. **In gacan laga gaysto maaraynta daawaynta daryeelka caafimaad ee aad hesho.** In kasta oo Hay'adda aysan filaynin inay shaacin u samayso "daawaynta," haddii loo baahdo, hay'adda ayaa samayn karta shaacintaas oggolaanshahaaga la'aantiisa. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa macluumaadkaaga caafimaad siin karta daryeel bixiye caafimaad si looga caawiyo adeeg bixiyaha inuu ku daaweeyo.

2. **In La Bixiyo Adeegyada Caafimaadka.** Hay'adda ayaa isticmaali karta oo shaacin

karta macluumaadkaaga caafimaad si markaas sheegashooyinka daawaynta, adeegyada, iyo saadka daryeelka caafimaadka ee aad ka hesho daryeel bixiyeyaasha caafimaad loo bixiyo lacagtooda si waafaqsan barnaamijka dheefaaha ee Hay'adda. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa la wadaagi karto macluumaadkaaga diiwaangelinta, xaq u yeelashada, iyo sheegashooyinka kuwa ka shaqeeya diyaarinta sheegashooyinka ee Hay'adda, si markaas ay uga shaqeeyaan sheegashooyinkaaga. Hay'adda ayaa isticmaali karta ama u sii dayn karta macluumaadkaaga caafimaad daryeel bixiyayaasha caafimaad si loo ogaysiiyo haddii dheefaha caafimaadka qaarkood la dabaro iyo in haddii kale. Hay'adda ayaa sidoo kale siin karta macluumaadkaaga caafimaad caymis bixiyeyaasha kale ama qorshayaasha dheefta si ay isugu dubbaridaan bixinta lacagaha sheegashooyinka daryeelkaaga caafimaad ee kuwa kale ee laga yaabo inay masuul ka yihiin kharashyada qaarkood. Intaas waxaa dheer, Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad baarayaasha sheegashooyinka si ay u eegaan dhaqamada biilasha ee daryeel bixiyayaasha caafimaad, iyo si ay u xaqiijiyaan habboonaanta bixinta lacagaha sheegashooyinka.

3. **Hawlaha Hay'adda iyo Maaraynta Qorshaha Caymiska.** Hay'adda ayaa isticmaali karta oo shaacin karta macluumaadkaaga caafimaad si ay ugu suurtagasho inay u shaqeyso si hufan iyo sida ay ku jirto danaha ka qeybgalayaasheeda. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad hawl-wadeennada iyo xisaabiyeyaasha ujeedooyinka qorsheynta ganacsiga aawadood ama qareennada Hay'adda siiya adeegyada sharciga ah.

## Isticmaalka iyo Shaacinta La-hawlgalayaasha Ganacsi

Hay'adda waxay la wadaagtaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan "la-hawlgalayaasheeda ganacsi," kuwaas oo ah dhinacyo saddexaad oo ka caawiya Hay'adda hawlaheeda. Hay'adda waxay siisaa macluumaad, oggolaanshaaga la'aantiisa, la-hawlgalayaasheeda ganacsi si laguu siiyo daaweyn, lacag-bixin, iyo hawlaha daryeelka caafimaad. Tusaale ahaan, Hay'adda ayaa la wadaagayso macluumaadkaaga caafimaad kuwa ka shaqeeya diyaarinta sheegashooyinka ee Hay'adda, si markaas ay uga shaqayaan sheegashooyinkaaga. Hay'adda waxay siin karta macluumaadkaaga caafimaad baarayaasha, hawl-wadeennada, xisaabiyeyaasha, iyo qareennada sida kor lagu sharraxay, sidoo kale Hay'adda ayaa siin karta macluumaadka magacyada iyo cinwaanka adeegyada boostada. Intaa waxaa dheer, haddii aad tahay ka-qaybgale aan Ingiriisiga ku hadlin oo qaba su'aalo ku saabsan sheegasho, Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad turjumaan.

Caymiska wuxuu heshiisyo la galaa la-hawlgalayaashiisa ganacsi si loo ilaaliyo in asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad.

## Isticmaalka iyo Shaacinta ee Kafaalo-qaadaha Caymiska

Hay'adda ayaa siin karta macluumaadkaaga caafimaad Kafaalo-qaadaha Caymiska oggolaanshahaaga la'aantiisa, kuwaas oo ah Guddiga Maamulka ee Hay'adda, ujeeddooyinka maamulka caymiska aawadood, sida fulinta hawlaha hubinta tayada iyo qiimaynta maalgelinta guud ee Hay'adda. Hay'adda ayaa sidoo kale siin karta macluumaadkaaga caafimaad Kafaalo-qaadaha Caymiska ujeeddooyin dacwad dhageysi iyo go'aan ka gaarista rafcaannadaada aawadood. Ka hor inta aan wax macluumaad caafimaad ah la siinin Kafaalo-qaadaha Caymiska, Kafaalo-qaadaha Caymiska ayaa u caddayn doonaa Hay'adda inay ilaalin doonaan macluumaadkaaga caafimaad iyo inay ku dareen qoraal sharciyada Hay'adda si ay u muujiyaan waajibaadka ka saaran ilaalinta asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad.

## Isticmaalka iyo Shaacinta Kale ee La Samayn Karo Iyada oo Aan Oggolaansho Lagaa Haysanin

Sida hoos lagu qeeaxay, sharciga asturnaanta caafimaad ee federaalka wuxuu bixiyaa adeegsiyo ama shaacin gaar ah oo ay Hay'addu samayn karto oggolaanshahaaga la'aantiisa.

1. **Sharciga ayaa Farayo.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama la shaacin karaa sida uu sharcigu farayo. Tusaale ahaan, macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo shaacin karaa ujeedooyinka soo socda aawadood:

- **Tallaabooyinka sharci ee garsoorka iyo maamulka ee waafaqsan amarka maxkamadda ama maamulka, habraaca sharci iyo/ama awoodda.**
- **In laga warbixiyo macluumaadka la xidhiidha dhibanayaasha xadgudubka, dayaca, ama rabshadaha qoyska.**
- **In laga caawiyo saraakiisha fulinta sharciga waajibaadkooda fulinta sharciga.**
- **In la ogaysiiso masuuliyiinta ku haboon jebinta macluumaadka caafimaad ee aan ammaanka ahayn.**

2. **Caafimaadka iyo Badqabka.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa la shaacin karaa si looga hortago khatar halis ah oo ku wajahan caafimaadka ama badqabka adiga ama qof kale. Macluumaadkaaga caafimaad ayaa sidoo kale loo siidayn karaa hawlaha fayodhawrka caafimaadka, sida ka hortagga ama xakamaynta cudurrada, dhaawaca ama naafonimada, iyo in la buuxiyo shuruudaha warbixinta iyo dabagalka ee hay'adaha dawladda, sida Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka.

3. **Hawlaha Dowladda.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa la siin karaa dawladda hawlo dawladeed oo gaar ah aawadood, sida sirdoonka, hawlaha amni ee qaranka, hawlaha baaritaanka amni, iyo ilaalinta saraakiisha dawladda. Macluumaadkaaga caafimaad ayaa sidoo kale la siin karaa hay'adaha kormeerka caafimaadka si ay u sameeyaan xisaabin, baadhitaano, shati-siin, iyo hawlaha kale ee kormeer.

4. **Xubnaha Hadda Ka Tirsan Militariga iyo Halyeeyada.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama loo shaacin karaa si loogu hoggaansamo sharciyada iyo xeerarka la xidhiidha adeegga milatariga ama arrimaha halyeeyada.

5. **Magdhawga Shaqaalaha.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama loo shaacin karaa si loogu hoggaansamo sharciyada iyo xeerarka la xidhiidha dheefaha Magdhowga Shaqaalaha.

6. **Xaaladaha Degdegga ah.** Macluumaadkaaga caafimaad ayaa waxaa isticmaali karo ama la siin karaa xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib gaar ah oo kuu dhaw oo ku lug leh daryeelkaaga haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama hay'adda gargaarka musiibada haddii ay dhacdo musiibo. Haddii aadan rabin in macluumaadkan la wadaago, waxaad codsan kartaa in shaacinta noocyadan ah la xaddido sida gadaal danbe lagu qeexi doono Ogeysiiskan.

7. **Kuwo Kale ee Ku Lug Leh Daryeelkaaga.** Xaalado xaddidan, macluumaadkaaga caafimaad ayaa waxaa la siin karaa xubin qoyska ka mid ah, saaxiib gaar ah oo kuu dhaw, ama kuwa kale ee ay Hay'addu xaqiijisay inay si toos ah ugu lug leeyihiin daryeelkaaga (tusaale, haddii aad si xun u dhaawacantay oo aadan awoodin inaad la soo xiriirto Hay'adda). Sidoo kale, marka la codsado, Hay'adda ayaa kala talin karta xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib gaar ah oo kuu dhaw wax ku saabsan xaaladdaada guud, deegaankaaga (sida isbitaalka dhexdiisa), ama dhimashada. Haddii aadan rabin in macluumaadkan la wadaago, waxaad codsan kartaa in shaacintan la xaddido sida gadaal danbe lagu qeexi doono Ogeysiiskan.

8. **Wakiilada Shaqsiyadeed.** Macluumaadkaaga caafimaad waxaa la siin karaa dadka aad u oggolaatay inay ku matalaan adiga ama dadka xaquuqda sharciyadeed u leh inay adiga ku matalaan. Tusaalayaasha wakiilada shaqsiyadeed waxaa ah waalidiinta da'yarta aan la xoroowin iyo kuwa leh Wakiilka Caafimaad ee dadka wawayn.

9. **Macluumaadka Daawaynta iyo Dheefaha Caafimaadka La Xiriira.** Hay'adda iyo la-hawlgalayaasheeda ganacsi ayaa kula soo xiriiri kara si ay kuu siiyaan macluumaad ku saabsan noocyada daaweynta ama dheefaha iyo adeegyada kale ee caafimaadka la xiriira ee laga yaabo inay ku xiiso galiyaan, oo ay ku jiraan, tusaale ahaan, daawayn baddel ah, adeegyo, iyo daawooyin.

10. **Cilmibaarista.** Xaalado gaar ah qaarkood, macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama loo bixin karaa ujeeddooyin cilmi-baaris aawadood ilaa inta habraacyada sharciga uu farayo yahay si loo ilaaliyo asturnaanta xogta cilmi-baarista la raacayo.

11. **Ku-Deeqidda Xubinta, Isha, iyo Unuga.** Haddii aad tahay xubin deeqe, macluumaadkaaga caafimaad ayaa loo isticmaali karaa ama la siin karaa xubin deeqe ama hay'ad hawl fulin si loo fududeeyo ku-deeqidda baddelida xubin ama unug.

12. **Shakhsiyaadka Geeriyooday.** Macluumaadka caafimaad ee qofka geeriyooday ayaa la siin karaa baarayaasha geerida, baarayaasha caafimaadka iyo agaasimayaasha aaska si ay markaas xirfadlayaashaas u gutaan waajibaadkooda.

## Isticmaalka iyo Shaacinta Loo Sameeyo Ujeeddooyin Lacag-ururin iyo Suuq-gayn

Hay'adda iyo la-hawlgalayaasheeda ganacsi uma isticmaalaan ama uma iibiyaan macluumaadkaaga caafimaad ujeeddooyin lacag-ururin ama suuq-gayn.

## Isticmaalka iyo Shaacinta Kale Waxay U Baahan Tahay Oggolaanshahaaga Degdegga ah

Isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad ee aan ka ahayn kuwa kor lagu soo sharaxay ayaa ku fuli doona kaliya oggolaanshahaaga qoran ee degdegga ah. Waxaad kaga laaban kartaa oggolaanshahaaga in la isticmaalo ama la shaaciyo macluumaadkaaga caafimaad qoraal ahaan. Haddii aad sidaas samayso, Hay'adda uma isticmaali doonto ama uma shaacin doonto macluumaadkaaga caafimaad sida uu oggolaa oggolaanshaha la buriyay, marka laga reebo ilaa iyo xadka ay Hay'addu hore ugu tiirsanayd oggolaanshahaaga. Marka macluumaadkaaga caafimaad la shaaciyo iyadoo la raacayo oggolaanshahaaga, ilaalinta sharciga asturnaanta ee federaalka ma sii khusayn doono macluumaadka caafimaad ee la shaaciyay macluumaadkaasna waxaa dib u sii shaacin kara qofka la siiyay adiga oo aan ogayn ama oggolaansho lagaa dalbanin.

## Xuquuqaha Macluumaadkaaga Caafimaad

Waxaad leedahay xuquuqaha soo socda ee ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'addu diyaariso, ururiso, oo kaydiso. Haddii lagaaga baahdo inaad soo gudbiso codsi qoraal ah oo la xiriira xuquuqahan, sida halkan lagu sharaxay, waa inaad ku dirto codsiyada noocaas ah cinwaanka:

**Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA**
**Oregon Homecare Workers Supplemental Trust**
**(Hay'adda Kaalmada Dheefaha Caafimaad**
**ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga)**
**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

## Xuquuqda in La Baaro oo Nuqul Laga Samaysto Macluumaadka Caafimaad

Waxaad xaq u leedahay inaad baarto oo nuqul ka samaysato diiwaankaaga caafimaad. Diiwaankaaga caafimaad waxaa ka mid ah, waxyaabo kale iyo, macluumaadka caafimaad ee ku saabsan xaq u yeelashad qorshahaaga caymis, caymisyada qorshaha, diiwaanada sheegashada, iyo diiwaannada biilasha. Diiwaanada caafimaad ee ay Hay'addu ku kaydiso qaab elektaroonig ah, waxaad ku codsan kartaa inaad ku hesho diiwaannada qaab elegtroonig ah.

Si aad u baarto oo aad nuqul uga samaysato diiwaankaaga caafimaad, u gudbi codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Marka la helo codsigaaga, Hay'addu waxay kuu soo diri doontaa Warbixinta Taariikhda Sheegashada, taas oo ah soo koobida taariikhda sheegashooyinkaaga oo qoraysa 2-di sano ee ugu danbeeyay. Haddii aad xaq u yeelatay dheefaha wax ka yar 2 sano, markaas Warbixinta Taariikhda Sheegashada waxay qori doontaa gebi ahaan muddada caymiskaaga.

Haddii aadan rabin in laguu soo diro Warbixinta Taariikhda Sheegashada, oo taa beddelkeeda aad rabto inaad baarto iyo/ama inaad hesho nuqulka qayb ka mid ah ama dhammaan diiwaankaaga sheegashooyinka ee qarsoon, kaas oo ay ku jiraan macluumaadka sida sheegashooyinkaaga dhabta ah iyo xaq u yeelashadaada/kaarkaaga diiwaangelinta oo aan ku xaddidnayn muddo 2 sano ah, fadlan ku sheeg midaas codsigaaga qoraalka ah, codsigaasna waa la tixgelin doonaa. Haddii aad codsato nuqulka warqada ah ee diiwaankaaga caafimaadka ee qarsoon ama qayb ka mid ah diiwaankaaga caafimaad, Hay'addu waxay kugu dallaci doontaa lacag dhan $0.25 bogiiba taas oo ah kharashka looga bixinayo nuqulka ee boostada laguugu soo dirayo jawaabta codsigaada. Diiwaanada lagu bixiyay qaab elegtaroonig ah ayaa sidoo kale lagu soo dallaci karaa kharash yar.

Xaalado xadidan qaarkood, Hay'ada ayaa diidi karto codsigaaga ah inaad baarto oo nuqul ka samaysato diiwaankaaga caafimaad. Haddii ay sidaas samayso Hay'addu, waxay kugu wargelin doontaa qoraal ahaan. Xaaladaha qaarkood, haddii laguu diido inaad hesho diiwaankaaga caafimaad, waxaad codsan kartaa in dib u eegis lagu sameeyo diidmada.

## Xuquuqda Inaad Codsato in Macluumaadkaaga Caafimaad Wax Laga Beddelo

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadkaaga caafimaad wax laga beddelo haddii aad aaminsan tahay in macluumaadka uu qalad yahay ama uusan dhamaystirnayn.

Si aad u codsato wax ka baddel, u dir codsi qoraal ah oo faahfaahsan Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Codsigan waa inuu sheego sababta(sababaha) uu ku qotomo codsigaaga. Hay'adda ayaa diidi karta codsigaaga haddii uusan qoraal ahayn, haddii uusan sheegin sabab taageerta codsiga, ama haddii aad codsatay inaad wax ka beddesho macluumaad:

- **Aysan diyaarin ama aan loo diyaarinin Hay'adda, marka laga reebo inaad Hay'adda siiso warbixin ah in qofka ama cidda samaysay macluumaadka aan hadda la heli karin si ay wax ka beddelka u sameeyaan;**
- **Aanan ku jirin macluumaadka caafimaad ee ay hayso ama loo hayo hay'adda;**
- **Aanan ku jirin macluumaaadka diiwaanka caafimaad ee laguu oggolaan doono inaad baarto oo aad nuqul ka samaysato; ama**
- **Sax ah oo dhamaystiran.**

Hay'adda ayaa qoraal ahaan kugu ogeysiin doonta haddii ay aqbashay ama diiday codsigaaga wax ka beddelka macluumaadkaaga caafimaad. Haddii Hay'adda ay diido codsigaaga, waxay kuu sharaxi doontaa sida aad u sii wadi karto inaad raadiso wax ka beddelka la diiday.

## Xuquuqda Inaad Ogaato Shaacinta Lagaa Sameeyay

Waxaad xaq u leedahay in laguu soo diro liiska shaacinta la sameeyay. Liiska shaacinta la sameeyay waa liiska macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'addu siisay dadka kale. Liiska wuxuu qorayaa shaacinta la sameeyay laga soo bilaabo 6 sanadood oo ka horeeyay taariikhda codsigaaga. Haddii aad rabto liiska shaacinta la sameeyay oo ka yar muddo 6 sanadood ah, fadlan ku sheeg midaas codsigaaga qoraalka ah ee aad ku dalbanayso liiska shaacinta la sameeyay.

Si aad u codsato liiska shaacinta la sameeyay, u dir codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Iyada oo laga jawaabayo codsigaaga liiska shaacinta la sameeyay, Hay'adda ayaa ku siin karta liiska la-hawlgalayaasha ganacsi ee sameeyo shaacinta noocaas ah iyaga oo matalaya Hay'adda, oo ay la socoto macluumaadka meelaha lagala xiriiro si aad si toos ah uga codsato liiska shaacinta la sameeyay la-hawlgalayaasha ganacsi oo kasta. Liiska shaacinta la sameeyay ee ugu horreya ee aad ku codsato muddo 12 bilood gudaheeda ah wuxuu ahaan doonaa laacag la'aan. Wixii ah liisaska shaacinta ee muddo 12 bilood gudaheeda ah oo dheeraad ah, waxaa laguugu soo dalaci doonaa kharashka bixinta liiska shaacinta la sameeyay, balse Hay'adda ayaa kuu sheegi doonta kharashka lagaaga baahan yahay ka hor inta aan la samaynin liiska shaacinta si aad u go'aansato haddii aad ka noqonayso codsigaaga ka hor inta aadan wax kharash ah galin.

## Xuquuqda Inaad Codsato Xadidaado

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in xaddidaado loo sameeyo macluumaadkaaga daryeelka caafimaad ee ay Hay'adda isticmaasho ama ay siiso dadka kale si loo fuliyo hawlaha daawaynta, lacag bixinta, ama daryeelka caafimaad. Waxa sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato in xaddidaado loo sameeyo macluumaadkaaga caafimaad ee ay Hay'addu siiso qof ku lug leh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga, sida xubin qoys ama saaxiib. Hay'adda guud ahaan loogama baahna inay oggolaato codsigaaga xaddidaadaha noocaas ah, waxayna Hay'adda joojin kartaa heshiiskeeda xaddidaadaha aad codsatay. Hay'adda waxaa looga baahan yahay inay oggolaato codsigaaga xaddidaadda haddii shaacin loo sameynayo ujeedooyinka lacag-bixin aawadood lacagtaas oo aad si buuxda u siisay daryeel bixiyaha caafimaad, jeebkaaga ka siisay.

Si aad u codsato xaddidaado, u gudbi codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA kaas oo sharaxaya macluumaadka aad rabto inaad xaddido, iyo sida iyo/ama cidda aad jeclaan lahayd in xaddidaada (aha) la saaro. Hay'adda ayaa qoraal ahaan kugu ogaysiin doonta haddii ay oggoshahay codsigaaga xaddidaadaha, iyo marka ay joojiso heshiiska xaddidaad kasta.

## Xuquuqda in La Codsado Wada Xiriir Lagu Sameeyo Qaab Kale ama Goob Kale oo Gooni ah

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in macluumaadkaaga caafimaad laguugu soo gudbiyo qaab qarsoodi ah qaab kale oo gooni ah ama goob gooni ah. Tusaale ahaan, waxaad codsan kartaa in lagaala soo xiriiro goobta shaqada ama boosta ahaan oo kaliya ama in laguugu siiyo macluumaadkaaga caafimaad meel gaar ah.

Si aad u codsato wada xiririka oo laguugula sameeyo qaab kale ama goob kale oo gooni ah, u dir codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA. Codsigaaga qoraalka ah waa inuu sheegaa

sababta(sababaha) codsigaaga, iyo qaababka ama goobaha goonida ah ee aad jeceshahay in laguugu soo diro macluumaadkaaga caafimaad. Haddii ay habboon tahay, codsigaagu waa inuu sheego in shaacinta dhammaan ama qayb ka mid ah macluumaadka ee lagu shaaciyo wada xiriir aan qarsoodi ahayn ay khatar ku gelin karto. Codsiyada macquulka ah ayaa la tixgelin doonaa ilaa inta suurtogalka ah, waxaana laguugu ogeysiin doonaa sida habboon.

## Xuquuqda in La Dacwoodo

Waxaad xaq u leedahay inaad uga dacwooto Hay'adda iyo Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga asturnaanta lagu xadgudbay. Si aad dacwad ugu gudbiso Hay'adda, u dir dacwo qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA.

Lagaagama aargoosan doono ama laguma takoori doono oo lagaagama joojin doono wax adeeg, lacag bixin, ama mudnaan ah inaad dacwad u gudbisay Hay'adda ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha aawadeed.

## Xuquuqda Inaad Hesho Nuqulka Ogaysiiska oo Warqad ah

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulka Ogaysiiskan oo warqad ah. Si aad u gudbiso codsiga noocaas ah, u dir codsi qoraal ah Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA ee kor ku xusan. Waxaad sidoo kale nuqul ku heli kartaa inaad codsi qoraal ah u gudbiso:

**Sargaalka Asturnaanta ee HIPAA**
**Oregon Homecare Workers Supplemental Trust**
**(Hay'adda Kaalmada Dheefaha Caafimaad ee**
**Shaqaalaha Daryeelka Guriga)**
**Carewell SEIU 503**
**PO Box 94253**
**Seattle, WA 98124-6553**

## Xuquuqda Inaad Hesho Ogaysiiska Jebinta

Waxaa laguu ogaysiin doonaa si degdeg ah haddii macluumaadkaaga caafimaad la jebiyo. Jebintu waxay timaadaa markay jiraan isticmaal ama shaacin aan la oggolayn sida uu qabo HIPAA taas oo wax u dhimaysa asturnaanta ama amniga macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyo. Ogeysiiska wuxuu ku siin doona macluumaadka soo socda: (1) sharaxaad kooban oo ku saabsan wixii dhacay, oo ay ku jiraan taariikhda jebinta iyo taariikhda ogaanshaha jebinta; (2) tallaabooyinka ay tahay inaad qaaddo si aad naftaada uga ilaaliso waxyeellada ka imaan karta jebinta; iyo (3) sharaxaad kooban oo ku saabsan tallaabooyinka la qaadayo si loo baaro jebinta, loo yareeyo khasaaraha, iyo si looga hortago jebinta dheeraadka ah. Fadlan ogow in shaacin kasta oo macluumaadka caafimaad oo aan la oggolaanin aysan ahayn jebin u baahan ogeysiin; Waxaa laga yaabaa inaan lagu ogeysiin haddii macluumaadka caafimaad ee la shaaciyay si waafi ah loo xafiday — tusaale ahaan, xogta kombayutarka oo sir ah oo aan la heli karin lambar sireed la'aan — ama haddii la go'aamiyo inay jirto suurtogalnimo hoose oo ah in macluumaadkaaga caafimaad la jabiyay.

## Isbaddelada Dhaqamada Asturnaanta ee Hay'adda

Hay'adda waxay xaq u leedahay inay beddesho dhaqamadeeda asturnaanta oo ay ka dhigto dhaqamada cusub kuwo dhaqan gal ka ah macluumaadka caafimaad ee ay hayso, oo ay ku jiraan macluumaadka caafimaad ee la sameeyay ama la helay ka hor taariikhda dhaqan galka isbaddelka iyo macluumaadka caafimaad ee ay heli doonto mustaqbalka. Haddii Hay'adda si dhab ah u beddesho mid ka mid ah dhaqamadeeda asturnaanta, waxay dib u eegi doontaa Ogeysiiskan waxayna kugu siin doontaa Ogeysiiska wax laga

baddelay, midkood Boostada Maraykanka ama iimayl, 60 maalmood gudahooda ka dib wax ka baddelida. Intaas waxa dheer, nuqulada Ogeysiiska wax laga baddelay ayaa lagu siin doonaa markaad qoraal ku codsato waxaana la dhigi doonaa Xafiiska Hay'adda si dib loogu eego.

## Taariikhda Dhaqan Galka

Ogeysiiskani wuxuu markii ugu horreysay dhaqan galay Luulyo 24, 2023. Ogeysiiskani wuxu dhaqangal ahaan doonaa ilaa iyo Hay'adda ay ka soo daabacdo Ogeysiis wax laga baddelay.




FLY
EN VI








SMART
LIKE


THINGS OUT IS
BETTER

Carewell SEIU 503